DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 25AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 26/9/25 | Lam. 04 |
|---|---|---|---|

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

### Xeerka Maamulka Dakhliga Dowladda Puntland

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Xeerka Maamulka Dakhliga Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharciga Lr. 004 ee 25-ka Sibteembar 2025, kuna saabsan Xeerka Maamulka Dekhliga Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/26/2025, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2025.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo in la abuuro Xeerka Maamulka Dekhliga Puntland, si loo helo hannaan sharci oo joogto ah oo dakhliga dowladda lagu soo xareeyo, isla markaana loo taageero horumarinta adeegyada bulshada, loona dhiso kalsoonida maaliyadeed ee Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Maamulka Dekhliga Dowladda Puntland.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**Tell:** +252-090-7794468; **E-mail:** dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; **Website:** www.plstate.so

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILLADA

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/26/2025 Garoowe, Axad Taariikh:- 10/08/2025

**Ku:-Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

Ujeeddo:-**Ansixinta Xeerka Maamulka Dakhliga Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad (2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/106/2023 ee July 03, 2023, kuna saabsan Xeerka Maamulka Dakhliga Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Muhiimadda ay leedahay samaynta Xeerka Maamulka Dakhliga Puntland.

**MARKUU ARKAY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 56-aad fadhigiisii 19-aad ee 19.07.2025 cod gacan taag ah ku ansixiyeen Xeerka Maamulka Dakhliga Puntland. Guntanka Fadhiga oo ahaa **(34)** Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol **(31)** Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen **(3)** Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Xeerka Maamulka Dakhliga Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

Tell:+252907799484 email: sg@parliament.pl.so/puntlandparliament@gmail.com website www.Puntlandparliament.com

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

---

# XEERKA MAAMULKA DAKHLIGA

**Garoowe, Luulyo 2025**

# TUSMO


**CUTUBKA 1AAD** .......................................................... 1

**QODOBO HORDHAC AH** .......................................................... 1

Qodobka 1-aad .......................................................... 1

Magaca Xeerka .......................................................... 1

Qodobka 2-aad .......................................................... 1

Erey Bixin .......................................................... 1

Qodobka 3-aad .......................................................... 3

Ujeeddooyinka Xeerka .......................................................... 3

Qodobka 4-aad .......................................................... 4

Mabaadi'da Guud ee Xeerka .......................................................... 4

Qodobka 5-aad .......................................................... 4

Baaxadda Xeerka .......................................................... 4

**CUTUBKA 2-AAD** .......................................................... 4

**QEEXIDDA IYO FASIRAADDA XEERARKA DAKHLIGA** .......................................................... 4

Qodobka 6-aad .......................................................... 4

Xeerar Dakhli .......................................................... 4

Qodobka 7-aad .......................................................... 5

Xeerarka Dakhli ee uu nidaaminayo Xeerkan .......................................................... 5

Qodobka 8-aad .......................................................... 5

Xiriirka ka dhaxeeya Xeerarka Dakhliga .......................................................... 5

Qodobka 9-aad .......................................................... 6

Heshiisyada Caalamiga ah .......................................................... 6

Qodobka 10-aad .......................................................... 6

Ficiladda Ka fogaanshaha Bixinta Cashuuraha .......................................................... 6

Qodobka 11-aad .......................................................... 7

Wareegtooyinka Rasmiga ah ee Waajibka ah .......................................................... 7

Qodobka 12-aad .......................................................... 9

Oggolaanshaha iyo Diidmada .......................................................... 9

Go'aano Cashuureed oo Gaar ah .......................................................... 9

**CUTUBKA 3-AAD** .......................................................... 10

**DANEEYAYAASHA** .......................................................... 10

Qaybta I ........ 10
Wasaaradda Maaliyadda ........ 10
Qodobka 13-aad ........ 10
Maamulidda Xeerarka Dakhliga ........ 10
Qodobka 14-aad ........ 10
Hawl u igmashada Saraakiisha Dakhliga ........ 10
Qodobka 15-aad ........ 10
Aqoonsiga Saraakiisha Dakhliga ........ 10
Qodobka 16-aad ........ 11
Awoodda Baarista iyo Soo Qabashada Saraakiisha Dakhliga ........ 11
Qodobka 17-aad ........ 12
Gacan ka helidda Khubaro ........ 12
Qodobka 18-aad ........ 13
Gacan Laga Helo Saraakiisha Hay'adaha Dawladda ........ 13
Qodobka 19-aad ........ 13
Ilaalinta Sirta ........ 13
Qodobka 20-aad ........ 14
Aqbalidda Dammaanadda ........ 14
Qaybta Labaad ........ 15
Ciidanka Booliska ee Ilaalada Cashuuraha ........ 15
Qodobka 21-aad ........ 15
Xaqiijinta Dambiyadda Dakhliga ........ 15
Qodobka 22-aad ........ 15
Saraakiisha iyo Askarta Booliska Cashuuraha ........ 15
Qodobka 23-aad ........ 16
Awoodaha iyo Waajibaadka Ciidanka ........ 16
Booliska ee Ilaalada Cashuuraha ........ 16
Qaybta Saddexaad ........ 17
Cashuur Bixiyeyaasha ........ 17
Qodobka 24-aad ........ 17
Cashuurta iyo Cashuur Bixiyeyaasha ........ 17
Qodobka 25-aad ........ 17
Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha ........ 17



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 26-aad .......... 18
Habraaca Samaynta Lambarrada .......... 18
Aqoonsiga Cashuur Bixinta .......... 18
Qodobka 27-aad .......... 19
Shahaadada Cashuur Bixinta .......... 19
Qodobka 28-aad .......... 20
Habraaca iyo Samaynta .......... 20
Shahaadada Cashuur Bixinta .......... 20
Qodobka 29-aad .......... 21
Kanoqoshada, Beddelida ama .......... 21
Wax Ka Beddelidda LAC ama SHCB .......... 21
Qodobka 30-aad .......... 21
Xuquuq u Lahaanshaha Macluumaad .......... 21
iyo Matalaad .......... 21
Qaybta Afraad .......... 22
La-taliyeyaasha Cashuuraha .......... 22
Qodobka 31-aad .......... 22
Ansixinta iyo Diiwaangelinta .......... 22
La taliyeyaasha Cashuuraha .......... 22
Qodobka 32-aad .......... 22
Xaddidaada Ujuurooyinka, .......... 22
Adeegyada Matalaadda iyo .......... 22
Talo siinta Cashuurta .......... 22
**CUTUBKA 4AAD .......... 23**
**XOG IS-DHAAFSIGA RASMIGA AH .......... 23**
Qodobka 33-aad .......... 23
Afka Rasmiga ah .......... 23
Qodobka 34-aad .......... 24
Lacagta Rasmiga ah .......... 24
Qodobka 35-aad .......... 25
Foomamka iyo Ogeysiisyada .......... 25
Qodobka 36-aad .......... 25
Dukumintiyada La Ansixiyey .......... 25

iyo Kuwa Cilladaysan ..... 25
Qodobka 37-aad ..... 26
Dukumintiyada Waraaqaha ah ..... 26
ee La Gaarsiiyo Wasaaradda ..... 26
Qodobka 38-aad ..... 26
Gaarsiinta Dukumintiyada Waraaqda ah ..... 26
Qodobka 39-aad ..... 27
Hannaanka Dukumintiga Elektaroonigga ah ..... 27
**CUTUBKA 5-AAD ..... 29**
**ILAALINTA IYO BIXINTA MACLUUMAADKA ..... 29**
Qaybta Koowaad ..... 29
Ilaalinta Dukumintiyada ..... 29
Qodobka 40-aad ..... 29
Ilaalinta Dukumintiyada ..... 29
Qaybta Labaad ..... 30
Macluumaadka Sida Joogtada ah Loo Bixiyo ..... 30
Qodobka 41-aad ..... 30
Cashuur Celinta (Tax-Return) ..... 30
Qodobka 42-aad ..... 31
Gacan siinta Diyaarinta Cashuur celinta ..... 31
Qodobka 43-aad ..... 32
Kordhinta Waqtiga La Geynayo Cashuur celinta ..... 32
Qodobka 44-aad ..... 33
Dib-U-dhac Cashuur -Celin ..... 33
Qodobka 45-aad ..... 33
Cashuur celin iyo Macluumaad Kale oo Khaldan ..... 33
Qaybta Saddexaad: ..... 34
Macluumaad bixinta Khasabka ah ..... 34
Qodobka 46-aad ..... 34
Helidda Macluumaad iyo Gelidda Hantida ..... 34
Qodobka 47-aad ..... 36
Xuquuqaha iyo Waajibaadyada Mulkiilaha ..... 36
Qodobka 48-aad ..... 37



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Ogeysiiska Lagu Dalbanayo Macluumaad ........ 37
Qodobka 49-aad ........ 38
Hanti-dhawr Cashuureed ........ 38
**CUTUBKA 6-aad ........ 39**
**QIIMAYNTA CASHUURAHA WAAJIBAY ........ 39**
Qodobka 50-aad ........ 39
Qiimeynta iyo Isqiimeynta ........ 39
Qodobka 51-aad ........ 40
Qiimayn Hordhac ah iyo Dammaanad ........ 40
Qodobka 52-aad ........ 41
Qiimayn Wax-ka-beddel Yar Lagu Sameeyey ........ 41
Qodobka 53-aad ........ 42
Wargelinta Qiimeynta ........ 42
**CUTUBKA 7-AAD ........ 42**
**XALLINTA KHILAAFADKA CASHUURAHA ........ 42**
Qodobka 54-aad ........ 42
Go'aamada Cashuurta ........ 42
Qodobka 55-aad ........ 44
Cabashada ka dhanka ah ........ 44
Go'aan Cashuureedka Wasaaradda ........ 44
Qodobka 56-aad ........ 45
Garmaqalka Guddiga Xallinta Khilaafaadka ........ 45
Qodobka 57-aad ........ 46
Rafcaan ka dhan ah Go'aanka ........ 46
Guddiga Xallinta Khilaafaadka ........ 46
Qodobka 58-aad ........ 46
Dhismaha Guddiga ........ 46
**Qodobka 59-aad** ........ 47
**Shuruudaha Magacaabista** ........ 47
**Qodobka 60-aad** ........ 48
**Dhaarinta Iyo Dhawrsanaanta** ........ 48
**Xubnaha Guddiga** ........ 48
**Qodobka 61-aad** ........ 48

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

**Awoodaha Iyo Waajibaadka Guddiga** ........ 48
**Qodobka 62-aad** ........ 50
**Maamulka Hawlaha Guddiga** ........ 50
Qodobka 63-aad ........ 51
Xilka Ka Qaadisda Guddiga ........ 51
**CUTUBKA 8-AAD** ........ **52**
**BIXINTA IYO SOO CELINTA CASHUURTA** ........ **52**
Qaybta Koowaad ........ 52
Cashuur bixinta Joogtada ah ........ 52
Qodobka 64-aad ........ 52
Waqtiyada La Bixinayo Cashuuraha ........ 52
**Qodobka 65-aad** ........ 53
**Kordhinta Waqtiga Lagu Bixinayo Cashuur** ........ 53
Qodobka 66-aad ........ 53
Qaabka Loo Bixinayo Cashuurta ........ 53
Qodobka 67-aad ........ 54
Kala Horreynta Cashuur Bixinta ........ 54
Qodobka 68-aad ........ 54
Xisaabaha Cashuurta ee Elektaroonigga ah ........ 54
**Qaybta Labaad** ........ 55
**Ka soo qaadista Cashuur bixiyaha Cashuur ku Baaqatey** ........ 55
**Qodobka 69-aad** ........ 55
**Ku Dacweynta Cashuur Aan La Bixin** ........ 55
Qodobka 70-aad ........ 55
U Rahmashada Iyo Xaddiga Ku Dalicidda ........ 55
Hantida Lagu Dalacayo Rahanta ........ 55
**Qodobka 71-aad** ........ 56
**Gacan ku Dhigidda Hantida La Rahmey** ........ 56
**Qodobka 72-aad** ........ 58
**Iibinta Hanti Rahman** ........ 58
Qodobka 73-aad ........ 60
Fasaaxadda Hanti Rahaman ........ 60
Qodobka 74-aad ........ 60



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Xanibidda Qof ........................................................ 60
Qodobka 75-aad ........................................................ 61
Xannibidda Hanti ........................................................ 61
Qaybta Saddexaad ........................................................ 62
Ka soo celinta Cid Saddexaad ........................................................ 62
Qodobka 76-aad ........................................................ 62
Maareeyeyaasha Hay'adaha/Shirkadaha ........................................................ 62
Qodobka 77-aad ........................................................ 63
Sii Maamule Hantiyeed ........................................................ 63
Qodobka 78-aad ........................................................ 65
Cid Saddexaad ee Qaameysan ........................................................ 65
Qodobka 79-aad ........................................................ 66
U hoggaansamidda Wargelinta ........................................................ 66
Qodobka 80-aad ........................................................ 68
Wakiillada Dadka aan Degganeyn Dalka ........................................................ 68
**CUTUBKA 9-aad ........................................................ 70**
**CASHUUR DHIMIS, KA CAFIN IYO DIB-UCELIN ........................................................ 70**
Qodobka 81-aad ........................................................ 70
Xadadka Cashuur Dhimista ........................................................ 70
Qodobka 82-aad ........................................................ 71
Ka Warbixinta Cashuur Dhimista ........................................................ 71
Qodobka 83-aad ........................................................ 72
Cashuur ka Cafin ........................................................ 72
Qodobka 84-aad ........................................................ 72
Codsi Cashuur Dib-u-Celin (Tax Refund) ........................................................ 72
Qodobka 85-aad ........................................................ 73
Go'aanka Laga Gaaro Codsi Cashuur-dib-ucelin ........................................................ 73
Qodobka 86-aad ........................................................ 74
Bixinta Cashuur Dib u Celinta (Tax Refund) ........................................................ 74
**CUTUBKA 10-aad ........................................................ 75**
**DEMBIYADA IYO GANAAXYADA MADANIGA Ah ........................................................ 75**
Qaybta Koowaad ........................................................ 75
Ganaaxyada Madaniga ah ........................................................ 75

Qodobka 87-aad........75
Ganaaxa Bixin La'aanta Cashuurta........75
Qodobka 88-aad........75
Ganaaxa Hoos u Dhigidda Cashuurta Dakhliga........75
Qodobka 89-aad........76
Ganaaxa Ilaalin La'aanta Dukumintiyada........76
Qodobka 90-aad........76
Ganaaxa Xareyn La'aanta Cashuur Celinta (Return)........76
Qodobka 91-aad........77
Ganaaxa Bayaan Been ah ama Marin habaabin ah........77
Qodobka 92-aad........78
Ganaaxa Been ama Marin Habaabin la siiyo Cid Saddexaad........78
Qodobka 93-aad........78
Ganaaxa Ka Gacansiinta iyo Ku Dhiirigelinta........78
Qodobka 94-aad........78
Qiimeynta Ganaaxyada Madaniga ah........78
Qaybta Labaad........79
Fal Dembiyeedyo........79
Qodobka 95-aad........79
Gelidda Fal Dembiyeedyada........79
Qodobka 96-aad........80
Fal-Dembiyeedka u Hoggaansamid La'aanta Xeer Dakhli........80
Qodobka 97-aad........80
Fal dembiyeedka la Dhuumashada........80
iyo Bixin La'aanta Cashuurta........80
Qodobka 98-aad........81
Fal Dembiyeedka Bixinta........81
Caddaymo Been ah ama Marin habaabin ah........81
Qodobka 99-aad........81
Fal Dembiyeedka Is hortaagidda Maamul Cashuureed........81
Qodobka 100-aad........82
Fal-Dembiyeedyada ay ku Kacaan........82
Shakhsiyaadka Idman iyo Kuwa Aan Idmanayn........82

Qodobka 101-aad ........ 83
Maareeyeyaasha Hay'adaha ........ 83
Qodobka 102-aad ........ 83
Fal-Dembiyeedka Ku Gacan siinta iyo ku Dhiirigelinta ........ 83
Qodobka 103-aad ........ 84
Baarista, Gudbinta iyo Isugeynta Fal-dembiyeedyada ........ 84
**CUTUBKA 11-aad ........ 86**
**HABRAACYADA DACWADAHA ........ 86**
Qodobka 104-aad ........ 86
Tallaabooyinka Bilaabidda Dacwadaha Cashuuraha ........ 86
Qodobka 105-aad ........ 87
Habraacyada Dacwadaha Badan ........ 87
Qodobka 106-aad ........ 88
Goobta Lagu Qaadayo Garmaqalka Dacwadda ........ 88
Qodobka 107-aad ........ 89
Imaanshaha Sarkaal Dakhli Maxkamadda Horteeda ........ 89
**Qodobka 108-aad** ........ 89
**Dukumintiyada Caddeyn ahaan Loo Aqbali Karo** ........ 89
**Qodobka 109-aad** ........ 90
**Culayska Caddeynta** ........ 90
Qodobka 110-aad ........ 91
Go'aamada Cashuuraha iyo Saameynta Dacwadaha ........ 91
**CUTUBKA 12-aad ........ 91**
**GUNAANNAD ........ 91**
Qodobka 111-aad ........ 91
Xeer Nidaamiye ........ 91
Qodobka 112-aad ........ 91
Burin ........ 91
Qodobka 113-aad ........ 92
Dhaqan-galka Xeerka ........ 92



GOLAHA… STATE CENTRAL … PUNTLAND

## CUTUBKA 1AAD
## QODOBO HORDHAC AH

### Qodobka 1-aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Maamulka Dakhliga Dawladda Puntland.

### Qodobka 2-aad
### Erey Bixin

Xeerk an gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan: -

| Lr. | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 2. | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliya. |
| 3. | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Maamulka Dakhliga Puntland. |
| 4. | **Wasaarad** | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda. |
| 5. | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. |
| 6. | **Saraakiisha Dakhliga** | Waxaa loola jeedaa shaqaale dawladeed ama hay'adeed oo u xil-saaran ururinta, ilaalinta, kormeerka ama maaraynta dakhliga soo gala Dawladda. |
| 7. | **Qiimeyn** | Waxaa loola jeedaa go'aaminta qaddarka cashuurta ee cid laga qaadayo oo lagu go'aamiyey xeer dakhli. |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

| | | |
|---|---|---|
| **8.** | **9. Is-qiimeyn** | Waxaa loola jeedaa qiimeyn asal ah oo waafaqsan xeer dakhli oo uu sameeyey qof cashuur bixiye taasoo aan ahayn qiimeyn ay sameysey Wasaaraddu. |
| **10.** | **Dakhli** | Waxaa loola jeedaa lacag ka timid cashuuro, ajuurooyin, hanti dawladdeed oo la gaday, la xaraashay ama la kireeyey, deeqaha, ganaax, ama lacago kale uu xeerkani soo rogay ama xeer kale cayimay. |
| **11.** | **Dukumenti** | Waxaa loola jeedaa qoraal rasmi ah oo ah warqad ama faylal elektaronik ah oo lagu diyaariyey xog, heshiis, sharci ama go'aan la qoray. |
| **12.** | **Hay'ad** | Waxaa loola jeedaa urur rasmi ah oo leh mas'uuliyad gaar ah wuxuu noqon karaa mid dawladeed, mid gaar loo leeyahay ama mid caalami ah kuna shaqeeya xeerar iyo hadaf cayiman. |
| **13.** | **Cashuur** | Waxaa loola jeedaa waajibaad dhaqaale uu xeer dakhli farayo in muwaadiniinta iyo shirkaduhu bixiyaan si loogu maalgeliyo adeegyada iyo horumarka dadweynaha. |
| **14.** | **Cashuur bixiye** | Waxaa loola jeedaa qof ama shirkad haysata dakhli, hanti ama dhaqdhaqaaq dhaqaale oo laga rabo inuu ka bixiyo cashuur uu ku waajibiyey xeer dakhli. |
| **15.** | **Xannibaad** | Waxaa loola jeedaa ficil ama xaalad lagu joojiyo, lagu celiyo, ama lagu hakiyo waxqabad, dhaqdhaqaaq, ama xorriyad si ku meel gaar ah |



STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND

| | | |
|---|---|---|
| | | ama joogto ah iyadoo ay sabab u tahay sharci, amni, xaalad degdeg ah, ama go'aan maamul. |
| 16. | **Rahan** | Waxaa loola jeedaa hanti (sida guri, gaari, ama shay kale) oo qof ku xiro deyn uu qaaday ama ballan uu galay, si haddii uu ka baaqdo bixinta ama fulinta, hantidaas loo isticmaalo daboolidda khasaaraha. |
| 17. | **SHCB** | Waxaa loola jeedaa Shahaadada Cashuur-Bixinta. |
| 18. | **LAC** | Waxaa loola jeedaa Lambarka Aqoonsiga Cashuur bixiyaha. |
| 19. | **Lacag** | Waxaa loola jeedaa shilin lagu kala iibsado badeecooyin iyo adeegyada kale ama loo adeegsado kayd ama deyn. |
| 20. | **Cashuur dhimis** | Waxaa loola jeedaa hoos u dhigis lagu sameeyo qadarka cashuurta laga rabo qof ama hay'ad, sababo sharciyeed ama dhiirrigelin dhaqaale dartood. |
| 21. | **Cid gaar ah** | Waxaa loola jeedaa xubnaha hay'ad iyo shakhsiyaad kala duwan oo Wasaaraddu u aragto in ay isku xaalad ku sugan yihiin marka laga eego codsi la xiriira qodobada gaarka ah ee xeer dakhli. |

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerka Maamulka Dakhliga waa: -

1. Inuu taabo-geliyo oo xaqiijiyo ujeeddooyinka Qodobka 40-aad faqraddiisa (x) ee Dastuurka Dawladda Puntland oo qof kasta ku waajibinaya bixinta cashuuraha.
2. Inuu sahlo oo fudeydiyo hannaanka dakhli ururinta Dawladda Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

3. Inuu si cad u qeexo habka dakhli ururinta cashuuraha.
4. Inuu haqab-tiro baahida loo qabo in la helo xeer si guud u wada maamula xeerarka dakhli ee Dawladda Puntland.
5. Inuu ku dhiirigeliyo muwaadiniinta Puntland bixinta cashuuraha ku waajibey.

## Qodobka 4-aad
## Mabaadi'da Guud ee Xeerka

Mabaadi'da guud ee xeerkan waa:

1. In xeerkan si siman loogu fuliyo dhammaan cidkasta oo ay cashuuri ku waajibtay, muwaadin ama ajnabi.
2. In Wasaaradda Maaliyaddu ay noqoto mid u madax-bannaan shaqadeeda.
3. In nidaamka dakhli ururintu uu noqdo mid ku dhisan caddaalad iyo hufnaan, si loo kasbado kalsoonida cashuur bixiyaha.
4. In la tayeeyo hannaanka dakhli ururinta Dawladda Puntland.

## Qodobka 5-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan gayiga/dhulka dawlada Puntland, waxaana lagu maamulaya dakhliga guud ee Dawladda Puntland.

# CUTUBKA 2-AAD
# QEEXIDDA IYO FASIRAADDA XEERARKA DAKHLIGA
## Qodobka 6-aad
## Xeerar Dakhli

Dakhliyadan soo socda waxaa lagu soo saarayaa xeerar wada jira ama u gaar ah, taasoo ay meel marin doonaan Golayaasha Dawladdu, xeerarkaas oo kala ah:-

1. Cashuuraha furdooyinka (Customs Duties) iyo Cashuuraha wax soo saarka (Excise duties).
2. Cashuurta Dakhliga qofka (Personal Income Tax).
3. Cashuurta Dakhliga Shirkaddaha (Corporate Income Tax).
4. Cashuurta Dheefta Hantidda (Capital gains Tax).



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

5. Cashuur Ka reebid (Withholding tax).
6. Cashuuraha gadista (sales tax).
7. Cashuurta diiwaangelinta (Registration Tax).
8. Cashuurta waddo marista (Road Tax).
9. Cashuurta Moorka (Stamp duties).
10. Dhammaan cashuuraha waafaqsan xeerarka dakhliga.
11. Ajuurooyinka iyo shatiyadda.
12. Ganaaxyadda.

## Qodobka 7-aad
## Xeerarka Dakhli ee uu nidaaminayo Xeerkan

Xeerkan wuxuu maamulayaa oo nidaaminayaa dhammaan cashuuraha dakhli ee ku xusan Qodobka 6-aad ee Xeerkan.

## Qodobka 8-aad
## Xiriirka ka dhaxeeya Xeerarka Dakhliga

1. Xeerkan waxaa lala akhrinayaa mid kasta oo ka mid ah xeerarka kale ee dakhliga.
2. Erey kasta oo aan lagu qeexin xeerkan gudihiisa wuxuu macnihiisu waafaqsan yahay macnaha ereygaas loogu adeegsadey xeerarka kale ee dakhliga.
3. Iyadoo laga duulayo xaddidaadaha sharci ee xeerkani jideeyo, waxaa awoodaha Wasaaradda ee ku cad xeerkan loo gudanayaa si waafaqsan xeerarka kale ee dakhliga, iyadoo ay u dheeryihiin awoodaha kale ee ku cad xeerarka kale ee dakhliga.
4. Marka Sarkaal dakhli uu dhaqan gelinayo qodobada xeerkan wuxuu si wadajir ah u dhaqan gelin karaa ujeeddooyinka xeerarka kale ee dakhli.
5. Marka sarkaal dakhli uu helo xog isagoo si sharci ah u gudanaya waajibaadkii uu saarey xeer dakhli, waxaa Wasaaraddu isla xogtaas u adeegsan kartaa xaqiijinta ujeeddooyinka xeerarka kale ee dakhliga.

## Qodobka 9-aad
## Heshiisyada Caalamiga ah

1. Heshiis caalami ah waa is afgarad ama noocyo kale oo heshiis oo ay si buuxda u wada galeen Soomaaliya iyo dawlad ama dawlado ajnebi ah, Puntland na ay qayb ka tahay. Heshiisku waa inuu xaqiijiyo:-
   b) In meesha laga saaro labo jeer Cashuuris (double taxation) iyo ka hortegidda Cashuur ka fogaanshaha iyo Cashuur la dhuumashada.
   t) Gacan iska siinta maamulidda ama dhaqangelinta xeerarka cashuuraha, taasoo ay ka mid tahay is-dhaafsiga xogta, sameynta hantidhowr cashuureed, gacan iska siinta soo celinta cashuuraha lala baxsadey iyo wadaagidda dukumintiyada.
2. Markay iska hor yimaadaan qodobada ku jira heshiiska caalamiga ah iyo qodobada Xeerka dakhliga waxaa la qaadanayaa oo la tixgelinayaa qodobada Heshiiska caalamiga ah, waase in heshiiska caalamiga ah loo qoraa markiisa hore hab aaney iska hor imaaneyn nuxurka xeerarka dakhliga.
3. Heshiisyada ay wada galaan Soomaaliya iyo dawlad ama dawlado ajnebi ah, Puntland-na qayb ka tahay, ayna ka dhashaan arrimo la xiriira cashuur yareyn ama kordhin waxaa hirgelinteeda yeelanayaa Wasaaradda Maaliyadda Puntland, kaddib marka uu ansixiyo Golaha Wakiilladu.

## Qodobka 10-aad
## Ficiladda Ka fogaanshaha Bixinta Cashuuraha

1. Wasaaraddu waxay u yeeraysaa qof walba oo ay u arkaan in uu ku kacay ficillo ka faa'iideysi ah oo uu kaga fogaanayo bixinta cashuuraha.
2. Marka laga soo tago sida ku cad xeerarka dakhliga, u yeerista Wasaaraddu waxay micno samaynaysaa marka qofka lagu leeyahay cashuurta loo saxo sida ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon tahay in lagu bixiyo cashuurta ku baaqatey.
3. Wargelintu waa iney noqotaa mid qoraal ah, taasoo si cad u sheegaysa cashuurta faa'iidada ah ee baaqanaysa, ficillada iyo habka ay ku dhisan tahay

iyo wax ka beddelka Wasaaradda, wargelintana waxaa lagu lifaaqayaa wargelinta qiimeynta.

4. La taliye cashuureed ama qareen si toos ah ama si dadban u dhiirigeliya ama uga qayb-qaata ficil looga dan leeyahay in cashuur cid loogu baajiyo waa in uu ficiladaas u soo sheegaa Wasaaradda. Xeer-nidaamiyeyaal ayaa cayimi kara qaabka loo soo sheegayo oo fududeyn doona diiwaangelinta ficilladaas.
5. Qodobkan dhexdiisa: "ficilada ka fogaanshaha bixinta cashuurta" wuxuu macnaheedu yahay: -
   b) Ficil hadafkiisa ugu weyn ama mid ka mid ah ahdaaftiisa ugu weyn ay tahay in qofku ka helo faa'iido cashuureed.
   t) Ficilkaa faa'iidada ugu weyn ee laga rajeynayo in laga helo ay tahay in ficiladaasi ay faa'iido cashuureed u tahay qof uun.
6. Shuruudda ku xusan farqadda 5-aad waxay ficil cashuur ka fogaansho noqonayaan keliya haddii ay la xiriiraan ku takrifal ama ku xadgudub qodobo ka mid ah xeerarka dakhliga.
7. "Faa'iido cashuureed " waxaa macnaheedu yahay: -
   b) Ka fogaanshaha, yareynta ama dib u dhigista cashuur cid lagu leeyahay.
   t) Kordhinta lacag cashuur oo ay tahay in loo soo celiyo.
   j) Ka hortag ama carqaladeyn cashuur qaadis.

## Qodobka 11-aad
## Wareegtooyinka Rasmiga ah ee Waajibka ah

1. Wasiirka ayaa soo saari kara wareegtooyin rasmi ah oo lagu faah-faahinayo xeerarka dakhliga. ujeeddada laga leeyahay awooddan waa in la xaqiijiyo in mar walba si isku mid ah loo maamulo xeerarka dakhliga iyo in la jiheeyo shakhsiyaadka ay saamaynta ku yeelanayaan xeerarkaas, kuwaasoo ay ka mid yihiin saraakiisha dakhliga.
2. Wareegtooyinka rasmiga ah waxay khuseyn karaan hal xeer dakhli ama wax ka badan, wuxuuna Wasiirku awood u leeyahay inuu soo saaro dhowr wareegtooyin oo khuseeya hal xeer dakhli.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

3. Wareegtada rasmiga ah waxay waajib ku noqonaysaa Wasaaradda, laga bilaabo wakhtiga la soo saaro ilaa inta laga burinayo, mana khuseyso shakhsiyaadka kale ee uu saameeyey xeer kale oo dakhli.
4. Arrimaha iyo nuxurka wareegtada rasmiga ah ku qoran lagama hor imaan karo, laakiin qofkii dood ka qaba wuxuu ka caban karaa go'aanka cashuurta ee ku cad wareegtada rasmiga.
5. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa wareegtooyin rasmi ah, iyadoo ogeysiiska wareegtada lagu baahinayo meelaha iyo mareegaha ay Wasaaraddu wax ku baahiso.
6. Wareegtada rasmiga ah waa iney ku caddahay iney tahay wareegto rasmi ah, waana iney leedahay tirsi ama tixraac iyo mawduuc/ujeeddo lagu aqoonsado wareegtada.
7. Wareegto rasmi ah waxay dhaqan-gelaysaa taariikhda lagu cayimo ogeysiiska waxaana haddii aan taariikh loo cayimin ay dhaqan-gelaysaa laga bilaabo taariikhda lagu baahiyo meelaha loogu talagalay.
8. Wasaaraddu waa in ay wareegtooyinka rasmiga ah ka dhigaan kuwo si guud dadweynuhu u heli karaan.
9. Wasaaraddu waxay wax ka beddel ku sameyn kartaa ama burin kartaa wareegto rasmi ah, iyadoo ogeysiiska wax ka beddelka ama burinta ku baahinaysa meelaha iyo mareegaha Wasaaraddu wax ku baahiso. Wareegto rasmi ah waxaa wax laga beddeli karaa ama loo burin karaa gebi ahaanteed ama qaybo ahaanteed.
10. Wareegtada rasmiga ah waxay buraysaa hadba xaddiga ay iska khilaafaan xeer wareegtada kaddib la ansixiyey.
11. Wareegtada rasmiga ah ee wax laga beddelay ama qaybo kamid ah la buriyey waxaa lagu sii maamulayaa hawlihii bilowdey ka hor inta aan wax laga beddelin ama la burin wareegtada.

## Qodobka 12-aad
## Oggolaanshaha iyo Diidmada
## Go'aano Cashuureed oo Gaar ah

1. Qof ayaa dalab qoraal ah u gudbisan kara Wasaaradda si go'aan gaar ah looga gaaro sida xeer dakhli loogu maamulayo arrimo la soo jeediyey ama haddaba jira oo la xiriira qof ama shakhsiyaad ama koox gaar ah oo bulshada ka mid ah.
2. Marka Wasaaraddu ay hesho codsiga, waxay soo saari kartaa go'aan gaar ah oo tilmaamaya halka ay maamulka cashuuruhu ka taagan yahay iyo sida xeerarka dakhligu uu u saameynayo arrimaha wax laga weydiiyey ee go'aan iney ka soo saaraan laga codsadey.
3. Go'aan gaar ah ayaa lagu saleyn karaa arrimo badan oo sida loo maamulayo laga codsadey Wasaaradda, waxaana go'aanadaasi khuseyn karaan sida loo fulinayo hal xeer dakhli ama ka badan.
4. Arrimaha iyo nuxurka go'aanka gaarka ah lagama hor imaan karo, laakiin qofku wuxuu cabasho ka muujin karaa go'aanka cashuureed ee lagu jideeyey go'aanka gaarka ah.
5. Wasaaraddu waxay diidi kartaa codsi la xiriira go'aan gaar ah haddii:-
   b) Arrimaha uu khuseeyo codsigu horey go'aan looga gaarey.
   t) Wasaaraddu haddii: -
      i. Ay horay u bilaabeen baaritaan cashuureed oo daboolayo arrimaha codsadaha.
      ii. Codsadaha qoraal lagu ogeysiiyey ka hor codsiga in lagu talo-jiro in ay bilaabi doonaan baaritaan noocaas ah.
   j) Haddii ay u arkaan in wareegto rasmi ah oo jirta ay si habboon uga hadleyso arrimahan.
   x) Codsigu uu yahay mid aan munaasab aheyn.
   Kh) Arrimaha aan la fulin isla markaana loo hayo daliillo caqli gal ah oo lagu aamini karo in aan la fulin doonin.

d) Codsaduhu uusan Wasaaradda u soo gudbin macluumaad ku filan in uu go'aan soo saaro.

r) Wasaaraddu haddii ay u aragto in uusan codsigani macquul ahayn in wax laga qabto marka la eego imkaaniyaadka/awoodaha loo baahan yahay in loo hoggaansamo iyo wax kasta oo Wasaaraddu ay u aragto in ay muhiim yihiin.

6. Wasaaraddu waxay codsadaha qoraal ahaan ugu wargelinaysaa diidmada la diidey go'aan gaar ah in la soo saaro.

## CUTUBKA 3-AAD
## DANEEYAYAASHA

### Qaybta I

### Wasaaradda Maaliyadda

### Qodobka 13-aad

### Maamulidda Xeerarka Dakhliga

Wasaaradda ayaa ka mas'uul ah maamulidda iyo dhaqangelinta xeerarka dakhliga si waafaqsan qodobada Xeerarka dakhliga.

### Qodobka 14-aad
### Hawl u igmashada Saraakiisha Dakhliga

1. Wasaaraddu waxay hawlaha la xiriira xeerarka dakhliga u igmanaysaa saraakiisha Dakhliga sida ku xusan Xeerka Maamulka Dakhliga. Wasiirka hawlahaas uma igman karo qof kale, xataa haddii qofka uu yahay khabiir ama sarkaal dawladeed oo gacan siinaya.
2. Xaaladaha qaar, sarkaal dakhli wuxuu adeegsan karaa awoodda uu xeerka dakhligu jidaynayo haddii sarkaalka uu heer darajo gaar ah uu joogo ama si gaar ah loogu oggolaadey in uu adeegsan karo awoodahaas.

### Qodobka 15-aad
### Aqoonsiga Saraakiisha Dakhliga

1. Wasaaraddu waa in ay kaar aqoonsi u samaysaa sarkaal dakhli oo kasta, kaarka aqoonsiga waa in uu lahaadaa calaamadda Wasaaradda, kuna dheggan yahay

sawirka sarkaalka dakhliga waana iney ku caddahay darajada sarkaalka dakhliga.

2. Qofka la macaamilaya sarkaal dakhli wuxuu codsan karaa in sarkaalku uu sheego magaciisa iyo darajadiisa. Qofka si toos ah ula tacaamulaya sarkaal dakhli wuxuu codsan karaa in sarkaalka uu tusiyo kaarka aqoonsiga.

## Qodobka 16-aad
## Awoodda Baarista iyo Soo Qabashada Saraakiisha Dakhliga

1. Sarkaal dakhli oo si gaar ah loogu oggolaadey ujeeddada qodobkan, wuxuu u gudbin karaa garsoore maxkamadeed sababo sharci oo lagu qanci karo oo uu sarkaalka dakhli u aaminsan yahay in qof: -
   b) Si ku talagal ah u galey fal-dembiyeed uu tilmaamey xeer dakhli.
   t) Baxsan doono ka hor inta aan qofka lagu soo oogin ama lagu qaadin maxkamadeyn fal-dembiyeed oo uu tilmaamey xeer dakhli.
   j) Baabi'in doono, wax u dhimayo ama si kale u baabi'inaayo caddeyn fal-dembiyeed uu tilmaamey xeer dakhli.
2. Haddii uu ku qanco in xaaladdu ay tahay mid halis adag gelineysa soo qaadista cashuurta, garsooruhu wuxuu bixin karaa amar qoraal ah oo uu sarkaal dakhli ku siinayo awoodahan soo socda. Sarkaalka dakhliga waa in ay la socdaan boolisku marka uu awoodahaas ku dhaqangelinayo, waxaana booliska ay soo xiri karaan qofka ku lug leh. Awooduhu waxay yihiin: -
   b) Inuu galo dhismayaal ama goob iyo in uu xannibo hantida laga heli karo caddeyn tilmaameysa in la galey fal-dembiyeed uu tilmaamey xeer dakhli.
   t) In uu xakameeyo, baaro gudaha iyo xayndaabka dhisme, goob, baabuur ama hanti kale oo uu sarkaalka dakhligu aaminsan yahay, isagoo u haysta in ay ku jirto caddeynta noocaas ah ee uu doonayo.
   j) In uu su'aalo weydiiyo oo uu baaro ama sababo in su'aalo la weydiiyo ama la baaro qof sarkaalka dakhligu aaminsan yahay, isagoo u haysta sababo macquul ah in qofkaasi galey dembi uu tilmaamey xeer dakhli ama ay gacanta ugu jirto hantida lagu xusey faqradda 2-aad xarafka (b) ee qodobkan.

x) In isagoo u adeegsanaya awood macquul ah ujeeddooyinka ku xusan faqradaha 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkan oo ay ka mid tahay in uu jebiyo dhismayayaasha, goobta ama hantida uu si macquul ah u aaminsan yahay in ay ku jirto caddeynta lagu xusay faqradda 2-aad xarafka (b) ee Qodobkan.

3. Ka dib marka uu xakameeyo hanti lagu xusey faqradda 2-aad, sarkaalka dakhliga waa in uu wargelin qoraal ah gaarsiiyaa dadka gacanta ku haya hantida. Haddii dadka hantida gacanta ku haya ay ka badan yihiin hal qof waxaa kaga filan inuu wargeliyo mid kamida dadka hantida gacanta ku haya. Marka aan la heli karin dadka hantida gacanta ku haya midkoodna, sarkaalka dakhligu waa in uu wargelinta uga soo tagaa dhismayaasha ama goobta xakameyntu ay ka dhacayso. Wargelintu waa inay:
   b) Aqoonsataa, ayna taxdaa hantida la xakameeyey.
   t) Sheegtaa in hantida loo xakameeyey si waafaqsan Qodobkan iyo sababta loo xakameeyey.
   j) Sheegtaa shuruudaha lagu sii deynayo oo ay ku jirto rahanta loo baahan yahay iyo shuruudaha lagu xaraashayo hanti kasta oo gacanta lagu dhigay.
4. Qofka baaritaanka lagu samaynayo sida ku cad faqradda 2-aad xarafka (j) ee qodobkan waxaa baari kara oo kaliya qof la jinsi ah.
5. Sarkaal dakhli wuxuu adeegsan karaa awoodda uu siiyey garsoore maxkamadeed si waafaqsan Qodobkan, iyadoo ay la socdaan awoodaha kale oo xeerkan siiyey sarkaalka dakhliga oo ay ka mid yihiin kuwa lagu xusay Qodobka 46-aad.

## Qodobka 17-aad
## Gacan ka helidda Khubaro

1. Wasaaraddu waxay hawl gelin kartaa khubaro gacan ka siiya saraakiisha dakhliga hawlahooda, la shaqeyntu waxay ku saleysnaan kartaa shuruudaha ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon yihiin, gacansiinta uu bixiyo khabiir waa in uu kormeeraa sarkaal dakhli oo loo igmadey hawshaas.

2. Qofku wuxuu xaq u leeyahay in uu diido in uu si toos ah u la macaamilo khabiir, laakiin waa in uusan carqaladeyn khabiir gacan siinaya sarkaal dakhli.
3. Qofku wuxuu xaq u leeyahay in uu cabasho u soo gudbiyo Wasaaradda, taasoo uu ku sheegayo in la tacaamulka khabiir gaar ah ay la xiriirto dano iska hor imaanaya. Wasaaraddu waa in ay go'aan ka gaartaa cabasho kasta, waxaana go'aanka Wasaaradda ee la xiriira in la tacaamulka uu sii soconayo iyo in uu noqonayo mid gabagebooba.

## Qodobka 18-aad
## Gacan Laga Helo Saraakiisha Hay'adaha Dawladda

Wasaaraddu waxay ka codsan kartaa saraakiisha hay'adaha dawladda iney gacan ka siiyaan gudashada waajibaadkooda shaqo. Gacansiinta uu bixiyo sarkaal dawladeed waa in uu kormeeraa sarkaal dakhli oo hawshaas loo igmadey.

## Qodobka 19-aad
## Ilaalinta Sirta

1. Sarkaal dakhli oo kasta iyo xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha dakhliga waa in ay ula macaamilaan ayna u ilaaliyaan sir ahaan dhammaan macluumaadka iyo dukumintiyada gacantooda soo gala oo la xiriira arrimaha cashuurta ee qof kale. Arrintaasi waajib ayey ku ahaaneysaa sarkaalka dakhliga ama xubinta ka tirsan shaqaalaha marka ay ka joogsato hawsha ay u hayaan dakhliga. Waajibku wuxuu saaran yahay qof kasta oo gacan siinaya Wasaaradda.
2. Sarkaal dakhli oo ka tirsan Wasaaradda wuxuu macluumaad ama dukumintiyo la xiriira arrimaha cashuuraha ee cashuur bixiye la wadaagi karaa:-
   b) Cashuur bixiyaha.
   t) Qof kale, waa marka uu cashuur bixiyaha oggolaansho qoraal ah ka helo.
   j) Sarkaal dakhli, xubin ka tirsan shaqaalaha ama qof gacan siinaya maamulka cashuuraha oo si gaar ah ama si guud uu ugu oggolaatey Wasaaraddu in uu heli karo macluumaad, iyadoo ujeeddada laga leeyahayna ay la xiriirto xeer dakhli.

x) Maxkamad, ilaa xadka uu oggolyahay xeer dakhli.

kh) Wasiirka, ilaa xadka uu oggolyahay xeer dakhli.

d) Sarkaal Dawladda Puntland kala shaqeeya dakhliga ama waaxda istaatistikada, ilaa xadka uu oggolyahay xeer dakhli.

r) Hantidhowrka guud ama qof kasta oo uu oggolaadey, ilaa xadka uu oggolyahay xeer dakhli.

3. Marba haddii qof helaya macluumaadka ama dukumintiyada uu ilaaliyo sirnimadooda, marka laga reebo inta yar ee lagama maarmaanka u ah in la xaqiijiyo sababaha shaac ka qaadista loo oggol yahay. Haddana tani laguma saleynayo shaac ka qaadista lagu sheegay xarfaha (b) ama (t).

## Qodobka 20-aad
## Aqbalidda Dammaanadda

1. Wasaaradda ayaa oggolaan karta in la keeno dammaanad la xiriirta waajibaad hoos yimaada xeerarka dakhliga, iyadoo ku salaynaysa shuruudo iyo xaalado ay Wasaaraddu dejiso. Dammaanaddaasi waxay noqon kartaa mid la xiriirta waajibaad gaar ah oo ka mid ah xeerarka dakhliga ama mid daboolaysa waajibaadyo badan ama waajibaadyo joogto ah oo hoos yimaada hal ama dhowr xeer dakhliyeed.
2. Dammaanadda la xiriirta waajibaad dakhli waxay qaadan kartaa qaababka soo socda: -

   b) Ballanqaad ama Kafaalad.

   t) Xayiraad ama rahmad hanti Maguurta ah ama xuquuq kale oo go'aan oo lagu yeesho hanti.

   j) Isku-dar ah labadaas qaab ee kor ku xusan.
3. Wasaaraddu ma waajibayso inay aqbasho qaab dammaanad gaar ah, xitaa haddii dammaanad la aqbalo, Wasaaraddu waxay weli xaq u leedahay inay dalbato ama raadiso dammaanad dheeraad ah.

4. Dammaanaddu waxay sii ahaanaysaa mid dhaqan-gal ah, xitaa haddii mulkiiluhu dib uga dhaco waqtigii, la siiyo waqti dheeraad ah ama uu ku yimaado guuldarro ku meel-gaar ah oo ku saabsan gudashada waajibaadka.

## Qaybta Labaad
## Ciidanka Booliska ee Ilaalada Cashuuraha
## Qodobka 21-aad
## Xaqiijinta Dambiyadda Dakhliga

1. Ciidanka Booliska ee Ilaaladda Cashuuraha iyo xubnaha kale ee Wasaaraddu, ee lagu sheegay Xeerkan waxay leeyihiin mas'uuliyada koowaad ee lagu xaqiijinayo arrimaha dakhli ee noqonaya dambi.
2. Mas'uuliyada soo raacda ee looga hortagayo, laguna xaqiijinayo dambiyada cashuurta iyo in la helo wax kasta oo caddeynaya waxaa qaban kara ciidan kasta ama hay'adaha kale ee dawladda ee sharcigu u igmaday.

## Qodobka 22-aad
## Saraakiisha iyo Askarta Booliska Cashuuraha

1. Saraakiisha, Saraakiil xigeennada iyo xubnaha kale ee Booliska, waxaa loo qaadanayaa in ay yihiin Saraakiisha Booliska Ilaaladda Cashuuraha marka meesha aysan joogin Booliska u khaaska ahaa ilaalada cashuuraha.
2. Haddii xaalad gaar ah jirto mas'uuliyada lagu xaqiijinayo dambiyada dakhliga waxaa Xeerarka dakhligu siiyeen Saraakiisha Maamulka ee Booliska Ilaalada Cashuuraha.
3. Sarkaalkaas marka la eego hawsha loo xilsaaray iyo awoodda uu siiyey sharcigu waxaa loo qaadanayaa in ay yihiin Saraakiisha Booliska ilaalada cashuuraha, waxayna Wasaaraddu siinaysaa kaarar gaar ah oo lagu aqoonsanayo.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 23-aad
## Awoodaha iyo Waajibaadka Ciidanka Booliska ee Ilaalada Cashuuraha

1. Haddii xubin kasta oo lagu sheegay Qodobka 16-aad farqadiisa 2-aad ay ka war hesho in dambi dakhli faraha lagula jiro, waxay ku wargalinayaan Booliska ilaalada cashuuraha xaqiiqadaas waxayna isla markiiba hubinayaan in alaabtaas lagu leeyahay cashuur.
2. Haddii si kasta xaaladu ha ahaatee ay saamixi waydo in Booliska Ilaalada Cashuuraha ay si dhakhso ah u soo dhexgalaan iyo haddii laga baqo sababaha laga rumaysan karo iyo caddaymaha dambigu in la beddelo ama ay lumaan, xubnaha lagu sheegay Qodobka 16-aad farqadiisa 2-aad ayaa iyaga laftigooda tallaabo ka qaadayaan oo ku wargalinayaan kuwa Booliska ilaaladda cashuuraha.
3. Xubnaha lagu sheegay Qodobka 16-aad farqadiisa 2-aad markasta waxay ka gacan siinayaan Booliska Ilaalada Cashuuraha xaqiijinta dambiyada lagu sheegay Xeerarka dakhliga.
4. Waxay gacan-siinayaan Wasaaradda markay soo wargelinayaan xaalad gaara oo qof ama ganacsi si degdega loo soo xiro, taasoo laga cabsi qabo in ay cashuurta la baxsadaan.
5. Waxay Wasaaradda ka caawinayaan uruurinta iyo dabagalka cashuuraha xilligooda taagan yihiin.
6. Ciidanka ilaalada cashuuraha waxay awood u leeyihiin in ay baaraan oo hubiyaan goob iyo gaadiid kasta oo ay filayaan in cashuur lagu leeyahay kadib soo jeedinta Wasaaradda.
7. Sida ku cad Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, arrimaha si dhakhso ah loogu baahdo Saraakiisha Booliska Ilaalada Cashuuraha wuxuu isagoo aan waaran haysan baari karaan guri ama meherad markasta oo ay ka war helaan ama ay xaqiijiyaan wax lagu rumaysan karo xadgudub ka dhan ah xeerka dakhli oo noqon kara dambiga, wuxuuna wargelinayaa Guddoomiyaha Maxkamadda



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

derejadda koowaad, isagoo la wadaagaya baaritaankii uu fuliyey sheegayana sababihii jiray iyo natiijada raadintaas.

8. Saraakiisha iyo askarta booliska cashuuraha waxay xaq u leeyihiin in ay galaan meherad kasta oo shati leh iyo meherad kasta oo kale oo lagu ganacsado si wax loo xaqiijiyo ama su'aalo loo weydiiyo, iyadoo la xaqiijinayo in qodobadii xeerka dakhliga la raacay, haddii ay haystaan oggolaansho maxkamadeed.
9. Haddii baahi dhakhso ah jirto xaqa gelitaanka oo lagu sheegay farqadda 8-aad waxaa la adeegsan karaa xitaa haddii waqtigu yahay saacadaha la xiro meheradaha shatiga leh ama goobaha ganacsiga.
10. Waxaa reebban in cashuur bixiyaasha shirkadaha ama shakhsiyaadka ay qaadan ama qariyaan buugta xisaabaadka marka lagu guda jiro baaris cashuureedka ama ay ka codsadaan saraakiisha dakhligu.

## Qaybta Saddexaad
## Cashuur Bixiyeyaasha
## Qodobka 24-aad
## Cashuurta iyo Cashuur Bixiyeyaasha

1. Cashuur waa waajibaad dhaqaale uu xeer dakhli farayo in muwaadiniinta iyo shirkaduhu bixiyaan si loogu maalgeliyo adeegyada iyo horumarka dadweynaha.
2. Cashuur bixiyuhu waa qof ama shirkad haysata dakhli, hanti ama dhaqdhaqaaq dhaqaale oo laga rabo inuu ka bixiyo cashuur uu ku waajibiyey xeer dakhli.

## Qodobka 25-aad
## Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha

1. Si loo aqoonsado, loo xaqiijiyo loona dhiirrigeliyo cashuur bixinta waa in Wasaaraddu ay joogtaysaa nidaamka Lambarrada Aqoonsiga Cashuur bixiyeyaasha (LAC) (Tax Identification Number [TIN]).
2. Cashuur bixiyuhu waa in uu Wasaaradda tusaa lambarkiisa Aqoonsiga Cashuur bixinta marka uu sheeganayo, caddeynayo, ogeysiinayo, cashuur celinayo,

kashfi (bank statement) ama dukuminti kale oo loo adeegsado ujeeddooyinka xeer dakhli.

3. Hay'ad kasta oo lagu xusey Qodobka 27-aad farqadiisa 2-aad waa in ay Lambarka aqoonsiga cashuur bixiyaha (LAC) ka dalbataa qof kasta oo codsanaya arrimaha ama ku hawlan wax is dhaafsiyada.

## Qodobka 26-aad
## Habraaca Samaynta Lambarrada Aqoonsiga Cashuur Bixinta

1. Qof kasta oo doonaya inuu bilaabo ganacsi waa in uu Wasaaradda ka codsadaa LAC, 15 maalmood ka hor inta uusan bilaabin hawlaha ay ka dhalan karaan waajib cashuureed. Wasaaraddu waxay dadka aan haysan LAC ku waajibin kartaa in ay lambarrada LAC ay ku soo codsadaan muddada ay Wasaaraddu u go'aamiso. Qof kasta wuu soo codsan karaa LAC, laakiin qofka hadda leh LAC waa in uusan soo codsan LAC kale ah.
2. Codsiga LAC waa in lagu soo gudbiyaa foomka loogu talagalay, iyadoo ay ku lifaaqan yihiin dukumentiyada kale ee caddeynaya aqoonsiga codsadaha waana in loo soo xareeyaa qaabka loogu talagalay. Qofka soo codsada ee aan loo sameyn lambar LAC waa in uu si qoraal ah ugu wargeliyaa Wasaaradda is-beddel kasta oo uu ku sameeyey macluumaadka ku yaalla foomka codsiga.
3. Haddii Wasaaraddu diido codsi lagu dalbanayo LAC, waa in ay codsadaha qoraal ku ogeysiiyaan sababaha loogu diidey. Qoraalka ogeysiiska ah waa in lagu gaarsiiyaa codsadaha muddo 14 maalmood gudahooda markii la qaatey go'aanka.
4. LAC waxaa la bixiyey marka Wasaaraddu uu qofka ay khuseyso guddoonsiiyo shahaadada LAC.
5. LAC walba wuxuu u gaar yahay cashuur-bixiye. Qof kasta wuxuu yeelan karaa hal LAC, waana in qofkaasi u adeegsadaa ujeeddooyinka waafaqsan xeerka

dakhliga. LAC uu qof leeyahay looma wareejin karo, mana isticmaali karo qof kale.

6. Wasaaraddu waa inaysan LAC siinin qof ilaa ay ku qancaan saxnaanta aqoonsiga qofka iyo in qofkaasi uusan hadda lahayn LAC.
7. Waa in aan qofna u marag furin qof kale, xataa haddii uu yahay sarkaal dakhli, in qofkaasi uu leeyahay ama aan loo sameyn LAC gaar ah, iyadoo aanay taasi dhab ahayn.
8. Haduu cashuur bixiyihu iska badelo Magaca ganacsiga ama ka wareego cinwaanka lagu siiyey LAC waa in uu Wasaaradda ku soo wargaliyaa muddo todobbo (7) beri gudahood ah.

## Qodobka 27-aad
## Shahaadada Cashuur Bixinta

1. Si loo dhiirigeliyo cashuur bixinta, loona yareeyo cashuur ka fogaanshaha, waxaa Wasaaraddu bixinaysaa Shahaadada Cashuur Bixinta (SHCB), (Tax Compliance/Clearance Certificate [TCC]).
2. Dhammaan Hay'addaha Dawladda, kuwa aan Dawliga ahayn iyo Qaramada Midoobay, waa in aysan la tacaamulin cashuur bixiye aan haysan Shahaadada Cashuur Bixinta.
3. Marka Wasaaraddu qoraal ku codsato, hay'adaha lagu xusey Farqadda 2aad waa in ay siiyaan qoraal ay ku cad yihiin: -
   b) Qiimaha macaamilka ganacsi ee lala sameeyey, muddaduna ku cayiman tahay codsiga Wasaaradda.
   t) Magacyada, cinwaannada, lambarrada LAC ee shakhsiyaadka macaamilka ganacsi lala sameeyey.

## Qodobka 28-aad
## Habraaca iyo Samaynta
## Shahaadada Cashuur Bixinta

1. Cashuur-bixiye kasta wuxuu Wasaaradda ka codsan karaa SHCB. Codsiga waa in uu ku qornaadaa foomka loogu talagalay waana in loo buuxiyaa sidii loogu talagalay. Codsaduhu waa in uu leeyahay LAC waana in uu ku caddeeyaa codsigiisa.
2. Wasaaraddu waa in ay muddo 14 maalmood gudahooda uga jawaabtaa codsiga SHCB, iyagoo oggolaanaya codsiga SHCB ama diidaya codsiga haddii cashuur-bixiyuhu buuxin waayo shuruudihii xeerka dakhligu jideeyey, qofkana qoraal ugu sheegaysa sababaha loogu diiday.
3. Wasaaraddu waa in ay siiyaan codsadaha SHCB haddii marka go'aan laga gaarayo codsiga aan codsadaha lagu lahayn Cashuur, cashuur celin ama waajibaadyo kale oo uu saarey xeer dakhli. Haddii aaney arrintu sidaas ahayn, Wasaaraddu waxay bixin kartaa SHCB oo shuruudi ku xiran tahay ama waa ay diidi karaan codsiga.
4. SHCB waa in ay tixraacdaa ugu yaraan saddexdii 3-sano ee la soo dhaafey waana inay xustaa:-
   b) Magaca Cashuur bixiyaha iyo lambarka LAC ee Cashuur bixiyaha.
   t) Cashuurta ku waajibtay muddooyinkaas iyo Cashuurta weli ku harsan haddii ay jirto.
   j) Markay cashuuri ku harsan tahay codsadaha, heshiiska lagu bixinayo cashuurta ee ay ku qanacday Wasaaraddu.
   x) Haddii uu xaddidan yahay ujeeddooyinka loo adeegsan karo SHCB.
   Kh) Goorta ay SHCB dhacayso.
5. Waa in aan qofna u marag furin qof kale, xataa haddii uu yahay sarkaal dakhli, in qofkaasi loo sameeyey shahaaddo SHCB, iyadoo aaney taasi dhab ahayn.

## Qodobka 29-aad
## Kanoqoshada, Beddelida ama Wax Ka Beddelidda LAC ama SHCB

1. Sababo macquul awgood, Wasaaraddu waxay la noqon kartaa LAC ama SHCB.
2. Wasaaraddu waa in ay la noqotaa LAC haddii: -
   b) Qofka lagu tilmaamey shahaaddada LAC uu yahay qof aan jirin.
   t) Qofka lagu tilmaamey shahaaddada LAC uusan si sax ah uga turjumeynin aqoonsiga saxda ah ee qofka shahaaddada loo soo saarey.
   j) Qofka shahaaddada LAC loo soo saarey uu leeyahay LAC kale oo aan waqtigiisu dhicin.
3. Ka noqoshadu waa in ay ahaataa qoraal waana in la gaarsiiyaa qofkii LAC ama SHCB markii hore loo sameeyey, haddii qofku uu been abuur yahayna laga dhigo LAC iyo SHCB mid si guud dadweynuhu u heli karaan.
4. Haddii faah-faahinta ku cayiman shahaaddada LAC ay wax-iska beddelaan, qofka haysta LAC-da waa in uu Wasaaradda qoraal ugu soo gudbiyaa faah-faahinta wixii iska beddelay. Wargelintana waa in Wasaaradda lagu soo gaarsiiya muddo 14 maalmood gudahooda.
5. Sababo macquul ah awgood, Wasaaraddu waxay qofka siin kartaa shahaadada LAC oo wax laga beddeley iyadoo aan lagala noqon LAC.

## Qodobka 30-aad
## Xuquuq u Lahaanshaha Macluumaad iyo Matalaad

1. Cashuur bixiye kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu Wasaaradda ka codsado, uuna ka helo macluumaad ku saabsan waajibaadyada lagu leeyahay ee waafaqsan xeerka dakhliga. Haddii Wasaaraddu ay ku guul darraysato fulinta codsiga cashuur bixiyaha, saameyn kuma yeelanayso waajibaadyadii cashuur bixinta ee ku xusan xeerka dakhliga.

2. Cashuur bixiye kasta wuxuu xaq u leeyahay in cid ay ku matasho mucaamalaadka uu cashuur bixiyuhu la leeyahay Wasaaradda, waana in hay'ad walba ay matalaad heshaa.
3. Wasaaradda waxay qoondeyn kartaa foom ay cashuur bixiyeyaashu isticmaalaan marka ay magacaabayaan wakiil. Wasaaradda waajib kuma aha in ay wargeliso cashuur bixiye, iyagoo u sii maraya wakiilka cashuur bixiyaha, haddii aan cashuur bixiyuhu si cad ugu sheegin foomka uu soo gudbiyey ee uu ku magacaabayo wakiilka.

## Qaybta Afraad
## La-taliyeyaasha Cashuuraha
## Qodobka 31-aad
## Ansixinta iyo Diiwaangelinta
## La taliyeyaasha Cashuuraha

1. Qofku wuxuu noqon karaa la taliye cashuur marka Wasaaraddu ay qofkaas siiso shahaado ayna u qoondeyso lambar diiwaangelin. Wasaaraddu waa in ay samaysaa ayna haysaa diiwaan ay ku qoran yihiin la taliyeyaasha cashuuraha ee la ansixiyey.
2. Qofka ah la taliye cashuur oo la ansixiyey waa in uu lambarkiisa diiwaangelinta mar walba ku xusaa xiriirrada uu la samaynayo Hay'adda.
3. Wasaaradu waxay soo saaraysaa xeer nidaamiye lagu maamulayo diiwaangelinta iyo oggolaanshaha La-taliyeyaasha cashuuraha muddo 3 bilood gudahood ah marka xeerkan la ansixiyo.

## Qodobka 32-aad
## Xaddidaada Ujuurooyinka,
## Adeegyada Matalaadda iyo
## Talo siinta Cashuurta

1. Sida ku cad faqradda 3-aad ee qodobkan, qof ma dalban karo mana heli karo ujuuro lagu bixiyo ama la xiriirta: -



STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND

b) Matalaad uu cashuur bixiyeyaal ku matalo arrimahooda cashuuraha.

t) Bixinta talo aasaasi ahaan la xiriirta fasiraadda ama raadka uu leeyahay xeer dakhli.

j) Dukuminti kasta oo kale oo la hal-maala xeer dakhli.

2. Sida ku cad faqradda 3-aad ee qodobkan, qofna looma oggola in uu: -

b) Sheegto in uu yahay la taliye dhinaca cashuuraha ah.

t) Tilmaamo in lacag ujuuro ah qofku bixiyo uu gacan ka siinayo arrimaha lagu xusey faqradda 1-aad.

3. Faqradaha 1-aad iyo 2-aad laguma saleynayo la taliye cashuureed oo loo ansixiyey si waafaqsan Qodobka 31-aad faqradihiisa 1-aad iyo 2-aad laguma saleynayo qareen marka uu gudanayo hawshiisa xeerka oo la xiriirta xeer dakhli. Qareenka waa in uu yahay mid oggolaansho shaqadiisa la xiriirta ka haysta Guddiga anshax-marinta iyo ruqsad bixinta Qareennada Puntland.

## CUTUBKA 4AAD
## XOG IS-DHAAFSIGA RASMIGA AH
### Qodobka 33-aad
### Afka Rasmiga ah

1. Af Soomaaliga ayaa ah afka rasmiga ah ee xeerka dakhliga si waafaqsan Qodobka 8-aad ee Dastuurka Dawlada Puntland, waxaana Wasaaraddu diidi kartaa in ay aqoonsadaan qoraal kasta ama dukuminti kasta oo aan ku qorneyn afka rasmiga ah.
2. Wasaaraddu waxay cashuur bixiyaha ku waajibin kartaa in uu qoraal ama dukuminti ku soo turjumo Af Soomaali. Qoraalka ama dukumintiga waa in ay muhiim u ahaadaan sida xeerka dakhliga loogu maamulayo cashuur bixiyaha. Dalabka Wasaaraddu waa in uu ahaadaa qoraal waana in la gaarsiiyaa cashuur bixiyaha.
3. Sida ku cad farqada 2-aad ee qodobkan cashuur bixiyuhu waa inuu adeegsadaan turjumaan ay oggolaansho siiso Wasaaraddu, waana inuu bixiyaa kharashka turjumaadda, Qofka cashuur bixiyaha ee aan raacin qaabka turjumaad ee ay



STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND

dejiyeen Wasaaraddu wuxuu ku xadgudbay qodobkan. Wasaaraddu waxay turjumaad u diri kartaa qoraalka ama dukumintiga, waxaana cashuur bixiyuhu ku khasban yahay inuu bixiyo kharashka turjumaadda.

## Qodobka 34-aad
## Lacagta Rasmiga ah

1. Lacagta Rasmiga ah ee xeerka dakhligu waa shilin Soomaali, dhammaan qadarka lagu xisaabinayo xeerka dakhliga waa in lagu muujiyo ama lagu bedelo shilinka Soomaaliga, dhammaan cashuuraha waa in lagu bixiyo shilinka Soomaaliga. Inta laga helayo shilin Soomaali si dhammaystiran uga hirgala Puntland waxaa si ku meel-gaar ah loo isticmaali karaa lacagaha qalaad ee la heli karo sida Doolarka Maraykan ka.
2. Beddelka lacagta qalaad ee loo bedelayo shilin Soomaali waa in lagu saleeyaa ama lagu jaangooyaa heerka sarifka bankiga dhexe ee Dawladda Puntland, wuxuuna dhaqan-gelayaa taariikhda qadarka la tixgelinayo sida uu dhigayo xeerka dakhligu.
3. Wasaaraddu waxay qof ama koox ku waajibin kartaa inay qaddar lacag ah ugu soo xisaabtamaan lacag qalaad ahaan marka laga fekerayo xeer dakhli oo gaar ah. Waajibintu: -
   b) Waa inay ahaataa qoraal rasmi ah oo ka soo baxay Wasaaradda.
   t) Waa inay ku salaysnaataa hal muddo ama muddooyin dhawr ah.
   j) Waa inay ku salaysnaataa hal xeer dakhli ama xeerar dakhli oo badan.
   x) Waxay ku xirnaan kartaa shuruud ama shuruudo ay Wasaaraddu go'aamiso iyo mid la fulinayo in kasta oo ay jirto sida ay dhigeyso faqradda 1-aad marka loo haysto sabab macquul ah waajibinta waa la laali karaa.
4. Taariikhda qaddar lacageed lagu xisaabtamo sida uu dhigayo xeer dakhli waa taariikhda lacagtaasi ay waajibeyso ama la heley, laga soo saarey wax kale, kharash ahaan loo galey, la bixiyey ama si kale loogu xisaabtamey sida uu dhigayo xeerka dakhliga.

## Qodobka 35-aad
## Foomamka iyo Ogeysiisyada

1. Qaabka dukumintiyada uu waajibinayo xeer dakhli waxaa qeexaya xeer nidaamiyeyaal. Haddii kale Wasaaradda ayaa u dejin karta qaabka ay noqonayaan dukumintiyada.
2. Qof kasta waa inuu isticmaalaa foomka loogu talagalay marka uu dukumintiyada ku diiwaan-gelinayo Wasaaradda ama marka uu foomka si kale uu u waajibiyo xeer dakhli.
3. Wasaaraddu waa in foomka ku xusan farqadaha 1-aad iyo 2-aad uu noqdaa mid dadku wada heli karaan, waana in laga heli karaa xafiisyada Wasaaradda iyo goobaha kale ee ay jaangoyso Wasaaraddu.

## Qodobka 36-aad
## Dukumintiyada La Ansixiyey
## iyo Kuwa Cilladaysan

1. Dukuminti ay Wasaaraddu soo saartay si waafaqsan xeer dakhli waxay dhab ahaantiisu sugan tahay haddii magaca ama jagada ama sarkaalka dakhliga ee loo oggolaadey uu:-
   b) Yahay dukuminti waraaq ah, ku saxiixan yahay, daabacan yahay, shaabadeysan yahay ama uu ku qoran yahay dukumintiga.
   t) Yahay dukuminti elektaroonik ah, dukumintiga loo isticmaalay isagoo ah saxiixa elektoroonik ah.
2. Dukuminti lagu soo saarey xeerka dakhliga ma ahan mid cilladeysan haddii:-
   b) Uu waafaqsan yahay xeerka dakhliga maaddo ahaan iyo saamayn ahaanba.
   t) Uu shakhsiga ku socdo dukumintiga ama uu caddaynayo in lagu xuso dukumintiga iyadoo la hubiyey.
3. Haddii cilladdu ay la xiriirto dood ku saabsan fasiraadda xeer dakhli ama xaqiiqo la xiriirta shakhsi gaar ah, Marka ay taas jirto Wasaaraddu waxay



STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND

dood ka keeni kartaa cilladda, laakiin wax kama beddeli karto dukumintiga iyadoo aan oggolaansho ka helin dhammaan dhinacyada ay khuseyso.

4. Iyadoo la ilaalinayo faqradda 3-aad, Wasaaraddu waxay wax-ka-beddeli kartaa wareegto rasmi ah ama go'aan gaar ah si waafaqsan Qodobka 11-aad, hadba sida ay baahidu tahay.

## Qodobka 37-aad
## Dukumintiyada Waraaqaha ah ee La Gaarsiiyo Wasaaradda

1. Dukuminti waraaq ah waa in la gaarsiiyaa xafiiska Wasaaradda ama waa in lagu diraa boosto laakiin gaarsiinta boostadu ma ansaxayso ilaa Wasaaraddu ay hesho dukumintiga sida uu dhigayo xeerka dakhligu.
2. Marka qofku dukumenti waraaq ah u gudbiyo Wasaaradda, Wasaaraddu waa inay si deg deg ah u xaqiijisaa gaarsiinta iyadoo shaabadeyneysa dukumintiga.

## Qodobka 38-aad
## Gaarsiinta Dukumintiyada Waraaqda ah

1. Wasaaraddu waxay dukuminti waraaq ah gaarsiisey cashuur bixiye, markay:-
   b) Dukumintiga gacanta ka saarto qofka, ama haddii ay tahay hay'ad ay gacanta ka saarto mas'uulka hay'adda.
   t) Dukumintiga loogu diro boosto waxaana lagu hagaajinayaa deegaanka uu degan yahay ama u deganaa markii u dambaysay, ganacsigiisa, xafiiskiisa, iyo sanduuqa boosta u gaarka ah ama ciwaano kale oo qof ku leeyahay oo uu ka mid yahay ciwaanada ku qoran shahaadada LAC ee qofka.
   j) Dukumintiga lagu diro boosto la diiwaangeliyey ama adeegga loo yaqaan boostaale ee la diiwaangeliyey, waase in boostada ama adeegga uu ogeysiiyaa qofka in dukumintiga uu u diyaar yahay in uu ka qaato goob cayiman.
   x) Dukumintiga loogu geeyo ama boosto loogu diro Markab uu qofku leeyahay ama dhowaantan lahaa.

Kh) In dukumintiga loogu diro qaab elektaronik ah sida iimaylka rasmiga ah ee laga heli karo qofka ama hay'adda.

2. Marka uu qofku ka dalbanayo Wasaaradda in lasoo gaarsiiyo dukuminti la xiriira xeerka dakhliga waa inuu Wasaaradda u diraa ciwaankiisa elektaronika ah, dalbashaduna waa inay waafaqsan tahay xeerka dakhliga waana inuu qofku adeegsadaa foomka dalbashada ee ay ugu tala galeen Wasaaraddu, Gaarsiinta Wasaaradda waxay dhacdaa, marka Wasaaradda ay hesho ogeysiis in dukuminti loogu direy cinwaanka elektaroonigga ah ee qofka.
3. Dukuminti waraaq ah waxaa Wasaaraddu ay cashuur bixiye gaarsiisey marka lagu saleeyo waqtiyada soo socda:-
   b) Haddii lagu gaarsiinayo gacan ka saaris qof ama loo dhigayo goob, marka gacanta laga saaro ama loo dhigo goobta.
   t) Haddii ay tahay gaarsiin boosto diiwaangashan ama adeeg boostaale diiwaangashan, marka dukumintiga loo geeyo ama la ogeysiiyo qofka in dukumintigu uu diyaar u yahay in uu soo qaato.
   j) Haddii uu yahay adeeg kale oo boostada loogu direy cinwaan ku yaalla Puntland gudaheeda, 10 maalmood ka dib maalinta boostada lagu direy.
   x) Haddii uu yahay adeeg kale oo boostada loogu direy cinwaan ku yaalla Puntland dibaddeeda, waqtiga dukumintiga caadi ahaan ay boostada caadiga ah ku gaarto.

## Qodobka 39-aad
## Hannaanka Dukumintiga Elektaroonigga ah

1. Wasaaraddu waxay dejin kartaa ama ku shaqayn kartaa nidaam:-
   b) Dukumintiyada elektaroonika ah loogu fayl gareeyo Wasaaradda.
   t) Adeeg elektaroonik ah oo ay Wasaaraddu ku bixiso dukumintiyada.
2. Wasaaraddu waxay dejinaysaa xeer nidaamiyaal la xiriira: -



STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND

b) Diiwaangelinta shakhsiyaadka looga baahan yahay in ay ka qayb qaataan hannaanka, taasoo ay ka mid tahay soo saarista iyo laalista summadaha xaqiijinta.

t) Noocyada dukumintiyada ee lagu gudbin karo nidaamka, oo ay ku jiraan qaabka iyo habka gudbinta, bixinta iyo joojinta lambarrada diiwaangelinta dukumintiyada.

j) Xallinta caqabadaha oo ay ka mid yihiin sixidda khaladaadka, wax ka beddelka dukumintiyada iyo habraac marka uu istaago ama khalkhal galo hannaanka.

x) In la ilaaliyo sirta, shakhsiyaadka naf ahaantooda u isticmaalaya hannaanka ama kuwa hannaanka isticmaalaya, iyagoo ka wakiil ah shakhiyaad kale.

kh) Wax kasta oo gacan ka geysanaya in hannaanka si wanaagsan loo maamulo.

3. Dukuminti elektaroonik ah wuxuu qofku u gudbinayaa Wasaaradda marka uu helo lambarka diiwaangelinta isagoo isticmaalaya summadda xaqiijinta ee qofkaas leeyahay. Xeerkan ma khuseeyo marka qofku Wasaaradda ku qanciyo in uusan soo dirin dukumintiga iyo in dukumintiga aan la soo dirin iyadoo oggolaansho laga haysto.

4. Wasaaraddu waxay dukuminti gaarsiiyeen qof marka lambar diiwaangelin dukuminti loo sameeyo iyo marka dukumintiga la furi karo, iyadoo la adeegsanayo sumad xaqiijin.

5. Wasaaraddu waxay oggolaan kartaa in dukuminti la daabacay uu noqdo nuqul dukuminti elektaroonik ah oo loo fayl gareeyey sida ay dhigeyso faqradda 3-aad ama loo dhiibey sida ay dhigeyso faqradda 4-aad. Maxkamaduhu waxay nuqulka u aqbali karaan in caddeyn sax ah ka tahay nooca iyo waxa ku qoran dukumentiga.

# CUTUBKA 5-AAD
# ILAALINTA IYO BIXINTA MACLUUMAADKA
## Qaybta Koowaad
## Ilaalinta Dukumintiyada
### Qodobka 40-aad
### Ilaalinta Dukumintiyada

1. Waa in laga dhigaa dukumintiga mid laga heli karo Puntland oo dhan, waana in: -
   b) Lagu sharxo macluumaad ay tahay in lagu bixiyo dukuminti kasta oo uu qof gaarsiiyaan Wasaaraddu si waafaqsan xeer dakhli.
   t) Awood loo yeesho in si sax ah loo go'aamiyo cashuurta ay tahay in uu bixiyo qofka ee uu dhigayo xeer dakhli.
   j) Lagu xaqiijiyo ahdaaf uu dhigayo xeer dakhli oo uu xoojinayo xeer kale oo dakhli, ama xeer nidaamiyeyaal ay soo saartay Wasaaraddu.
2. Dukumintiyada lagu xusay faqradda 1-aad waa in la hayaa ilaa laga gaaro taariikhda si guud loogu sheegay faqradda 3-aad ama taariikhahan soo socda:-
   b) Markuu qofku aanu ku qancin go'aanka maxkamadda ama uu rafcaan qaadanayo, dhammaan dukumintiyada arrimaha lagu muransan yahay waa in la kaydiyaa ilaa arrinkaas go'aan kama dambeys ah laga qaadanayo, lagana fulinayo go'aankaas.
   t) Markuu qof codsi u gudbinayo Wasaaradda, dhammaan dukumentiyada la xiriira codsiga waa in la hayaa ilaa codsiga go'aan kama dambeys ah laga gaarayo.
   j) Markuu qofku doonayo in loo soo celiyo cashuur horay uga khaldantay, dhammaan dukumentiyada la xirira xisaabinta cashuurta waa in la kaydiyaa ilaa laga sameeyo cashuur celinta.
   x) Markuu qof heley ogeysiis loogu sheegayo baaris ay sameyeen Wasaaraddu, dhammaan dukumentiyada la xiriira baarista waa in la hayaa ilaa

Wasaaraddu ay qofka qoraal ku ogeysiineyaan in baarista la soo gabagabeeyey.

3. Taariikhda guud ee la haynayo dukumintiyadu waa 5 sano oo ka bilaabmaysa:-
   b) Markay la xiriirto cashuur dakhli waxay ka bilaabmaysaa dhammaadka sanadka ugu dambeeyey ee la qiimaynayo cashuurta ee dukumintiyadu ay la xiriiraan.
   t) Markay la xiriirto cashuuraha kale, taariikhdii u dambeysey ee cashuur bixiyuhu ku waajibtey in uu dukumintiga u geeyo Wasaaradda ama uu bixiyo cashuurta dukumintiyadu la xiriiraan, labadooda midda dambeysa.
   j) Wasaaraddu waxay qof ka dhaafi kartaa ama ka yareyn kartaa waajibka ah in uu hayo dukumintiyo gaar ah. Ka dhaafidaas ama waqti yarayntaas waa inta ku cad ogaysiiska Wasaaradda.
4. Wasaaraddu waxay qof ku waajibin kartaa inuu kaydiyo dukumenti gaar ah uuna kaydiyo muddo cayiman, dukumintiga uu kaydinayo qofku waxay la xiriiri karaan arrimaha cashuurta ee qofka ama qof kale iyo arin kasta oo la xiriirta xeer dakhli, muddada kaydinta dukumintigu waa inaysan ka badan muddada lagu xusay farqada 3-aad ee qodobkan, Wasaaradduna waa inay qofka u qoran qoraal ay ku caddaynayaa dukumintiga ay rabaan in la kaydiyo iyo wakhtiga la kaydinayo.

## Qaybta Labaad
## Macluumaadka Sida Joogtada ah Loo Bixiyo

### Qodobka 41-aad
### Cashuur Celinta (Tax-Return)

1. Sida ku cad Qodobkan, cashuur celinta waa in loo sameeyaa qaabka iyo wakhtiga uu u cayimay xeerka dakhliga.
2. Markuu qofku samaynayo cashuur celinta waa inuu saxiixaa, haddii ay Hay'ad tahayna waa inuu saxiixaa mas'uulka sida saxda loogu igmadey.

3. Cashuur celinta waa in lagu xusaa in ay dhammaystiran tahay oo ayna sax tahay.
4. Marka ay xaalad xasaasi ah ay jirto, Wasaaraddu waxay qof ku waajibin kartaa in uu soo sameeyo cashuur celin, waxayna sidaas sameyn kartaa, iyadoo aan u fiirin in qofku sameeyo cashuur celinta soo socota. Waajibintu waa inay qoraal ahaataa waana in loo geeyaa qofka ay khusayso. Ogeysiiska cashuur celinta waa inay ku caddahay muddada cashuur celinta la samaynayo iyo taariikhda ay waajib tahay in cashuur celinta la soo xareeyo. Xaaladahan soo socda ayaa ah kuwo xasaasi ah ee ku waajibin kara qofku inuu sameeyo cashuur celin: -
   b) Markay Wasaaraddu aaminsan tahay in qofku musalifay ayna jirto sabab macquul ah oo caddaynaya musalafka qofka.
   t) Markay Wasaaraddu hesho sababo caddaynaya in qofku uu Puntland ka tagi rabo si abid ah.
   j) Markay Wasaaraddu ogaato in qofku uu joojinayo ganacsigii uu ku lahaa gudaha dhulka Puntland.
   x) Markuu qofku galo dembiyada uu dhigayo xeer dakhli.
   Kh) Markuu qofku ilaalin waayo, kaydin waayo ama xifdin waayo dukumintiyada looga baahan yahay.

## Qodobka 42-aad
## Gacan siinta Diyaarinta Cashuur celinta

1. Sida ku xusan Qodobkan, qofka cid kale u diyaarinaya cashuur celin waa in uu:-
   b) Saxiixaa cashuur celinta, isagoo sheegaya lambarkiisa diiwaangelinta ee ay siisay Wasaaraddu.
   t) Cayimaa ilaa inta uu diyaariyuhu baaray dukumintiyada qofka ay ku waajibtey in uu cashuur celinta sameeyo iyo nooca dukumintiyada uu baarey.
   j) Caddeeyo ilaa inta uu ogyahay diyaariyuhu in cashuur celinta loo diyaariyey si waafaqsan qodobada xeerarka dakhliga.

XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

2. Qofku wuxuu noqonayaa qof cid kale u diyaariya cashuur celin haddii qofka gunno lagu siinayo:-
   b) Xareeyo cashuur celin isagoo ka wakiil ah qof kale.
   t) Diyaariyo ama gacan ka siiyo diyaaryinta cashuur celin ama lifaaq lagu lifaaqayo cashuur celinta qof kale.
3. Qofku ma noqonayo qof cid kale u diyaarinaya cashuur celin haddii uu u shaqeynayo qofka waajibka ku tahay in uu diyaariyo cashuur celinta.
4. Qof cid kale u diyaarinaya cashuur celin wuxuu diidi karaa inuu xaqiijiyo saxnaanta cashuur celinta. Haddii ay sidaan dhacdo, diyaariyuhu waa inuu
   b) Qofkay waajibka ku tahay in uu cashuur celinta sameeyo siiya caddayn qoraal ah oo uu ku sheegayo sababaha uu u diidey.
   t) Markuu saxiixayo cashuur celinta waa inuu korkeeda ku caddeeyaa in saxiixani uu ku xiran yahay bayaanka lagu sheegay xarafka (b.) ee farqaddan.

## Qodobka 43-aad
## Kordhinta Waqtiga La Geynayo Cashuur celinta

1. Qofkay waajib ku tahay inuu sameeyo cashuur celin sida uu dhigayo xeerka dakhliga, Wasaaradda wuxuu ka codsan karaa in loo kordhiyo waqtigii ay ahayd in ugu dambeyn xareeyo cashuur celinta. Codsigu waa in uu qoraal ahaadaa waana in la sameeyaa toban (10) maalmood ka hor maalintii ay ahayd in la geeyo cashuur celinta.
2. Haddii ay jirto sabab macquul ah laguna sheego codsiga ku xusan faqradda 1aad, Wasaaraddu waxay u kordhin kartaa waqtiga. Waqti kordhintu waa inay ku xirnaataa shuruudaha ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon tahay, oo ay ku jirto in la bixiyo rahan. Haddii la siiyo waqti kordhin iyo haddii kaleba, Wasaaraddu waa inay qofka qoraal ku ogeysiiyaan go'aanka Wasaaraddu ka qaadatay codsigiisa.

3. Qofku wuxuu soo codsan karaa waqti kordhin marar badan oo ku aaddan maalinta ay tahay in la xareeyo cashuur celin, waxaana Wasaaraddu ay siin kartaa waqti kordhin dhowr jeer, balse wadarta waqti kordhinta loo siiyey cashuur celin waa in aaney ka badan 45 maalmood oo ka bilaabmata maalintii ay asal ahaan ahayd in la xareeyo.
4. Oggolaanshaha wakhti kordhinta sida uu dhigayo Qodobkan ma beddeleyso maalinta ay ahayd in la bixiyo cashuurta ee ku cayiman xeerka dakhliga ee cashuur celinta loo cuskanayo.

## Qodobka 44-aad
## Dib-U-dhac Cashuur -Celin

1. Markuu cashuur bixiyuhu soo xerayn waayo cashuur celin waqtigii uu xeerka dakhliga ku waajibiyey, Wasaaraddu waxay u diraysaa cashuur bixiyahaas ogaysiis qiimayn ah sida uu dhigayo Qodobka 50-aad. Marka ujeeddadu tahay soo ururinta qiimaysan, Wasaaraddu waxay amri kartaa in qof kale uu diyaariyo uuna soo gudbiyo faah-faahinta ay ahayd in lagu soo daro cashuur celinta.
2. Cashuur celinta la soo xareeyey waqtigii laga rabay ka dib saameyn kuma yeelanayso go'aanka cashuureed ee Wasaaradda, marka lagu daro qiimeynta loo sameeyey sida uu dhigayo Qodobka 52-aad. Laakiin Wasaaraddu waa in ay tixgalisaa macluumaadka ku jira cashuur celinta la soo xareeyey goor dambe markuu qiimeynta sameynayo, taasoo ay ka mid tahay markuu go'aansanayo in wax ka beddel yar lagu sameynayo iyo in kale.

## Qodobka 45-aad
## Cashuur celin iyo Macluumaad Kale oo Khaldan

1. Cashuur bixiyuhu xaq uma laha inuu wax ka beddelo ama saxo cashuur celin marba haddii loo xareeyo Wasaaradda.
2. Marka qof uu ogaado in macluumaad loo xareeyey Wasaaradda uu khaldan yahay, qofka waa inuu islamarkiiba soo xareeyaa macluumaad kale oo dheeri

ah, kaasoo ah sixitaan. Waajibkan kuma xaddidna oo keliya macluumaadka loo soo xareeyey cashuur celin ahaan. Marka uu sixitaanka la xiriiro cashuur celin, Wasaaraddu waxay sixitaanka u arki kartaa in uu yahay wax ka beddel lagu sameeyey cashuur celinta. Marka ay sidaa dhacdo, Wasaaraddu waa in ay wax ka beddelka oo qoraal ah ku soo wargelisaa qofka.

3. Haddii Wasaaraddu ay u aragto in macluumaad ku jira cashuur celin la soo xareeyey siduu dhigayo xeerka dakhliga uu khalad yahay, markaas Wasaaraddu waa inay kaga falcelisaa qiimayn ay ku samayso qofka. Qiimeyntu waxay noqon kartaa midda uu tilmaamayo Qodobka 52-aad ama, haddii cashuur celintu ay ahayd mid ka dhalatey is qiimayn, waa in uu kaga falceliyaa qiimayn wax ka beddel yar ah sida uu dhigayo Qodobka 54-aad. Markay soo ogaanayso Wasaaraddu macluumaad la qiimeynayo, waa in ay tixgalisaa sixitaan kasta oo loo heley si waafaqsan faqradda 2-aad.
4. Macluumaadku wuxuu khalad yahay marka aanu si baaxad weyn u dhammaystir-nayn ama uu yahay mid marin habaabin ah.

## Qaybta Saddexaad:
## Macluumaad bixinta Khasabka ah

## Qodobka 46-aad
## Helidda Macluumaad iyo Gelidda Hantida

1. Si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka xeerarka dakhliga, Wasaaradda waa in awood loo siiyaa in ay si buuxda oo xor ah u gasho dhisme, goob ama hanti kale, ayna hesho macluumaad haddii ay oggolaansho ka haysato maxkamadda awoodda u leh. Gelidda iyo helidda waa in loo oggoladaa waqti kasta iyo maalin kasta xataa haddii aan ogeysiis horey loo sii bixin. Hase yeeshee, Wasaaraddu ma geli karto guri la deggan yahay waqtiga u dhexeeya 7:00 fiidnimo ilaa 7:00 subaxnimo, iyadoo oo aan oggolaansho ka helin cidda deggan ama haysan amar maxkamadeed.

2. Sarkaal dakhli oo doonaya in uu adeegsado awoodda lagu xusey faqradda 1-aad waa in si gaar ah oo qoraal ah ay Wasaaraddu ugu oggoladaan. Oggolaanshaha waa in si cad loogu xusaa magaca iyo xogta sarkaalka.

3. Sarkaalka dakhligu Markuu adeegsanayo awoodda lagu siiyey faqradda 1-aad, wuxuu awood u leeyahay inuu: -

   b) Wax kala soo baxo ama nuqul ka sameeyo dukuminti, taasoo ay ka mid tahay nuqul elektaroonik ah.

   t) Gacanta ku soo dhigo dukuminti uu sarkaalku aaminsan yahay in uu muhiim u noqon karo go'aaminta cashuurta lagu leeyahay qof sida uu dhigayo xeer dakhli.

   j) Gacanta ku soo dhigo dukuminti uu sarkaalku aaminsan yahay in ay ku jirto caddeyn muujineysa in dembi laga galey xeerka dakhliga.

   x) gacanta ku soo dhigo hanti uu ka mid yahay kambuyuutar uu sarkaalku aaminsan yahay in uu ku jiro ama ku keydsan yahay dukuminti ah nooca lagu xusey faqrada 4-aad xarfaheeda (t) ama (j) haddii dukumintiga aan si kale lagu dhiibin ama lagu heli karin.

   Kh) Naamuunado (Sample) ka qaadi karo alaabo.

   d) Dhisme ama goob kasta dhigan karo, ku xiri karo ama ku keydin karo baabuur ama qalab kale oo uu adeegsanayo sarkaalka.

4. Dukumintiyada, hantida iyo naamuunadaha gacanta loogu soo dhigo sida ay dhigeyso faqradda 3-aad waa in uu saxiixaa sarkaalka dakhliga ee loo oggolaadey. Waxaa hantida gacanta lagu soo dhigay loola tacaamulayaa sidan soo socota: -

   b) Dukumenti gacanta lagu soo dhigey waxaa la haysan karaa 3 bilood.

   t) Hanti gacanta lagu soo dhigey waxaa la haysan karaa muddada lagama maarmaanka ah si loo helo xogta dukumentigeeda, laakiin waa in aaney ka badnaan muddo 30 beri ah.

   j) Dukumenti laga heley hanti gacanta lagu soo dhigey waxaa la haysan karaa 3 bilood oo kale.

x) Naamuunadaha (Sample) waxaa loo hayn karaa loogana tirtiri karaa qaabka ay farto Wasaaraddu.

5. Markay jiraan sababo macquul ah Wasaaraddu waxay kordhin kartaa muddooyinka lagu xusey faqradda 4-aad ee xarfaha (b), (t) iyo (j). Muddo kordhinta waa in aaney ka badnayn 12 bilood oo laga bilaabo taariikhda dukumintiga ama hantida markii ugu horraysey gacanta lagu soo dhigey.
6. Sarkaal dakhli oo loo oggolaadey in uu adeegsado awoodda ku xusan faqradda 1-aad waxaa gacan siin kara ama la socon kara shaqaale u shaqeeya Wasaaradda, khabiir loo magacaabay sida uu dhigayo Qodobka 17-aad ama sarkaal u shaqeeya Dawladda oo gacan ku siinaya sida uu dhigayo Qodobka 18-aad. Qofka gacanta siinaya ama la socda sarkaalka dakhliga ee oggolaadey waa inuu oggolaansho haystaa uuna ku kormeeraa shaqada uu qabanayo sarkaalka dakhli ee uu gacanta siinayo.
7. Fulinta farqadaha qodobkani kama hor istaagayso sarkaalka dakhli jiritaanka xeerar la xiriira ilaalinta sirnimada, xasaannada iyo dannaha dadwaynaha.

## Qodobka 47-aad
## Xuquuqaha iyo Waajibaadyada Mulkiilaha

1. Mulkiilaha dhisme, goob, dukuminti ama hanti uu sarkaal dakhli doonayo inuu galo ama helo sida uu dhigayo Qodobka 46-aad faqradda 1-aad waxaa mulkiilahu uu sarkaalka ka dalban karaa inuu sarkaalku tuso oggolaanshaha lagu xusey Qodobka 46-aad farqaddiisa 2-aad. Haddii codsigaas loo jeediyo oo uu sarkaalkuna tusi waayo oggolaanshaha, markaa mulkiiluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu:-
   b) Sarkaalka u diido gelidda hantida ama helidda xog.
   t) ka dalbado sarkaalka in uu ka tago dhismaha ama goobta.
   j) Ka dalbado sarkaalka soo celinta dukumintiyada ama hantida uu sarkaalku heley waqtigaas.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND * STATE GENERAL SOLICITOR * المحامي العام للدولة

2. Mulkiilaha dhismaha, goob, dukuminti ama hanti uu sarkaal dakhli doonayo inuu galo ama helo sida uu dhigayo Qodobka 46-aad faqraddiisa 1-aad waa inuu intii macquul ah u fududeeyaa oo gacanna ka geystaa sidii si taabogal ah loogu fulin lahaa awoodda loo oggolaadey. Haddii uu gacan siin waayo sarkaalka dakhliga waxay caddayn u tahay carqaladayn cashuur qaadista sida uu dhigayo Qodobka 16-aad.
3. Mulkiilaha dukuminti ama hanti laga hayo sida uu dhigayo Qodobka 46-aad faqradda 4-aad waa uu fiirin karaa wuxuuna nuqullo ka samaysan karaa dukumintiyada laga hayo. Fiirinta iyo nuqulka sameysashada waxaa kharashkeeda bixinaya qofka, xilliga ay fiirinta hantida iyo nuqul samaysashadu dhacayso waa saacadaha caadiga ah ee xafiiska Wasaaraddu shaqeynayo, iyadoo loo kormeerayo hantida sida ay Wasaaraddu go'aamiso.
4. Haddii dukuminti, hanti ama naamuunad ay luntey, dhibaato soo gaartey ama la tuuro, iyadoo la adeegsanayo awoodaha uu bixinayo Qodobka 46-aad, Wasaaraddu waa inay mulkiilaha ka siiyaan mag dhaw u dhigma.
5. Xog kasta oo Wasaaraddu ku hesho sifo aan waafaqsanayn xeerarka dakhliga ma adeegsan karaan, kumana dacwayn karaan cashuur bixiyaha.

## Qodobka 48-aad
## Ogeysiiska Lagu Dalbanayo Macluumaad

1. Wasaaraddu waxay iyadoo ogeysiis qoraal ah siinaysa qof ku waajibin kartaa inuu keeno macluumaad kasta oo si hubaalnimadeedu macquul tahay loogu sharxay ogeysiiska. Tani waxay la mid noqon kartaa in qofka lagu waajibiyo inuu sameeyo dukuminti, taasoo ay ka mid tahay diyaarinta iyo fayl gareynta faah-faahinta ay tahay in lagu daro cashuur celinta qof kale. Qofka hela ogeysiis waa inuu u hoggaansamaa waqtiga lagu cayimey ogeysiiska.
2. Wasaaraddu waxay iyadoo ogeysiis qoraal ugu sheegaysa qof ka dalban kartaa in uu hor yimaado, si baaris loogu sameeyo ama wax looga xaqiijiyo. Baaristu waxay dhacaysaa waqti iyo goob lagu cayimey qoraalka ogeysiiska ah. Baarista waxaa sameynaya sarkaal dakhli oo si gaar ah uu qoraal ugu oggolaadeen

Wasaaraddu. Oggolaanshaha waa in si cad loogu aqoonsadaa sarkaalka. Ogeysiiska ayaa laga yaabaa inuu qofku ku waajibiyo in uu goobta baarista keeno dukuminti uu hayo. Waa in dukumintiga qoraalka ah ogeysiiska gudihiisa si cad loogu tilmaamo. Qofka baarista lagu sameynayo wuxuu xaq u leeyahay inuu qabsado oo uu matalo sharci yaqaan ama cid kale oo matasha inta ay socoto baaristu.

3. Ogeysiiska loo bixiyey si waafqsan faqradaha 1-aad ama 2-aad waa in gacanta loogu geeyaa qofka uu ku socdo ama in ogeysiiska la geeyaa goobtii ugu dambeysey ama uu caadi ahaan ganacsiga uu ku leeyahay ama uu deggan yahay. Ogeysiiska waxaa loo geyn karaa isla waqtiga uu sarkaal dakhli doonayo in uu galo dhismaha, goob ama helo dukuminti ama hanti sida uu dhigayo Qodobka 46-aad.
4. Waa in qof kasta uu u hoggaansamaa ogeysiiska lagu sheegey faqrada 1aad ama 2aad haddii qofka lagu leeyahay cashuur ama haddii kaleba iyo haddii ogeysiiska, maclumaadka ama baaristu ay la xiriirto arrimaha cashuurta ee qofka ama qof kale.
5. Fulinta farqadaha qodobkani kama hor istaagayso sarkaalka dakhli jiritaanka xeerar la xiriira ilaalinta sirnimada, xasaannada iyo dannaha dadwaynaha.

## Qodobka 49-aad
## Hanti-dhawr Cashuureed

1. Wasaaraddu waxay Hanti-dhowrka Guud ka codsan kartaa inuu baaris cashuureed ku sameeyo cashuur-bixiye iyo xafiis-cashuureed si waafaqsan awoodaha lagu sheegay Qodobada 46aad iyo 48aad.
2. Wasaaraddu waxay qof u soo xulan kartaa in hantidhowr lagu sameeyo iyadoo ku xisaabtamaysa: -
   - b) Taariikhda qofka uu u leeyahay u hoggaansamidda iyo u hoggansamid la'aanta xeerarka dakhliga.
   - t) Qaddarka lacagta ay tahay in uu qofku u bixiyo cashuur ahaan.
   - j) Nooca ganacsiga ama hawlaha kale ee uu ku jiro qofka.

x) Shuruudo diyaarintoodu qayb ka ahayd qorshaha maareynta u hoggaansamidda cashuuraha oo ay ku jiri karto in si nasiib ah hantidhawr loogu sameeyo cashuur celinadii la soo xareeyay.

Kh) Arrimo kale oo ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon yihiin hubinta in la soo ururiyo cashuuraha maqan.

3. Hantidhowr lagu sameeyey qof kama joojineyso in qofkaa mustaqbalka mar kale lagu sameeyo hantidhowr. Wasaaraddu waa in ay hubisaa inay jiraan sababo macquul ah oo mar labaad loo sameeyo hantidhowr, gaar ahaan iyadoo tixgelinaysa arrimaha lagu xusey faqradda 2-aad.
4. Hantidhowrka waxaa loo sameyn karaa ujeeddooyin ka baxsan kuwa hal xeer dakhli si waafaqsan Qodobka 8-aad.

**CUTUBKA 6-aad**

# QIIMAYNTA CASHUURAHA WAAJIBAY

## Qodobka 50-aad

## Qiimeynta iyo Isqiimeynta

1. Qiimeynta cashuurta waxaa sameeya: -
   b) Qofka xareynaya cashuur celin marka ay la xiriirto is qiimeyn.
   t) Wasaaradda ayaa samaynaya qiimaynta marka isqiimaynta qofka wax-ka--bedel yar lagu samyanayo.
2. Markuu qof ku guul darreysto in uu cashuur celinta sameeyo waqtigii laga rabey sida uu dhigayo xeer dakhli, taasoo ay ka mid tahay cashuur celin ay ka dhalaneyso is qiimeyn, Wasaaraddu waxay samaynaysaa dib u qiimeyn. waxayna adeegsanaysaa qiyaasidda ugu wanaagsan iyo macluumaadka macquulka ah ee la heli karo marka ay sameynayaan qiimeynta si waafaqsan Qodobka 44-aad.
3. Wasaaraddu waxay wax-ka-beddel yar ku sameyn kartaa qiimeyn, taasoo ay ka mid tahay is qiimeyn, iyadoo sameynaysa qiimeyn wax yar laga beddeley. Ma jiro qof kale oo aan ahayn sarkaal dakhli oo oggolaansho ka haysta Wasaaradda oo samayn kara qiimayn waxyar laga baddelay.

4. Ma jiro waqti xaddidan oo ay Wasaaraddu tahay in ay qiimeyn ku sameeyso oo ay ka mid tahay qiimeynta wax-ka-beddelka yar ah marka ay jirto khiyaanno, bixin la'aan ku talogal ah ama waajib gudasho la'aan ba'an oo uu cashuur bixiye sameeyo ama qof kale u sameeyo.
5. Iyadoo laga duulayo faqradda 4-aad, Wasaaraddu waxay awood u leedahay in ay qiimeyn asal (original assessment) ah sameyso, waxayna dhacaysaa 4 sano oo ka bilaabata taariikhda ay Wasaaraddu markii ugu horreysey awood ay u lahayd in ay sameeyso qiimeynta.
6. Iyadoo ku xiran faqradda 4-aad, awoodda Wasaaraddu ay u leedahay inay qiimeyn wax-ka-beddel yar ku sameeyaan waxay dhacaysaa 4 sano oo ka bilaabata: -
   b) Marka wax-ka-beddel yar lagu sameeyo is qiimeyn, maalinta ay tahay in la xareeyo cashuur celin ka dhalatay qiimeyntaas ama, haddii waqtigu ka dambeeyo, taariikhda cashuur celinta la soo xareeyo.
   t) Marka qiimeyn asal ah wax-ka-beddel yar lagu sameeyo, taariikhda Wasaaraddu markii ugu horreysey ay xaq u lahayd in ay sameyso qiimeyn asal ah.
   j) Marka qiimeyn wax-ka-beddel yar la sameeyay oo wax laga beddelo, taariikhda lagu xusey faqradda 6-aad xarfeheeda (b) ama (t) ee qiimeyntii asalka ahayd ee wax-ka-beddel yar lagu sameeyey.
7. Qiimeyn lagu sameeyey si waafaqsan cutubkan waxaa loola dhaqmayaa sidii in lagu sameeyey xeerka dakhliga ee maamulaya qofka ama arrinta la qiimeynayo.

## Qodobka 51-aad
## Qiimayn Hordhac ah iyo Dammaanad

1. Xaaladaha lagu qeexay Qodobka 41-aad farqaddiisa 4-aad, Wasaaraddu waxay qiimayn hordhac ah ku sameyn kartaa cashuur ku waajibtey ama ku waajibi doonta qof sida uu qeexayo xeerka dakhliga. Qiimayntani waxay dhacaysaa haddii qofka ay waajib ku tahay in uu soo xareeyo cashuur celin iyo haddii kaleba. Qiimeyn hordhac ah waxay la halmaashaa muddo ama muddooyin ama

waxay khuseysa dhacdooyin ama arrin ay Wasaaraddu ku cayimayso ogeysiiska qiimeynta.

2. Halkii laga sameyn lahaa qiimeyn hordhac ah Wasaaraddu waxay qof ka oggolaan kartaa rahan loogu talogaley cashuurta hadda lagu leeyahay iyo tan mustaqbalka lagu lahaan doono hadba sida ay Wasaaraddu ay u aragto in ay ku habboon tahay.
3. Wasaaraddu waa in ay adeegsataa qiimeynta ugu wanaagsan iyo macluumaadka macquulka ah ee la heli karo marka ay sameynayso qiimeyn hordhac ah ama ay goynayso xaddiga rahanta.
4. Haddii aanay Wasaaraddu si kale ugu wargelin ogeysiinta qiimeynta, qofna kama qaadayso qiimeyn hordhac ah waajibkii saarnaa oo ahaa in uu soo xareeyo cashuur celin sida uu waajibinayo xeerka dakhliga.
5. Soo xareynta cashuur celinta, oo ay ka mid tahay markay ka dhalato is qiimeyn, saamayn kuma yeelanayso qiimeyn hordhac ah.
6. Cashuur kasta oo bixinteeda ka dhalatay qiimayn hordhac ah, waxaa laga jarayaa cashuurta ay tahay in la bixiyo isla muddadaas, si looga hortago cashuur laba jeer la qaado.

## Qodobka 52-aad
## Qiimayn Wax-ka-beddel Yar Lagu Sameeyey

1. Wasaaraddu waxay qiimeyn ku sameyn kartaa wax-ka-beddel yar si loo hubiyo in cashuur bixiyaha lagu leeyahay cashuur cadadeedu saxan tahay marka loo eego arimaha sababay in dib u qiimeeyn lagu sameeyo. Wasaaraddu waa in ay adeegsataa qiyaasidda ugu wanaagsan iyo macluumaad macquulka ah ee la heli karo marka uu samaynayo qiimeynta wax-ka-beddel yar lagu samaynayo.
2. Wasaaraddu waa in aysan marnaba dib u eegis hor leh ku sameyn qiimeyn wax-ka-beddel yar horay loogu sameeyey ama wax laga dhimay iyadoo la raacayo go'aan ay gaartey maxkamad awood u leh, hadii aanan go'aankaas ama amarkaas maxkamadeed la laalin.

3. Qiimeyntu waxay saameynteedu ku egtahay marka wax-ka-beddelka yar lagu sameeyo.

## Qodobka 53-aad
## Wargelinta Qiimeynta

1. Markay Wasaaraddu sameyso qiimeyn waafaqsan xeer dakhli, waa in ay ogeysiis qoraal ah oo sheegaya qiimeynta u gudbisaa cashuur bixiyaha. Marka laga soo tago wax kasta oo kale oo uu farayo xeerka dakhligu ee ay khuseyso, wargelinta qiimeynta waa in ay ku caddahay: -
   b) Magaca cashuur bixiyaha iyo lambarka LAC (haddii uu leeyahay) ee cashuur bixiyaha.
   t) Qiimaynta Wasaaradda ee cashuurta laga rabo cashuur bixiyaha muddada, dhacdada iyo arrinta ay la xiriirto qiimaynta.
   j) Qaddarka cashuurta weli harsan ee ay tahay in la bixiyo ka dib marka la xisaabo waxaa horey ugu maqnaa, waxaa laga jaray ama lacagaha uu horey u bixiyey.
   x) Sida qiimeynta loo xisaabiyey.
   Kh) Sababaha ay Wasaaraddu qiimeynta u sameysay.
   d) Taariikhda ay waajib tahay in la bixiyo cashuurta.
   r) Waqtiga, goobta iyo qaabka looga hor imaan karo qiimeynta.

## CUTUBKA 7-AAD
## XALLINTA KHILAAFADKA CASHUURAHA
## Qodobka 54-aad
## Go'aamada Cashuurta

1. Go'aan cashuureed waa go'aan rasmi ah oo ay soo saarto Wasaaradda Maaliyadu, kaasoo qeexaya xaqa, waajibaadka ama xaaladda cashuureed ee qofka cashuur-bixiyaha ah ama hay'ad, iyadoo lagu saleynayo xeerarka dakhliga.
2. Go'aan cashuureed waxaa la gaaray markay:-

b) Wasaaraddu qiimeyn sameyso, oo ay wargelinta qiimeynta gaarsiiso cashuur bixiyaha.

t) Jiraan go'aamo cashuureed kale, oo ay Wasaaraddu qofka gaarsiiso wargelinta go'aanka oo qoraal ah.

3. Haddii aysan jirin Wargelinta lagu sheegay faqradda 2-aad xarafka (t), qofka uu go'aanku saameeyey wuxuu ku doodi karaa in Wasaaraddu ay gaartey go'aan cashuureed oo aanan la aqbali karin marka ay jiraan arrimaha soo socda:-

   b) Marka xeerka dakhligu uu cayimayo waqtiga ay tahay in Wasaaraddu ay qaadato go'aan, waqtigii go'aankaas lagu qaadanayeyna uu dhacay.

   t) Marka xeerka dakhligu uusan cayimeynin waqtiga go'aanka lagu gaarayo, 30 maalmood, kadib marka qofka ay arrintu saameysay uu Wasaaradda u soo gudbiyo codsi uu kaga codsanayo in uu go'aanka gaarto.

4. Siyaabaha soo socda ayaa caddeyn buuxda u noqon kara in go'aan cashuureed la gaarey, isla markaana ay tahay caddeyn sax ah:-

   b) Markay la xiriirto qiimeyn, wargelinta qiimeynta ama dukumenti ay soo saartey Wasaaraddu oo ay ku sheegayso in uu yahay nuqulka wargelinta.

   t) Markay la xiriirto arrin kale, qoraal wargelin oo go'aan ah ama dukuminti ay soo saartey Wasaaraddu oo sheegaya in uu yahay qoraal xusuusin ka ah (memorandum) go'aanka.

5. Cidda uu si toos ah u saameynayo go'aan cashuureedka ayaa ka caban karta go'aankaas si waafaqsan cutubkan.

6. Haddii waqtigii ku habboonaa looga soo caban waayo go'aan cashuureedkaas wuxuu noqonayaa mid kama dambeys ah.

## Qodobka 55-aad

## Cabashada ka dhanka ah

## Go'aan Cashuureedka Wasaaradda

1. Iyadoo la tixraacayo xeerka dakhliga, haddii qof uu ku qanci waayo go'aan cashuureed oo saameynaya, wuxuu Wasaaradda u gudbin karaa cabasho uu uga soo horjeedo go'aankaas. Cabashadaas waa in lagu xareeyaa mudo 15 maalmood gudahooda oo ka bilaabmaneysa maalintii go'aankaas la gaarey, waana inay ahaato mid qoraal ah oo si cad u sheegaysa sababaha loo cuskadey cabashada. Waana loo kordhin karaa muddada gudbinta cabashada haddii ay jiraan sababo macquul ah.
2. Go'aan Cashuureedka waxaa la hakinayaa laga bilaabo waqtiga qofku uu soo gudbiyo cabashada ku aaddan go'aan cashuureedka ama muddo kordhinta muddada gudbinta cabashada ilaa waqtiga qofkii cabashada soo gudbiyey lagu wargelinayo go'aankii laga qaatay cabashadiisa.
3. Ka dib marka qiimeeyaan cabashadii loo soo gudbiyey, Wasaaraddu waa in ay go'aansato in ay wax-ka-beddelaan go'aan cashuureedka gebi ahaantii ama qayb ahaantii ama ay go'aan kaga hortimaaddo cabashidii loo soo gudbiyey. Go'aanka laga qaato ka cabasho go'aan cashuureed waxaa loo yaqaanaa "go'aan ka gaaridda is hortaag".
4. Ka dib markay qaataan go'aan ka gaaridda is hortaag, Wasaaraddu waa in sida ugu dhakhsiyaha badan ee macquulka ah ay qofka sameeyey is hortaaga ay ku siisa ogeysiis go'aanka laga qaatay cabashadiisii. Ogeysiiska waa in uu ku qornaado sababaha ay Wasaaraddu u cuskatey qaadashada go'aanka.
5. Haddii Wasaaraddu aysan ogeysiiska go'aankooda ku bixin 30 maalmood gudahood ka dib markii loo soo gudbiyey cabashada, qofku wuxuu dooran karaa inuu u qaato in Wasaaraddu ay aqbashay cabashadii go'aanka cashuureed. Qofka doorashadiisa waa in uu ka dhigaa qoraal una gudbiyaa Wasaaradda.

6. Qofka aan ku qancin go'aan ka gaaridda cabashadiisa waxa uu Guddiga Xallinta Khilaafaadka u qaadan karaa is-hortaag ka dhan ah go'aanka Wasaaradda muddo 30 maamlmood gudahood ah.
7. Haddii aan is-hortaag laga qaadan go'aan ka gaaridda cabashada ee Wasaaradda muddada ku cad farqadda 4aad wuxuu noqonayaa mid kama dambeys ah.

## Qodobka 56-aad

## Garmaqalka Guddiga Xallinta Khilaafaadka

1. Cashuur-bixiyuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu qoraal dacwadeed u soo gudbiyo Guddiga Xallinta Khilaafaadka, ka dib markuu ka cabanayo go'aan cashuureed oo ka soo baxay Wasaaradda. Qoraalka dacwadda waa in uu ku jiro faah-faahinta go'aanka la cabanayo, sababaha cabashada iyo caddeymaha taageeraya.
2. Guddigu wuxuu diiwaangelinayaa dacwada, wuxuuna u gudbinayaa Wasaaradda, taasoo leh muddo 15 maalmood oo ay ku soo gudbiso jawaabta oo qoraal ah.
3. Guddigu wuxuu qabanayaa dhegeysi rasmi ah oo dhinacyada loo oggol yahay inay soo bandhigaan caddeymo iyo markhaatiyaal, iyadoo dhegeysigu uu dhacayo ugu badnaan 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta diiwaangelinta dacwada.
4. Kadib dhammaadka dhegeysiga, Guddigu wuxuu soo saaraa go'aan qoraal ah ugu dambeyn 15 maalmood gudahood.
5. Go'aanka Guddiga waa la hirgelinayaa lana dhaqangalayaa, waana mid loo qoollan yahay, hase yeeshee haddii go'aanka looga qaato rafcaan Maxkamadda Sare, hirgelinta go'aanka waa la hakinayaa ilaa Maxkamadda sare ay ka soo saarto go'aan kama dambeys ah.

## Qodobka 57-aad
## Rafcaan ka dhan ah Go'aanka
## Guddiga Xallinta Khilaafaadka

1. Dib u eegista go'aamada laga gaaro rafcaan ka dhan ah go'aan cashuureed ee ay dhigayaan xeerarka dakhliga waxaa awood u leh oo keliya Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland.
2. Qofka aan ku qancin go'aanka Guddiga Xallinta Khilaafaadka wuxuu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland. Rafcaanka waxaa lagu maamulayaa habraacyada caadiga ah ee loo maro rafcaanka Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland.
3. Ogeysiiska rafcaanka waa in lagu xareeyaa Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmaysa marka ogeysiiska go'aan ka guddiga loo gudbiyo darafyada dacwadda. Qofka wuxuu Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland ka codsan karaa in ay u kordhiso waqtiga uu ku soo xaryenayo ogeysiiska rafcaanka. Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland waxay u sameyn kartaa muddo kordhin haddii codsaduhu uu muujiyo sababo maan-gal ah oo keeney daahidda.
4. Rafcaanluhu waa in uu nuqulka ogeysiiska rafcaanka ku soo gaarsiiyaa Wasaaradda 5 maalmood gudahood markuu ogeysiiska rafcaanka u geeyo Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland.
5. Markay tixgeliso rafcaanka, Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland waxay rafcaanka ka bixin kartaa amarka ay u aragto in uu ku habboon yahay.

## Qodobka 58-aad
## Dhismaha Guddiga

1. Xeerkan wuxuu aasaasayaa Guddiga Xallinta Khilaafadka la xiriira cashuuraha.
2. Guddigu wuxuu ka kooban yahay shan (5) xubnood oo kala ah:-
   b) Guddoomiyaha Guddiga oo uu soo magacaabayo Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka. Waana in xubintaasi buuxisaa isla shuruudaha ku xiran Garsoore Maxkamad Rafcaan.

t) Labo xubnood oo leh khibrad aan ka yareyn 7 sano oo dhanka cashuuraha iyo maaliyadda kala ah, waxaana soo magacaabaya Wasiirka Wasaaraddda Maaliyadda.

j) Xubin uu soo magacaabayo Guddoomiyaha Ururka Qareennada, oo leh khibrad aan ka yareyn 7 sano oo qareenimo.

x) Xubin uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, oo leh khibrad aan ka yareyn 7 sano oo la xiriirta arrimaha ganacsiga iyo xisaabaadka.

4. Muddo xileedka Guddigu waa 5 sano mar labaadna dib ayaa loo soo magacaabi karaa.
5. Haddii qof kamid ah shaqaalaha dawladda Puntland loo magacaabo xubin kamid ah Guddiga Xallinta Khilaafaadka waa in uu shaqada dawladda iskaga casilaa ka hor inta aan loo dhaarin xubinimada Guddiga Xallinta Khilaafaadka.

## Qodobka 59-aad

## Shuruudaha Magacaabista

Xubnaha Guddiga waa in ay buuxiyaan shuruudahan soo socda:-

1. Waa inuu yahay/tahay muwaadin Soomaaliyeed oo reer Puntland ah, muslim ah gutana waajibaadka Diiniga ah.
2. Waa in da'diisu/da'deedu ka yareyn 30 sano.
3. Waa inuu/inay haystaa/haysataa ugu yaraan shahaadada darajada 1aad ee jaamacadda, leeyahayna khibrad shaqo oo aan ka yareyn 7 sano.
4. Waa inaan maxkamadi ku ridin shanti (5) sano ee u dambaysay xukun ciqaabeed.
5. Waa inuu yahay qof ku sifeysan hufnaan, akhlaaq iyo daacadnimo.
6. Waa inuu maskax ahaan fiyow yahay.

## Qodobka 6o-aad
## Dhaarinta Iyo Dhawrsanaanta Xubnaha Guddiga

1. Xubnaha loo magacaabo ka mid noqoshada Guddiga waxaa waajib ku ah inay maraan dhaarta Dastuuriga ah, waxaana dhaarinaya Maxkamada Sare.
2. Marka la soo dhammaystiro dhaarinta xubnaha Guddiga waxaa liiska xubnaha guddiga oo dhammaystiran soo saaraya Gudoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka.
3. Ka dib marka loo dhaariyo xubnaha guddiga sida ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan waxay yeelan doonaan xasaannad xil-gudasho oo lamida ah mida Garsoorayaasha Maxkamadda Rafcaanka.

## Qodobka 61-aad
## Awoodaha Iyo Waajibaadka Guddiga

Guddiga Xallinta Khilaafaadka Cashuuraha wuxuu leeyahay awood iyo waajibaad dhammaystiran oo la xiriira xallinta khilaafaadka cashuureed, hubinta hoggaansanaanta sharciga cashuuraha iyo ilaalinta mabaadi'da cadaaladda, iyadoo la raacayo qodobada hoos ku xusan: -

(1) Xallinta Khilaafaadka Cashuureed: -

b) Guddigu wuxuu mas'uul ka yahay xallinta khilaafaadka cashuuraha iyo go'aan ka gaarista dacwadaha la xiriira murannada cashuureed ee dalka, isagoo ku dhaqmaya dhexdhexaadnimo, daacadnimo iyo caddaalad.

t) Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu go'aan ka gaaro cabashooyinka la xiriira go'aannada Wasaaradda ee khuseeya bixinta cashuurta, qiimaynta cashuuraha iyo arrimo kale oo la halmaala.

j) Guddigu wuxuu dhagaysan karaa, go'aanna ka gaari karaa cabashooyinka ay gudbiyaan muwaadiniinta iyo ajaanibta dalka deggen ee ka soo horjeeda go'aamada cashuureed ee kasoo baxay Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee dakhli ururinta.

x) Guddigu wuxuu waajib ka saaran yahay in uu si caddaalad ah oo waafaqsan sharciga u dhegaysto cabashooyinka labada dhinac (cashuur-bixiyaha iyo dawladda), isla markaana uu soo saaro go'aamo caddaalad iyo sinnaan ku dhisan.

(2) Hubinta Hoggaansanaanta Sharciga Cashuuraha: -

b) Guddigu wuxuu mas'uul ka yahay hubinta in si waafaqsan sharciga loogu hoggaansamo xeerarka cashuuraha ee Puntland.

t) Guddigu wuxuu xaq u leeyahay in uu kormeero habka maamulka cashuuraha ee Gobollada, isagoo qiimeynaya hufnaanta iyo caddaaladda maamulkaasi, waxaana uu warbixin lix-biloodle ah siinayaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

j) Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu fasiraad sharciyeed ka bixiyo xeerarka cashuuraha, haddii ay sidaas ka codsadaan hay'adaha dawladeed ama cashuur-bixiyeyaashu.

x) Guddigu waa inuu ilaaliyo mabaadi'da caddaaladda, sinaanta iyo habraaca dacwadaha madaniga ah, si loo dhiirigeliyo kalsoonida cashuur-bixiyaha iyo hoggaansanaanta sharciga.

Kh) Guddigu wuxuu mas'uul ka yahay kaydinta iyo ilaalinta dhammaan qoraallada iyo dukumintiyada la xiriira cabashooyinka dacwooyinka dhinacyada.

(3) Awoodda Go'aaminta iyo Fulinta: -

b) Go'aamada Guddigu waxay leeyihiin miisaan sharciyeed oo u dhigma go'aan Maxkamadeed oo ka soo baxay Maxkamadda Darajada Koowaad, waxaana ay noqonayaan kuwo si rasmi ah loo fulin karo marka ay dhaqan galaan.

t) Go'aamada Guddigu waa go'aamo maamul (administrative decisions), waxaana laga qaadan karaa rafcaan kama dambays ah muddo soddon (30) maalmood gudahood ah, kaasoo loo gudbin karo Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland.

(4) Madax-bannaanida Guddiga: -

b) Xubnaha Guddiga oo lagu dhisey Qodobka 58-aad ee xeerkan, waxay u madax-bannaan yihiin gudashada waajibaadkooda shaqo.

t) Go'aannadooda waxay ku gaaraan hab cod-bixin ah oo ku saleysan caddaalad iyo sinnaan waana hal-dheeri.

## Qodobka 62-aad
## Maamulka Hawlaha Guddiga

1. Guddoomiyaha Guddiga ayaa mas'uul ka ah isku dubbaridka habaynta iyo hoggaaminta hawlaha Guddiga.
2. Guddoomiyaha guddigu wuxuu jaangoynayaa fadhiyada guddiga iyo goobaha dhegaysiga dacwadaha.
3. Guddoomiyaha guddigu wuxuu mas'uul ka yahay soo saarista habraacyada dacwadaha.
4. Guddoomiyaha guddigu wuxuu mas'uul ka yahay isku dubbaridka hawlaha xafiiska guddiga sida helidda agabka shaqada, diyaarinta shaabadda guddiga iyo Maamulidda maaliyadda guddiga.
5. Xarunta dhexe ee Guddigu waa caasimadda Puntland ee Garoowe waxayna dacwadaha ku gali karaan meel kasta oo Puntland ka mid ah.
6. Guddigu waxay dhagaysiga dacwadaha ku galayaan ugu yaraan saddex xubnood.
7. Guddoomiyaha Guddigu wuxuu dacwadaha qaar u xilsaari karaa qaar kamida xubnaha guddiga.
8. Guddigu wuxuu magacaabi karaa hawlwadeennada lagama maarmaanka u ah shaqada guddiga.

## Qodobka 63-aad
## Xilka Ka Qaadisda Guddiga

1. Guddiga waxaa xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda: -
   b) Geeri.
   t) Is-casilaad qoraal ah oo uu u gudbiyo mas'uulkii soo magacaabay.
   j) Haddii uu gudan waayo shaqadiisa sababo la xiriira caafimaad darro soo wajahdey.
   x) Dayacaad iyo xil gudasho la'aan joogta ah.
   Kh) Markuu ku kaco falal ka hor imaanaya Diinta, Dhaqanka, Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.
   d) Haddii uu kamid noqdo shaqaalaha dawladda.
2. Haddii xubin kamid guddiga lagu soo eedeeyo arrimaha lagu sheegay Farqadda 1aad xarfaha (j, x, kh iyo d), Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka wuxuu soo magacaabayaa guddi ka kooban saddex (3) garsoore oo baaritaan iyo talo-bixin ka soo saara eedaymaha xubinta loo soo jeediyey.
3. Haddii Garsoorayaashu xubinta ku helaan eedaymihii loo soo jeediyey, waxay Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka u dirayaan talo-bixin la xiriirta go'aanka ay ka gaareen baaritaankaas.
4. Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka marka uu helo talo-bixinta garsoorayaasha kuna qanco haddii ay soo jeediyeen xilka qaadis, wuxuu xilka ka qaadaya xubintaas, isaga oo qoraal ku ogeysiinaya mas'uulkii soo magacaabay, kana codsanaya inuu soo magacaabo xubintii buuxin lahayd booska bannaanaaday.

# CUTUBKA 8-AAD
# BIXINTA IYO SOO CELINTA CASHUURTA
## Qaybta Koowaad
## Cashuur bixinta Joogtada ah
## Qodobka 64-aad
## Waqtiyada La Bixinayo Cashuuraha

1. Cashuurta waxaa la bixiyaa waqtiga lagu xusey xeerka dakhliga ee Cashuurta lagu soo rogey. Sida uu xeerkan qabo, Cashuurta waxaa la bixinayaa: -
   b) Marka Cashuurta lagu bixinayo qiimeynta sida uu dhigayo Qodobka 50-aad (Qiimeyn iyo is-qiimeynta) ama 51-aad (qiimeyn hordhac ah), taariikhda lagu xusey ogeysiiska qiimaynta ee Wasaaraddu bixisey sida uu dhigayo Qodobka 53-aad.
   t) Sida uu dhigayo Qodobka 52-aad marka Cashuurta lagu bixinayo qiimeyn wax yar laga beddeley, 30 maalmood ka dib taariikhda qofka qiimeynta lagu sameeyey loona geeyey ogeysiiska qiimeynta sida uu dhigayo Qodobka 53-aad.
   j) Marka laga hadlayo ganaaxyo sida uu dhigayo Cutubka 10-aad, taariikhda lagu cayimey wargelinta qiimeynta ee la siiyey cashuur bixiyaha sida uu dhigayo Qodobka 94-aad farqaddiisa 3-aad.
   x) Marka loo eego qaddarka lacagta ay tahay in la siiyo Wasaaradda sida uu dhigayo Qodobka 9-aad farqaddiisa 2-aad, 70-aad farqaddiisa 6-aad, 74-aad farqaddiisa 2-aad, ama 75-aad farqadihiisa (2-aad ama 5-aad), taariikhda lagu cayimey ogeysiisyada ku xusan qodobada ku jira xarafkan.
   Kh) Marka loo eego Cashuurta ku waajibtey sida uu dhigayo Qodobka 75-aad, taariikhda lagu cayimey ogeysiiska.
   d) Marka loo eego qaddarka lacagta ay tahay in la siiyo Wasaaradda sida uu dhigayo Qodobka 77-aad farqadihiisa 3-aad, 7 maalmood ka dib iibinta qaddarka lacagta gooni looga dhigey ama aan gooni looga dhigin, sida ay u soo kala horreeyaan.

r) Si waafaqsan Qodobka 84-aad marka loo eego soo xareynta qaddar lacag loo soo celiyey, 7 maalmood ka dib marka Wasaaradda ay geeyso ogeysiiska waajibinaya in qaddarkaa lacagta la bixiyo.

## Qodobka 65-aad
## Kordhinta Waqtiga Lagu Bixinayo Cashuur

1. Cashuur bixiye kasta wuxuu Wasaaradda ka codsan karaa in ay u kordhiso waqtiga uu ku bixinayo Cashuurta uu ku waajibyey xeer dakhli. Codsigu waa in uu qoraal ahaadaa.
2. Marka codsigu uu ku salaysan yahay sabab macquula, Wasaaraddu waxay kordhin kartaa taariikhda la bixinayo Cashuurta ama qayb ka mid ah Cashuurta. Waqti kordhinta waa in ay ku salaysan tahay shuruudaha ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon yihiin, oo ay ka mid tahay rahan. Wasaaraddu waa in ay codsadaha siisaa ogeysiis qoraal ah oo tilmaamaya go'aanka ay Wasaaraddu ka qaadatey codsiga.
3. Marka la bixiyo wakhti kordhin, iyadoo cashuur bixiyaha loo oggolaanayo inuu u bixiyo qayb-qayb oo uu cashuur bixiyuhu ku guuldayarsto in uu xataa hal mar u bixiyo qayb-qaybtii, gebi ahaan cashuurta soo hartey ayaa waajibeysa in uu hal mar ku bixiyo.

## Qodobka 66-aad
## Qaabka Loo Bixinayo Cashuurta

1. Cashuur bixiyuhu waa in uu Cashuurta ku waajibtey ku shubaa xisaabta Keydka uu ku leeyahay bangi ka mid ah bangiyada hadafkan ay u ansixisay Wasaaraddu, haddii in lagu bixiyo bangi la ansixiyey aanay suurtagal u ahayn, Cashuur bixiyuhu waa in uu Cashuurta ku bixiyaa xafiiska Wasaaradda si waafaqsan faqradda 2-aad.
2. Wasaaraddu waxay xafiis kamid ah xafiisyadeeda u oggolaan kartaa in ay qabtaan bixinta cashuuraha waana in ay u jaangoysaa xaddiga iyo qaabka lacag bixinta lagu aqbali karo. Afar iyo Labaatan (24) saac gudahooda markay qabtaan lacagta, saraakiisha dakhliga ee xafiiska waa in ay Cashuurta ay

qabteen ku shubaan xisaabta Keydka ee bangiga loo ansixiyey sida ay dhigeyso faqradda 1aad.

3. Bangiga ama xafiiska Wasaaraddu waa in ay warqadda lacag qabashada siiyaan cidda Cashuurta bixisey. Warqadda lacag qabashada waa in lagu aqoonsadaa Cashuur bixiyaha iyo LAC-iisa haddii uu leeyahay.

## Qodobka 67-aad
## Kala Horreynta Cashuur Bixinta

1. Marka Cashuur bixiyuhu ay tahay in uu bixiyo hal cashuur wax ka badan oo laga rabo, isla markaana uu bixiyo wax ka yar wadarta lacagta laga rabay, Wasaaradda ayaa go'aaminaysaa qaddarka Cashuureed ee la bixiyey. Xulidda Cashuurta loo tixgelinayo in la bixiyey waxaa gebi ahaanba ay go'aaminaya Wasaaradda mana loo baahna in la sheego sababaha loo cuskadey xulistan. Xeerkan ayaa loo adeegsanayaa haddii qaddarrada lacagta Cashuurta la bixinayo ay ku fadhido hal xeer dakhli ama ka badan.
2. Wasaaraddu waxay hirgelinaysaa nidaam lagu kala hormariyo bixinta Cashuurta.

## Qodobka 68-aad
## Xisaabaha Cashuurta ee Elektaroonigga ah

1. Wasaaraddu waxay yagleeli kartaa ayna ka shaqeysiin kartaa hannaan elektaroonik ah oo la socon kara xisaabaha Cashuurta ee Cashuur bixiyeyaasha. Hannaanka waxaa loo sameyn karaa loogana shaqeysiin karaa goonidiisa ama wuxuu qayb ka noqon karaa hannaan dukuminti elektaroonik ah oo loo abuuro si waafaqsan Qodobka 39-aad.
2. Wasaaraddu waxay u sameynaysaa habraac loogu talagalay xisaabaha elektaroonigga ah ee cashuurta, kuwaasoo ay tahay in lagu faafiyo mareegaha Wasaraadda. habraacu waa inuu oggolaadaa: -
   b) In laga jaro xisaabtiisa, marka cashuurta bixinteeda la gaaro.
   t) In cashuurta uu bixiyey lagu daro, xisaabtiisa.
   j) In cashuurta uu bixiyey loo eego cashuurta ay ahayd in uu bixiyo.

x) Arrimaha kale oo lagu xusey Qodobka 39-aad farqaddiisa 2-aad.

## Qaybta Labaad
## Ka soo qaadista Cashuur bixiyaha Cashuur ku Baaqatey

### Qodobka 69-aad
### Ku Dacweynta Cashuur Aan La Bixin

Cashuurtu waxay isu rogeysaa deyn ka maqan Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed maalinta cashuurta bixinteedu ay waajibto. Wasaaraddu waxay qof cashuur ku baaqatey ku dacweyn kartaa kagana soo qaadi karaan maxkamad kasta oo awood u leh qaadista dacwaddaas, iyadoo la raacayo habraaca hantida Dawladda loo difaaco.

### Qodobka 70-aad
### U Rahmashada Iyo Xaddiga Ku Dalicidda Hantida Lagu Dalacayo Rahanta

1. Markuu cashuur bixiye, bixin waayo cashuur waqtigii ay ku waajibtay bixinteedu, Wasaaraddu waxay u rahman kartaa hantida uu leeyahay cashuur bixiyuhu. Hantida waxaa loo rahmayaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. Waxaa la rahmi karaa hantida uu leeyahay cashuur bixiyaha, iyadoo aan loo eegin in hantidaasi ay gacan ugu jirto qof kale iyo in-kale.
2. Wasaaraddu waxay rahmaysaa hanti, iyadoo cashuur bixiyaha siinaysa ogeysiis qoraal ah. Ogeysiiska waxaa lagu caddeynayaa: -
   b) Magaca cashuur bixiyaha iyo LAC-iisa haddii uu leeyahay.
   t) Hantida la rahmey iyo ilaa xadka ay gaarsiin tahay rahmiddu.
   j) Cashuurta ama cashuuraha ay rahmiddu la xiriirto.
   x) Faah-faahinta awoodda ay Wasaaraddu u leedahay gacan ku dhigista iyo iibinta hantida si waafaqsan Qodobbada 71aad iyo 72aad.
3. Markay hantidu la xiriirta dhul ama dhismayaal, rahmiddu waxay ka bilaabaneysaa marka Wasaaraddu ay codsi lagu diiwaangelinayo rahmidda ay

ku xarayso Waaxda Dhulka ee degmada. Waaxda Dhulka waa in ay rahmidda ku diiwaangelisaa warqadda lahaanshaha hantida dhulka ama dhismayaasha.

4. Marka hantidu aaney ahayn dhul ama dhismayaal, rahmiddu waxay bilaabmeysaa marka ogeysiiska rahmidda la gaarsiiyo cashuur bixiyaha.
5. Hantida cashuur bixiyaha waxaa la rahmayaa ilaa inta ay gaarsiisan tahay cashuurta uusan bixin, ganaaxa ku uruurey ee la xiriira cashuurtaas iyo kharashka ku baxa rahmidda iyo iibinta.
6. Wasaaraddu waxay cashuur bixiye u gudbin kartaa ogeysiis qoraal ah oo:-
   b) Cayimaya kharashka rahmidda iyo iibinta hantida la rahmey ee ay galeen Wasaaraddu ka hor taariikhda aan ogeysiiska loo gudbin.
   t) Ku waajibinaya cashuur bixiyaha in uu kharashaadkaas siiyo Wasaaradda taariikhda lagu cayimey ogeysiiska.

## Qodobka 71-aad
## Gacan ku Dhigidda Hantida La Rahmey

1. Cashuur bixiye waa in uusan la tacaamulin ama ku doodin inuu la tacaamulayo hanti rahman marka Wasaaraddu ay gacanta ku dhigtay hantidaas. Wasaaraddu waxay gacanta ku dhigaysaa hanti iyadoo: -
   b) Marka hore u geynaysa ogeysiis waafaqsan faqradda 2-aad ka dibna gacanta ku soo dhigaya hantida markay tahay hanti la taaban karo.
   t) Cashuur bixiyaha u geynaysa ogeysiis waafaqsan faqradda 2-aad ka dibna ogeysiiskaa ka dhigaysa mid dadweynuhu wada heli karaan marka ay tahay hanti aan la taaban karin oo rahan laga dhigey.
2. Ogeysiis ay bixinayso Wasaaraddu ee la xiriira gacan ku dhigidda hanti rahman waa in ay cayintaa: -
   b) Magaca cashuur bixiyaha iyo LAC-iisa haddii uu leeyahay.
   t) Hantida la rahmey, in Wasaaraddu ay ku talo jirto in ay iibiyaan hantidaa iyo habka iibinta iyo waqtiga iibinta ee la soo jeedinayo.
   j) Haddii ay tahay hanti la taaban karo oo rahman, qaabka iyo goobta ay Wasaaraddu ay gacanta ugu dhigayso hantida.

x) In cashuur bixiyuhu uusan la tacaamuli karin hantida rahman isaga oo aan oggolaansho qoraal ah ka helin Wasaaradda.

3. Ogeysiintu waxay ku dhex jiri kartaa ama ay la socon kartaa ogeysiis abuuraya rahan, sida uu dhigayo Qodobka 70-aad farqaddiisa 2-aad.

4. Wasaaraddu waxay gacanta ku soo dhigi kartaa hantida la taaban karo ee lagu xusey ogeysiiska faqradda 2-aad, waxaana lagu maamulayaa habraaca soo socda: -

   b) Wasaaraddu waxay awood u adeegsan kartaa si toos ah iyo si dadban, iyadoo loo marayo wakiil arrintaan loo igmadey kadib marka la war geliyo.

   t) Marka hantida ay gacanta ugu jirto qof aan ahayn cashuur bixiyaha, Wasaaraddu waa in ay qofkaas gacanta ku haya hantida ay siiso nuqul ogeysiis ah ka hor inta aysan la wareegin gacan ku haynta hantidaas.

   j) Marka ujeeddadu tahay in lala wareego hantida, Wasaaraddu waxay adeegsan kartaa awood macquul ah, waxay waqtiga ay doonto geli kartaa dhismayaasha ama goobta lagu sharxay ogeysiiska waxaana weeydiisan karaan in boolisku gacan ka siiyo.

   x) Waqtiga ay la wareegayso hantida, Wasaaraddu waa in ay cashuur bixiyaha siisaa liiska hantida lala wareegay.

   Kh) Haddii ay hantidu tahay mid guurto ah, Wasaaraddu waxay hantida ku xareyn kartaa goob Wasaaraddu ay u aragto in ay ku habboon tahay, iyadoo kharashka ku baxaya uu bixinayo cashuur bixiyaha.

5. Iyadoo laga duulayo ujeeddooyinka ku xusan faqradda 4-aad xarafka (t), marka dadka hantida gacanta ku haya ay hal qof ka badan yihiin, in wargelinta la gaarsiiyo mid ka mid ah dadka hantida gacanta ku haya ayaa ku filan. Marka aan la heli karin dadka hantida gacanta ku haya midkoodna, wargelintu waa in looga soo tagaa dhismayaasha ama goobta la wareeggiddu ay ka dhacayso.

6. Marka laga reebo hantida loo iibiyey si waafaqsan Qodobka 72-aad, Wasaaraddu waa in ay gacan ku haynta hantida loo soo qabtey sida uu dhigayo Qodobkan ay gacan ku haynteeda u celiso: -

b) Islamarkiiba haddii hantida rahman loo sii daayo sida uu dhigayo Qodobka 73-aad.

t) 60 maalmood gudahood marka uu gacanta ku dhigo.

7. Celinta hantida ay ka hadleyso faqradda 6-aad xarafkiisa (t) meesha kama saareyso rahmanaanta hantida, laakiin Wasaaraddu mar labaad ma soo ceshan karto hantida mudo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo waqtiga ay celisay.

## Qodobka 72-aad
## Iibinta Hanti Rahman

1. Marka Wasaaraddu ay gacanta ku dhigto hanti rahman sida uu dhigayo Qodobka 71-aad, Wasaaraddu waxay iibin kartaa hantidaas, waxaana loo raacayaa habraaca soo socda: -
   b) Wasiirka Wasaaradda waa inuu ku soo saara wareegto ku aaddan iibinta ka hor inta la iibin hantida Rahman.
   t) Wasaaraddu waxay sugaysaa muddooyinka soo socda ka hor inta aysan iibin hantida rahman: -
      i. Haddii ay la xiriirto dhul ama dhismayaal, 30 maalmood ka dib marka la baahiyo wareegtada.
      ii. Haddii ay la xiriirto hanti doorsoomeysa oo guurta ah, hal maalin ka dib marka la baahiyo wareegtada.
      iii. Haddii ay tahay hanti ka duwan kuwa lagu xusay faqradda 1-aad xarafka t (i iyo ii), 14 maalmood ka dib marka la baahiyo wareegtadda.
   j) Wasaaraddu waxay awoodeeda iibinta ku fulin kartaa si toos ah ama si dadban, iyadoo adeegsanaysa wakiil la ansixiyey.
   x) Looma baahna amar maxkamadeed.

Kh) Wasaaraddu waxay iibin kartaa hanti Rahman, iyadoo aan xannibaado jirin haddii Wasaaraddu ay oggolaansho qoraal ah ka haysataan cashuur bixiyaha.

2. Marka Wasaaraddu ay iibiso hanti rahman, lacagta lagu iibiyo waa in loo isticmaalaa bixinta:-
   b) Waajibka cashuureed ee loo rahmay hantida iyo kharashka ku baxay iibinta hantida rahman.
   t) Qaddarka lacageed ee u waajibay qof kale oo rahan kale u haysta iyadoo la isugu xejinayo sida ay mudnaanta u kala leeyihiin.
   j) Cashuurta taagan iyo ganaaxyada uruurey.
   x) Cashuur kasta oo kale oo aan la bixin.

   Kh) Baaqi kasta oo ka harey cashuur hore.

   d) Wixii ka soo hara hantida Rahman ee la iibshay waxaa loo celinayaa mulkiilihii hantida lahaa.
3. Wasaaraddu waxay bixineysaa oo keliya qaddarka lacagta ah ee la xiriira kala mudnaan siinta lagu sheegey faqradda 2-aad xarafka (b) halkaas oo rahanka la dhigay ka hor inta aan kharashka lagu dallicin rahanka sida uu dhigayo Qodobka 72-aad
   b) Haddii hantidu ay tahay hanti ma guurto ah, rahanka waa in laga diiwaangeliyey Waaxda Dhulka ee degmada ka hor ku soo dalicidda kharashka rahanka sida uu dhigayo Qodobka 70-aad.
   t) Haddii ay tahay hanti kale, Wasaaraddu waxay ogeysiineysaa rahanta ka hor intii aan la abuurin ku soo dalicidda rahanta si waafaqsan Qodobka 70-aad, iyadoo loo marayo diiwaan guud oo uuna ku qanacsan yahay in uu helayo deyn dhab ah.
4. Wasaaraddu waa in ay cashuur bixiyaha siisaa qoraal faah-faahinaya qaabka lacagtii ka soo baxday iibka loo maamuley si waafaqsan farqadda 2-aad.
5. Haddii lacagta ka soo baxdey iibka aaney si dhammeystiran ugu filnayn, dabooli karinna qaddarka lacagaha rahanka, Wasaaraddu waa in ay qaadaa tallaabooyin cusub oo ay ku soo ururinayso lacagta dhiman si waafaqsan Qaybtan ama Qaybta 3-aad ee cutubka.

6. Qodobkan ma hor istaagayo ku dhaqmidda xuquuqaha Wasaaraddu ay u leedahay rahmaad kale, haddii ay tahay hantidan ama mid kale.

## Qodobka 73-aad
## Fasaaxadda Hanti Rahaman

1. Rahan loo sameeyey si waafaqsan Qodobka 70-aad waa in loo fasaxaa: -
   b) Marka Wasaaraddu iibiso hantida si waafaqsan Qodobka 72-aad.
   t) Marka cashuur bixiyaha uu Wasaaradda uu si buuxda u siiyo dhammaan lacagihii laga dhigey rahanka.
   j) Markay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon tahay.
2. Toddoba (7) maalmood gudahood marka la sii daayo rahanka ku xusan faqradda 1aad xarafaha (t) ama (j), Wasaaraddu waa in ay cashuur bixiyaha u gaysaa qoraal ogeysiinaya sii deyntaa.
3. Toddoba (7) maalmood gudahood marka la sii daayo rahan dhul ama dhismayaal ah, Wasaaraddu waa in ay fasaxidda kala shaqeysaa Waaxda Dhulka ee degmada. Marka uu fasaxo maamulka dakhligu, Waaxda dhulku waa in ay rahmanaanta ka saartaa waraaqaha lahaanshaha dhulka ama dhismayaasha.

## Qodobka 74-aad
## Xanibidda Qof

1. Marka qof uu ku guuleysan waayo in uu waqtigii loogu talo galey bixiyo Cashuur, Wasaaraddu waxay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha laanteeda Puntland ka codsanaysaa, iyadoo loo marayo habraaca wada shaqeynta hay'adaha dawladda, in qofkaas laga hor istaago in uu dalka ka baxo. Amarka Wasaaraddu waa in uu ahaadaa qoraal waana in uu ku socdaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha laanteeda Puntland.
2. Marka la siiyo amarka ku xusan faqradda 1-aad, Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha laanta Puntland waa in ay qofkaa ka hor istaagtaa in uu ka baxo dalka muddo toddoba (7) maalmood ah oo ka bilaabanta taariikhda la soo

gaarsiiyey. Hase yeeshee markuu ka codsado Xeer Ilaaliyaha Guud. Maxkamad awoodda u leh ayaa kordhin karta muddada.

3. Amarka ku xusan faqradda 1-aad wuxuu meesha ka baxayaa markuu qofku bixiyo dhammaan Cashuuraha lagu leeyahay ama uu dhigo rahan ay ku qanacdo Wasaaraddu.

## Qodobka 75-aad
## Xannibidda Hanti

1. Markay Wasaaradda u caddaato, iyadoo haysata sababo macquul ah in aan la bixin Cashuur la xiriirta badeeco la iibiyey, la soo dejiyey, lana dhoofiyey ama aan la bixin doonin, Wasaaraddu waxay: -
   b) Xakameyn kartaa badeecadaas.
   t) Xanibi kartaa oo uu baari kartaa dhismayaal, goob, baabuur ama hanti kale oo Wasaaraddu ay rumaysan tahay in badeecadaasi ay ku jiraan.
   j) Awood macquul ah u adeegsato ujeeddada xarfaha (b) iyo (t).
2. Awoodaha lagu xusey faqradda 1-aad waxaa lala adeegsan karaa awoodaha kale ee xeerku u jideeyey Wasaaradda.
3. Marka la xannibo hanti, dhismayaal, ama goob sida ay dhigeyso faqradda 1-aad, Wasaaraddu waa in ay ogeysiis qoraal ah gaarsiisaa cidda gacanta ku haysa hantida, dhismayaasha ama goobta. Haddii cidda gacanta ku haysa ay ka badan yihiin hal qof, waxa ku filan in ogeysiiska la gaarsiiyo mid ka mid ah cidda gacanta ku haysa.
4. Marka aan la heli karin cidda gacanta ku haysa midkoodna, ogeysiiska waa in looga soo tagaa dhismayaasha ama goobta ay xannibiddu ka dhacayso. Ogeysiiskuna waa in uu: -
   b) Aqoonsadaa uuna taxaa hantida, dhismayaasha ama goobta la xannibayo.
   t) Sheegaa in hantida, dhismayaasha ama goobta loo xannibey si waafaqsan Qodobkan iyo sababta loo xannibey.
   j) Sheegaa shuruudaha lagu sii deynayo, oo ay ku jirto rahanka loo baahan yahay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR النائب العام للدولة

x) Sheegaa shuruudaha lagu xaraashayo hanti kasta oo gacanta lagu dhigey.

5. Wasaaraddu waa ay sii wadi kartaa xannibaadda hanti, dhismayaal ama goob si waafaqsan faqradda 1-aad hadba middii yar muddooyinkan: -
   b) Muddada lagama maarmaanka u ah in lagu sameeyo qiimeyn hordhac ah ama mid wax-ka-beddel ah iyo in la adeegsado awoodaha ku xusan Qodobbada 70-aad, 71-aad iyo 72-aad.
   t) 14 maalmood gudahood.
6. Haddii muddada lagu xusay faqradda 5-aad, Wasaaraddu uu ku qanci waaydo in uu yahay mulkiilaha hantida, Wasaaraddu waxay alaabtaas ula dhaqmi kartaa in ay tahay hanti la rahmay, waxayna intaa ka dib hantida u iibin kartaa si waafaqsan Qodobka 72-aad.

## Qaybta Saddexaad

## Ka soo celinta Cid Saddexaad

## Qodobka 76-aad

## Maareeyeyaasha Hay'adaha/Shirkadaha

1. Marka hay'ad ay bixin weydo cashuur waqtigii loogu talo galey, Wasaaraddu waxay Maareeyeyaasha Hay'adda ay si wadajir ah ama si kelinmo ah ugu waajibin kartaa bixinta cashuurta. Wasaaraddu waa in ay ogeysiis qoraal ah oo la xiriira go'aanka gaarsiisaa Maareeyeyaasha Hay'adda. Haddii Wasaaraddu ay Maareeyeyaasha Hay'adda mid ama ka badan ay u raacato cashuurta, dhammaan Maareeyeyaasha Hay'adda ayaa si wadajir ah iyo si kelino ah loogu raacayaa cashuurta.
2. Faqradda 1-aad looma adeegsan karo haddii Maareeyeyaasha Hay'addu uu daryeel, dedaal iyo xirfad heer macquul ah uu ku bixinayo in ay hay'addu bixiso cashuurta. Heer macquul ah waxaa loola jeedaa iyada oo laga cabbir qaadanayo sida qof madax bannaan oo haya jago maamule oo u tallaabo qaadaya si ilaa xad xigmad ku dhisan.
3. Faqradaha 1aad iyo 2aad waxaa sidoo kale lagu maamulayaa qof: -
   b) Isu muujinaya in uu yahay Maareeyeyaha Hay'adda.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

t) Ahaa Maamulaha waqti ka mid ah 6dii bilood ee ka horreeysay dhacdada ay ka dhalatey in hay'adda cashuur lagu yeesho.

4. Xaddiga lacagta ay tahay in maareeyaashu u bixiyaan si waafaqsan Qodobkan waa cashuur shakhsi ahaan loogu leeyahay maareeyaasha Hay'adda sida uu dhigayo Qodobka 24aad farqadiisa 2aad. Marka uu maareeyhu bixiyo cashuur ka dhalatey faqradda 1-aad, maareeyuhu waxaa lacagta uu bixiyey ka soo ceshan karaa hay'adda sida deyn uu ku leeyahay hay'adda.

## Qodobka 77-aad
## Sii Maamule Hantiyeed

1. Sii-haye loo magacaabey hanti ku taalla Puntland waa in uu Wasaaraddu ugeeya qoraalka magacaabistiisa muddo toddoba (7) maalmood gudahood ah marka la magacaabo. Qoraalka magacaabista waa in ay ku xusantahay hantida uu sii maamulayo ee ku taalla Puntland uuna ka yahay sii maamule. Wargelinta waa in ay ku qoran yihiin: -
   b) Cinwaannada lagala xiriiri karo sii maamulaha.
   t) Faah-faahinta cashuur bixiyaha hantida leh ee sii maamulaha loo magacaabey in uu sii maamulo, faah-faahintaas waxaa kamid ah LAC-iisa haddii uu leeyahay.
2. Markay 7 maalmood gudahood ku hesho wargelinta lagu sheegey faqradda 1-aad, Wasaaraddu waa in ay wargelin siisaa sii maamulaha. Wargelintaas waa in ay ahaataa qoraal waana in ay cayintaa qaddar lacageed oo ay Wasaaraddu u aragto in ay ku filan tahay cashuurta lagu leeyahay ama lagu lahaan doono cashuur bixiyaha. Wasaaraddu waxay wargelin dheeraad ah u bixin kartaa si joogto ah.
3. Sii maamuluhu waa in uusan qaybin hantida uu u hayo muddo 21 maalmood oo laga soo bilaabo marka loo magacaabay sida ay dhigeyso faqradda 1aad. Xeerkan ma qabanyo haddii sii maamuluhu uu helo lacag ku filan qaybinta. Waqtigaas ka dib, sii maamuluhu: -

b) Waa in uu iibiyaa in ku filan hantida uu hayo si sii maamule ahaan ah si meel loogu dhigo qaddarka lacageed ee lagu sheegey faqradda 2-aad ee wargelinta Wasaaraddu ay ku sheegtey, (ka dib marka la bixiyo deyn kasta oo lahayd mudnaan).

t) Wuxuu ku khasban yahay in uu Wasaaradda siiyo qaddarka lacageed ee goonida loo dhigey (cashuurta lagu leeyahay cashuur bixiyaha).

4. Xeerkan wuxuu khuseeyaa wargelin kasta oo dheeri ah oo uu sii maamulaha helo sida ay dhigeyso faqradda 2-aad ilaa sii maamuluhu uu ka dhammeeyo dhammaan hantida uu hayo ama cashuurta laga wada bixiyo.
5. Markuu kharash ka bixiyo hantida uu hayo, sii maamuluhu waa in uu mudnaan siiyaa bixinta cashuurta ku waajibtey alaabaha, adeegyada iyo cashuurta taagan. Cashuurahaas waxay leeyihiin mudnaan ka badan deymaha kale ee Cashuur bixiyaha (marka laga reebo deynta rahan ahaan loo dhigey). Bixinta alaabaha ama adeegyada waxaa ka mid ah alaabaha ama adeegyada la soo dejiyey ama la dhoofiyey.
6. Ilaa xad inta uu sii maamule ku fashilmayo in uu gooni u dhigo qaddarka lacageed ee ay waajibineyso faqradda 3-aad, sii maamulaha waxa waajib ku ah in uu bixiyo oo Wasaaraddu siiya lacagta ay ahayd in gooni loo dhigo (taasoo ah Cashuurta ku waajibtay Cashuur bixiyaha).
7. Qaddarrada lacageed ee ay tahay in Wasaaraddu ay ka hesho sii maamulaha sida ay dhigayaan faqradaha 3 iyo 5 waa Cashuur shakhsi ahaaneed oo lagu leeyahay sii maamulaha.
8. Qodobkan dhexdiisa Sii maamule" waxaa loola jeedaa qof, hanti ku taalla Puntland gudaheeda ka ah: -

   b) Xaraashe, maamule ama amaano haye u ah qof musalifey.

   t) Sii maamule Maxkamad dibadeed magacowday ama ay maxkamaddu u magacowdey hanti ama hay'ad.

   j) Deyn bixiye la wareegey hantidii deynta lagu iibsadey (a mortgagee in possession).



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

x) Fuliyaha dardaaranka, maamulaha ama dhaxlaha/warasada hantida qof dhintey.

Kh) Qof maareynaya arrimaha shakhsi aan wax qabsan Karin.

d) Qof la wareegey/dhaxley shirikad dib u habeyn lagu sameeyey.

## Qodobka 78-aad
## Cid Saddexaad ee Qaameysan

1. Markuu cashuur bixiye uu cashuur ku bixin waayo wakhtigii loogu talogaley, Wasaaraddu waxay wargelin qoraal ah u geyneysaa cidda saddexaad oo u qaameysan cashuur bixiyaha. Sida ugu dhakhsiyaha badan ka dib markay gaarsiiso wargelinta, Wasaaraddu waa in ay cashuur bixiyaha gaarsiisaa nuqulka wargelinta.
2. Ka dib marka uu helo wargelinta lagu xusey faqradda 1-aad, cidda saddexaad ee u qaameysan waa in ay qaddarka lacagta ay siisaa Wasaaradda. Qaddarka lacagta waa in la bixiyaa taariikhda lagu cayimey wargelinta, waana inuu bixiyaa hadba qadarka ugu yar ee lacagahan hoose: -
   b) Dhammaan cashuurta lagu leeyahay cashuur bixiyaha.
   t) Lacagta ay cidda saddexaad ee qaameysan uu ku leeyahay cashuur bixiyuhu.
   j) Qaddarka lacagta lagu cayimey wargelinta.
3. Taariikhda lacag bixinta ee lagu cayimey wargelinta waa in aaney ka horreyn hadba midda dambeysa taariikhahan so socdo: -
   b) Marka la gaaro taariikhda la bixin lahaa lacagta cidda saddexaad ee qaameysan oo la siin lahaa cashuur bixiyaha ama cida mas'uul ka ah cashuur bixiyaha ay ka reebi laheyd qadar cashuur ah oo lagu soo dalacay.
   t) Taariikhda cidda saddexaad ee qaameysan la soo gaarsiiyo wargelinta.
4. Ka dib marka uu helo wargelinta lagu xusey faqradda 1-aad, cidda saddexaad ee qaameysan waa in aaney wax lacag ah siinin cashuur bixiyaha ilaa wargelintu ay waqtigeedu dhacayso sida u qoran Qodobka 78-aad farqadiisa 2-aad ama Wasaaraddu ay ka noqonayso wargelinta.

5. Qaddarka lacagta ee Wasaaraddu ay ka sugeyso cid sadddexaad oo qaameysan oo lagu sheegey faqradda 2-aad waa cashuur shakhsi ahaan loogu leeyahay cid saddexaad oo qaameysan sida u qoran Qodobka 24-aad farqadiisa 2-aad.
6. Lacagahaan soo socda ayaa loo tixgelinayaa in uu leeyahay cashuur bixiye: -
   b) Lacag hadda lagu leeyahay ama lagu yeelan doono cashuur bixiyaha.
   t) Lacag ku jirta ama noqon doonta kuwo loo hayo ama geli doona xisaab uu leeyahay cashuur bixiyaha.
   j) Lacag ku jirta ama noqon doonta mid gasha xisaab ay cid saddexaad u hayso in la siiyo cashuur bixiyaha.
   x) Lacag uu hayo qof wakiil u ah cida saddexaad si uu lacagta u siiyo cashuur bixiyaha.
7. Markii loo fiiriyo qodobkan: -
   b) Lacag waxaa ka mid ah deyn ahayd lacag ama lacag ahaan loo bixin karo.
   t) Cid saddexaad oo qaameysan marka ay la xiriirto cashuur bixiye, waxaa loola jeedaa qof uu lacag ku leeyahay cashuur bixiye, islamarkaana wakiil uga ahaa arimaha cashuuraha.

## Qodobka 79-aad
## U hoggaansamidda Wargelinta

1. Haddi cid saddexaad ay bixiso lacagtii cashuurta, si waafaqsan Qodobada 76aad ama 77-aad:-
   b) Cidda saddexaad waxaa loola dhaqmayaa in ay ku socoto oggolaansho ay bixiyeen cashuur bixiyaha iyo dhammaan shakhsiyaadka kale ee ay khuseyso.
   t) Qaan kasta oo dad ku leedahay cidda saddexaad oo ay ka hooseysa lacag bixin waa laga goynayaa qaddarta lacagta ah ee la bixiyey.

j) Cidda saddexaad waxaa magdhow laga siinyaa lacagta uga baxdey dacwooyinka madaniga ah ama ciqaabeed iyo dhammaan habraacyo garsoor iyo kuwo ka baxsan garsoor.

2. Wargelin loo bixiyey si waafaqsan Qodobka 76-aad ama 77-aad waxay dhaqan galkeedu ku egtahay marka cashuurta ama waajibaadyada lagu xusey dhex-deeda la bixiyo ama lagu qanco.
3. Marka cid saddexaad oo la gaarsiiyey wargelin waafaqsan Qodobada 76-aad ama 77-aad ay ugu hoggaansami weydo wargelinta in aaney haysan lacag ama hanti kale oo uu leeyahay ama uu dad ku leeyahay ama loo hayo cashuur bixiyaha, waa in uu qofka soo wargeliyaa Wasaaradda. Wargelintu waa in ay ahaataa qoraal waana in: -
   b) Lagu sharaxaa sababaha keeney inaan la bixin Karin.
   t) In la gaarsiiyo Wasaaradda sida ugu dhakhsiyaha badan ee macquulka ah ka dib marka cidda saddexaad ay ogaato in aaney bixin karin lacagaha, mar kasta, ka hor inta aan la gaarin waqtiga in lacagtaasi la bixiyo lagu cayimey wargelinta waafaqsan Qodobada 76-aad ama 77-aad.
4. Markay hesho wargelin waafaqsan faqradda 3-aad, Wasaaraddu waa in ay wargelin kale ay qoraal ku gaarsiisaa cidda saddexaad iyadoo:-
   b) Aqbalaysa wargelinta waafaqsan faqradda 3-aad ama la laalay ama wax ka beddelaya wargelinta waafaqsan Qodobada 76-aad ama 77-aad.
   t) Diidaya wargelintaas si waafaqsan faqradda 3-aad.
5. Xareynta wargelin waafaqsan faqradda 3-aad wax saameyn ah kuma laha sida shakhsi ahaan, cidda saddexaad loogu leeyahay lacagaha loo bixinayo si waafqsan Qodobada 76-aad, 77-aad iyo 26-aad farqada 2-aad. Ku lahaanshaha shakhsi ahaaneed waxaa ay baaba'aysaa ama beddelmeysaa haddii Wasaaraddu ay laasho ama baabi'iso wargelinta si waafaqsan Qodobada 76-aad iyo 77-aad.
6. Qodobkan dhexdiisa, "cid saddexaad" waxaa loola jeedaa sii maamule loo geeyey wargelin si waafaqsan Qodobka 76-aad ama cid saddexaad oo qaameysan oo loogu geeyey wargelin si waafaqsan Qodobka 77-aad.

## Qodobka 80-aad
## Wakiillada Dadka aan Degganeyn Dalka

1. Wasaaraddu markay aragto Xaaladaha soo socda waxay qofka gacanta ku haya hanti uu leeyahay qof aan degganeyn dalka fari kartaa in uu bixiyo cashuur isaga oo ka wakiil ah qofka aan degganeyn dalka. Qofkan waxaa loogu yeeraa wakiilka qof aan dalka degganeyn. Amarka Wasaaradda waa in isagoo wargelin qoraal ah loo geeyaa wakiilka. Xaaladaha laga hadlayo waa: -
   b) Markii qofka aan dalka deggenayn dalka uu cashuurta ku bixin waayo waqtigii la rabey.
   t) Markii Wasaaraddu ay sababo macquul ah dartood aaminsan tahay in qofka aan dalka degganeyn cashuurta bixin doonin waqtigii la rabey.
2. Wakiilka hela wargelin waafaqsan faqradda 1-aad waxaa ku waajib ah in uu bixiyo cashuur, isagoo ka bixinaya cashuurta ku waajibtey qofka aan dalka degganeyn, taasoo ku salalaysan qiimaha ugu hooseeya ee suuqa ay ka joogto hantida iyo qaddarta cashuurta aan weli la bixin ee lagu leeyahay qofka aan dalka degganeyn.
3. Marka loo eego qodobkan:-
   b) Qof aan dalka degganeyn oo kireysta diyaarad ama Markab, iyadoo kireysashada ka badan tahay 3 sano waxaa loo qaadanayaa in uu leeyahay diyaaradda ama marka muddadaas dhexdeeda.
   t) Kabtanka diyaaradda ama markabka waxaa loo qaadanayaa in uu gacanta ku hayo diyaaradda ama markabka.
   j) Amaano haye waxaa loola dhaqmayaa sidii in uu yahay qofka gacanta ku haya dhammaan hantida amaanada ah, waxaana hantidaas loola dhaqmayaa in ay wada leeyihiin ka faa'iideystayaasha amaanada.
4. Wasaaraddu waxay ku waajibin kartaa shuraako deegaan ah ama qofka deegaanka ah ee ka tirsan shuraakada in uu bixiyo cashuurta lagu leeyahay ama lagu lahaan doono qofka shuraakada ka mid ah ee aan deegaanka ahayn.

Waajibintaasi waa in ay ahaataa wargelin qoraal ah oo loo geeyo shuraakada deegaanka ah ama qofka shuraakada ka mid ah ee deegaanka ah.

5. Shuraako deegaan ah iyo cid kasta oo ka mid ah dadka deegaanka ee ka mid ah shuraakada oo hela wargelin waafaqsan faqradda 4-aad waxaa si wadajir ahaan iyo keli ahaanba loogu leeyahay iyaga iyo qofka shuraakada ka tirsan ee aan deegaanka ahayn in ay bixiyaan cashuurta qofka shuraakada ka tirsan ee aan deegaanka ahayn. Lacagta ay bixinayaan waa in aaney ka badan qaddarka saamiga qofka shuraakada ka mid ah ee aan deegaanka ahayn uu ka leeyahay hantida saafiga ah ee shuraakada.
6. Qaddarada lacagta uu wakiilka, shuraakada deegaanka ama qofka shuraakada ka mid ah ee deegaanka ay tahay in ay siiyaan Wasaaradda sida ay dhigayaan faqradda 2aad ama 5aad waa cashuurta shakhsiga ah ee lagu leeyahay wakiilka, shuraakada deegaanka ama qofka deegaanka ah ee shuraakada ka mid ah sida ku cad Qodobka 24-aad farqada 2-aad.
7. Markuu qof lacag siiyo Wasaaradda iyadoo laga ambaqaadayo wargelinta lagu sheegey faqradda 2aad ama 5aad: -
   b) Qofka wuxuu lacagtiisa ka soo ceshan karaa qofka aan deegaanka ahayn.
   t) Marka la fiiriyo farqada 7-aad xarafkeeda (b), qofku wuxuu ka goosan karaa hantida oo ay ka mid tahay lacagta uu leeyahay qofka aan deegaanka ahayn ee uu gacanta ku hayo ama soo gasho gacanta qofka qaddar aan ka badneyn lacagta uu bixiyey.
   j) Qofka cidna uma raacan karto qadarka lacageed ee uu bixiyey uuna ka reebtay hantida si waafqsan farqada 7-aad xarafka (t) ee qodobkan.

**CUTUBKA 9-aad**

## CASHUUR DHIMIS, KA CAFIN IYO DIB-UCELIN

### Qodobka 81-aad
### Xadadka Cashuur Dhimista

1. Markay qiimeynayaan, qaadayaan ama dib u soo celinayaan Cashuur, Wasaaraddu waa in aanay tixgelin cashuur dhimis kasta oo aan waafaqsaneyn waxyaabaha uu waajibinayo Qodobkan.
2. Cashuur dhimis kasta oo la sameeyo waa wax kama jiraan haddii aysan waafaqsanayn xeerarka dalka.
3. Awood Cashuur dhimis kasta oo uu adeegsado Wasiirku waa in loo raacaa habraaca ku qoran farqada 4-aad. Noocyada awoodaha la adeegsan karo waa:-
   b) Sameynta xeer nidaamiyeyaal.
   t) Adeegsiga hab kasta oo kale oo xeerarka waafaqsan.
4. Habraaca lagu sheegey faqradda 3-aad waa: -
   b) Wasiirku waa in uu soo saaro amar waafaqsan faqradda 6aad.
   t) Awoodda Cashuur dhimista ee la adeegsanayo waa in ay waafaqsan tahay shuruudaha iyo arrimaha lagu cayimey amarka.
   j) In Wasiirku si gaar ah u xaqiijiyo waafaqsanaantaas isagoo amar kale ku soo saaraya wareegto.
5. Waaxaha Dakhliga ee Wasaaradda waa in ay muddo kadib, Wasiirka u soo jeediyaan: -
   b) Shuruudo ama arrimo lagu oggolaanayo Cashuur dhimis iyadoo la adeegsanayo awoodda lagu xusey faqradda 3-aad.
   t) Habraacyo ay tahay in la raaco marka la bixinayo Cashuur dhimista noocaas ah.
6. Wasiirku wuxuu soo saarayaa wareeegto xaqiijinaysa shuruudaha, arrimaha iyo habraacyada lagu soo jeediyey faqradda 5-aad, haddiise waaxaha Dakhliga ee Wasaaraddu ay beddelaan talo soo jeedintoodii ku xusan faqradda 5-aad,

Wasiirku wuxuu beddeli karaa amarkii la faafiyey, isagoo faafinaya talo soo jeedinta lagu beddeley.

## Qodobka 82-aad
## Ka Warbixinta Cashuur Dhimista

1. Wasaaraddu waa in ay soo gudbisaa warbixinno saddex (3) biloodle ah oo ku saabsan wadarta xaddiga Cashuur dhimista ay samaysay ama ay ku doodeen Cashuur bixiyeyaasha. Warbixin kasta waa in ay Cashuur dhimista ku kala saartaa tilmaamahan: -
   b) Cashuur dhimista la sameeyey iyadoo loo hoggaansamayo Qodobka 81-aad, iyadoo lagu kala saarayo tilmaamahan: -
      i. Qodob kasta oo sharci ah oo Cashuur dhimista loo cuskadey.
      ii. Markay joogto xeer nidaamiyeyaal, mid kasta oo ka mid ah shuruudaha ama arrimaha lagu cayimay amarka lagu xusey Qodobka 81-aad farqada 6-aad.
   t) Cashuur dhimista la bixiyey oo aan waafaqsaneyn Qodobka 81-aad, oo ay la socdaan sababaha loo cuskadey Cashuur dhimista.
   j) Cashuur dhimista la soo codsadey oo aan la oggolaan ayna la socdaan sababaha codsiyada loo diidey.
2. Sannad maaliyadeed kasta, Wasaaraddu waa in ay diyaarisaa warbixin:
   b) Soo koobeysa warbixinnadii laga heley Waaxaha Dakhliga intii lagu jirey sannadka ku xusan faqradda 1-aad.
   t) tilmaamysa tallooyin loo arkey in ay habboon yihiin oo la xiriira baaxadda iyo maamulidda Cashuur dhimista.
3. Warbixinta loo diyaariyey si waafaqsan faqradda 2-aad:-
   b) Waa in Wasiirka loogu gudbiyaa 3 bilood gudahooda ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedka ay la xiriirto.
   t) Waana in lagu baahiyo wareegto rasmi ah, iyadoo ah qaabkii loogu direy Wasiirka 6 bilood gudahood, kadib dhammaadka sannad maaliyadeedka ay la xiriirto.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

## Qodobka 83-aad
## Cashuur ka Cafin

1. Wasiirku wuxuu leeyahay awood xaddidan oo uu ku cafin karo Cashuurta ee lagu oggolaadey Qodobkan. Adeegsiga awoodaha ku jira Qodobkan waa in ay waafaqsanaataa Qodobka 81-aad. Mana jiro qof kale oo awood u leh Cashuur ka cafin.
2. Wasiirku wuxuu cafin karaa Cashuur ay bixinteedu taagneyd in ka badan 3 sano isagoo u cuskanaya sababo la xiriira in aaney jirin rajo macquul ah oo laga leeyahay in Cashuurta la bixin doono.
3. Cashuur bixiyaha mutaystey ganaax ayaa Wasaaradda ka codsan kara in laga cafiyo ganaaxa. Codsigu waa in uu ahaadaa qoraal, markay Wasaaraddu hesho codsiga, waxay go'aansan kartaa inay:-
   b) Ka gaabsato in ay qiimeeyso ganaaxa.
   t) Kordhiso wakhtiga lagu bixinayo ganaaxa.
   j) Ka cafiso ama ka dhaafto ganaax la qiimeeyey.
   x) Diiddo codsiga.
4. Go'aanka Wasaaraddu wuxuu noqon karaa mid ku xiran ganaaxa gebi ahaan ama qayb ahaan. Go'aanka iyo shuruudaha la xiriira waa in ay waafaqsanaadaan sifooyinka, arrimaha iyo habraacyada lagu sheegay Qodobka 81-aad farqaddiisa 6-aad.
5. Qodobkan, "ganaax" waxaa soo hoos gelaya hanti ay la wareegi karto ama ay gacanta ku soo dhigtey Wasaaraddu iyadoo u cuskanaysa in hantidaasi ay tahay mid lala wareegi karo cashuur baaqatay darteed.

## Qodobka 84-aad
## Codsi Cashuur Dib-u-Celin (Tax Refund)

1. Wixii loo gaaro taariikhda lagu cayimey faqradda 2-aad, qofku wuxuu Wasaaradda ka codsan karaa in ay u soo celiso Cashuur uu bixiyey oo ka badan Cashuurtii lagu lahaa. Qofna ma codsan karo in Cashuur loo soo celiyo ilaa qofku ka soo baxo dhammaan wixii ay ku waajibiyeen xeerarka Cashuurta, oo ay ka mid tahay Cashuur celinta. Codsigu waa in uu ahaadaa qoraal sharxaya

sida Cashuurta dheeriga ah lagu xisaabiyey kuna lifaaqan tahay caddeynta ku habboon ee muujineysa xisaabinta.

2. Codsi Cashuur dib u soo celin waa in lagu sameeyaa 4 sano gudahood oo ka bilaabmaysa hadba tan u dambeysa waqtiyada soo socda: -
   b) Dhacdada keentey in la bixiyo Cashuur dheeri ah.
   t) Taariikhda Cashuur celinta uu xareeyey qofka ee la xiriirta bixinta lacagta.
   j) Taariikhda lacagta la bixiyey.
3. Qofku waa in uusan habraaca codsiga ee ku xusan Qodobkan u adeegsan inuu kaga soo horjeesto go'aan Cashuureed oo ay ka mid tahay qiimeynta sababtey in Cashuur qofka lagu yeesho.

## Qodobka 85-aad
## Go'aanka Laga Gaaro Codsi Cashuur-dib-ucelin

1. Wasaaraddu waa iney tixgelisaa oo go'aan ka gaartaa codsi Cashuur dib u celin si waafaqsan Qodobka 84-aad muddo 30 maalmood gudahood markuu soo gaaro codsigu. Go'aanka waa in uu noqdaa sida ay Wasaaraddu u aragto in uu ku habboon yahay, iyadoo ay ku xiran tahay shuruudahan: -
   b) In ay diido codsiga marka Wasaaraddu ay u aragto in codsadahu uusan bixin Cashuur dheeri ah.
   t) Marka Wasaaraddu aysan ku qancin in codsaduhu bixiyey Cashuur dheeri ah waa: -
      i. In ay ka codsato macluumaadka dheeriga ah ee ay ugu baahan tahay in ay go'aan kama dambeys ah ka qaadato codsiga.
      ii. In ay u jeediso Cashuur dib-u-celin ku xiran in codsaduhu uu bixiyo rahanka ay Wasaaraddu u aragto in uu ku habboon yahay.
   j) Markay Wasaaraddu ku qanacdo in codsaduhu bixiyey Cashuur dheeri ah, waa in ay u gudbisaa wasaaradda xaddiga uu ku qanacdo Wasaaraddu ka dibna la gaarsiiyaa cashuur bixiyaha lacagtiisa.
2. Wasaaraddu waa in ay wargelisaa qoraal ah oo ku saabsan go'aanka Cashuur dib-u-celinta ku gaarsiisaa codsadaha muddo 30 maalmood gudahood ah

markay hesho codsiga Cashuur dib-u-soo celinta. Markuu go'aanku yahay diidmo in Cashuur dib loo celiyo, Wasaaraddu waa in ay bixisaa sababaha diidmada.

3. Ka dib markuu codsade bixiyo macluumaad ama diido soo jeedinta ku xusan faqradda 1-aad xarafka (t), Wasaaraddu waa in ay mar kale tixgelisaa codsiga Cashuur dib u soo celinta. Wasaaraddu waa in ay codsadaha siisaa wargelin ku aaddan go'aanka ay ka qaadatey muddo 30 maalmood gudaheeda oo ka bilaabata markii ay heshay codsiga Cashuur dib-u-celinta ee asalka ahaa.

## Qodobka 86-aad
## Bixinta Cashuur Dib u Celinta (Tax Refund)

1. Wasaaraddu haddii ay go'aamiso in qofku uu bixiyey Cashuur dheeri ah, waa in ay:-
   b) Lacagta dheeriga ah u adeegsataa in ay ka jarto Cashuurta ku waajibtey ee uusan qofku weli bixin.
   t) Lacagta soo hartey wasaaradda ugu celisaa 30 maalmood gudahooda marka go'aan ka gaarto.
2. Go'aanka Wasaaraddu wuxuu ku saleysnaan karaa codsi Cashuur dib u soo celin, amar maxkamadeed ama caddeynta kale ee Wasaaraddu ku qanacdo in loo baahan yahay in qof lacag loo celiyo.
3. Haddii Wasaaraddu ay oggolaato keliya qayb ka mid ah codsiga lacag dib u soo celinta ee qofka, Wasaaraddu waa in ay u celisaa qaddarka ay aqbashey. Go'aankan ayaa la raacayaa iyadoo aan loo eegin diidmo kasta oo uu soo gudbiyo qofku.
4. Markuu qofku bixiyo ganaax ka dhashey in uu bixin waayey Cashuur, laakiin marka dambe la go'aansado in Cashuurtaas aysan waajibin, waa in qofka loo celiyaa ganaaxii uu bixiyey. Go'aanka waxaa sababi kara go'aan ka gaarid is-hortaag ama amar maxkamdeed ama sababo kale.
5. Haddii Wasaaraddu ay qof u dib u celiso Cashuur iyadoo aaney jirin wax Cashuur dib u celin ah oo loo baahnaa, Wasaaraddu lacagta dheeriga ah ee dib

loogu celiyey qofkaa waxay ku soo ceshan kartaa cashuur ahaan. Wasaaraddu waa in ay Cashuur bixiyaha siisaa wargelin qoraal ah oo ku aaddan go'aanka lacagta lagu soo celinayo.

## CUTUBKA 10-aad
## DEMBIYADA IYO GANAAXYADA MADANIGA Ah

### Qaybta Koowaad
### Ganaaxyada Madaniga ah

### Qodobka 87-aad
### Ganaaxa Bixin La'aanta Cashuurta

1. Qofka bixin waaya Cashuur wakhtigii ay ahayd in la bixiyo wuxuu mudanayaa ganaax lagu soo rogayo bil kasta ama qayb ka mid ah bishaas ee aan Cashuurta la bixin.
2. Ganaaxa lagu xusey faqradda 1-aad ee hal bil waa ganaax oo aan ka badnayn 30% ee cashuurta ku baaqatay.

### Qodobka 88-aad
### Ganaaxa Hoos u Dhigidda Cashuurta Dakhliga

1. Qofka yareeya qiimaha Cashuurta loo bixinayo qayb-qayb ee hoos imaneysa cashuurta dakhliga wuxuu mutaysanayaa ganaax. Qofka yareeyey qiimaha Cashuurta ay tahay in la bixiyo, iyadoo la adeegsanayo qofkaas qiyaastiisa ee xisaabinta lacagta markiiba la bixinayo ay ka yar tahay 80% qaddarka lacagta ee saxda ah, ganaax gaar ah ayaa lagu soo rogayaa bil kasta ama qayb kasta oo ka mid ah bil laga bilaabo taariikhda ay ahayd in qaybta cashuurta ka mid ah la bixiyo qiimeyntaa sannadka ilaa laga gaaro maalinta ay tahay in la xareeyo cashuur celinta sannadkaas.
2. Ganaaxa ay tilmaameyso faqradda 1-aad ee bishii waa ganaax aan ka badanayn 30% ee cashuurta waajibtay. Qaddarka lacagta ah waxaa lagu kordhinayaa 1% ilaa iyo inta qaddarka lacagta ku xigta ee xarafka (b) ay ka badan tahay qaddarka lacagta xarafka (t). Qaddarka lacagtu waa: -

b) 80% wadarta qaddarka lacagta loo bixin lahaa qayb qayb sannadka qiimeynta la sameeyey dhexdiisa ilaa laga gaaro bilowga bisha haddii qiyaasta qofka ay la mid tahay qaddarka lacagta ee saxda ah.

t) Qaddarka lacagta cashuurta dakhliga ee loo bixiyey qayb qayb intii lagu jirey sannadka qiimeynta lagu sameeyey ilaa bilowga bisha.

## Qodobka 89-aad
## Ganaaxa Ilaalin La'aanta Dukumintiyada

1. Qofka aan ilaalin dukumintiyada uu waajibinayo xeer dakhli waxaa ku waajibayaa ganaax. Soo saarid la'aanta dukuminti waafaqsan xeer dakhli, oo uu ka mid yahay qaan sheeg, wuxuu noqonayaa ilaalin la'aan dukuminti. Ganaax gaar ah ayaa lagu soo rogayaa bil kasta ama qayb kasta oo ka mid ah muddada soo saarid la'aantu ay jirto.
2. Ganaaxa ay tilmaameyso faqradda 1-aad ee bishii, waa ganaax aan ka badnayn $150. Qaddarkaa lacagta ah waa la sii kordhinayaa marka ilaalin la'aantu aaney lahayn sababo macquul ah waxaa la kordhinayaa 75% cashuurta loo nisbeynayo bishaas.
3. Wasaaraddu waa in ay Cashuurta loo nisbeynayo bishaas u go'aamisaa si caddaalad ah oo macquul ah, loona qiimeeyo si waafaqsan Xeerka.

## Qodobka 90-aad
## Ganaaxa Xareyn La'aanta Cashuur Celinta (Return)

1. Qofka aan xareyn cashuur celinta uu ku waajibinayo xeer dakhli wuxuu muteysanayaa ganaax madani. Ganaax gaar ah ayaa lagu soo rogayaa bil kasta ama qayb kasta oo ka mid ah bil muddada uusan xareyn cashuur celinta.
2. Ganaaxa ay sheegeyso faqradda 1-aad ee bil kasta waa ganaax aan ka yarayn $100. Qaddarka lacagta waxaa lagu kordhinayaa 2% qaddarka cashuurta lagu qiimeyn karo cashuur celinta oo laga reebo cashuurta uu bilowga bisha u bixiyey iyadoo ah qayb ka mid ah cashuurtaas bil kasta oo uu la daaho.

3. Ganaax kala gaar ah ayaa lagu soo kala rogayaa xareyn la'aanta cashuur celin qiyaas ah ama qaddar lacageed oo ku meel-gaar ah iyo xareyn la'aanta cashuur celin ay ku jirto qaddarka lacagta kama dambeysta ah.

## Qodobka 91-aad
## Ganaaxa Bayaan Been ah ama Marin habaabin ah

1. Qofku wuxuu muteysanayaa ganaax haddii:-
   b) Uu sarkaal dakhli siiyo bayaan ilaa xad been ah ama marin habaabinaya sarkaalka inuu sameeyo qiimayn sax ah.
   t) Bayaan uu siiyey sarkaal dakhli ka saaro arrin ama shey haddii aan lagu darin uu bayaanku noqonayo mid dadka marin habaabinaya.
2. Ganaaxa ku xusan faqradda 1-aad waa: -
   b) Haddii bayaanka loo sameeyo ama wax looga saaro si aanan macquul aheyn, 100% cashuurta ka dhimmanaatey ayuu bixinayaa.
   t) Xaalad walbo oo taas ka duwan, 30% Cashuurta ka dhinnaatey ayuu bixinayaa. Cashuurta ka dhinnaatey waa cashuurtii waajibtey oo aan la wada bixin oo ay Wasaaraddu u aragto in ay ka dhalatey haddii saxnaan la'aanta bayaanka uu hirgeli lahaa, iyadoo aan la ogaan khaladka ku jira.
3. Hase yeeshee, ganaaxa lagu xusey faqradda 2-aad waa: -
   b) In 20% loogu kordhiyo wadarta mar kasta oo xigta oo qofka lagu qaado Qodobkan shantii (5) sano ee ugu dambeeyey.
   t) Laga dhimo 20% haddii qofku uu si khiyaar ah shaaca uga qaado bayaanka ka hor inta uusan ogaan sarkaal dakhli ama hantidhowr cashuureed, hadba kan soo horreeya.
4. Bayaan waxaa la siiyey sarkaal dakli marka afka looga sheego, qoraal ama qaab kale lagu siiyo sarkaal dakhli oo ku guda jira gudashada waajibaadkiisa si waafaqsan xeerarka dakhliga.

## Qodobka 92-aad
## Ganaaxa Been ama Marin Habaabin la siiyo Cid Saddexaad

1. Qofka wuxuu mutaysanayaa ganaax haddii uu qof kale si been ah ama marin habaabin ah uga qaato ama isku dayo inuu ka qaato qaddar lacag ah oo uu ku tilmaamo inay tahay qaddar cashuur ah ama uu bayaan been ah ama marin habaabin ah siiyo qof kale.
2. Ganaaxa faqradda 1-aad waa:-
   b) Marka qof qaado qadar lacag ah ama soo saaro bayaan marin habaabin ah, iyadoo aaney jirin sababo macquul ah waxaa la ganaaxayaa $500.
   t) Xaalad kasta oo kale, ganaax aan ka yarayn $200.
3. Ganaaxayada lagu xusey faqradda 2-aad waxaa 20% lagu kordhinayaa wadarta mar walbo oo lagu qaado Qodobkan muddo shan (5) sano gudahood.
4. Qofka la ganaaxay ee ku xusan farqadda 2-aad waa in uu dhibbanaha u gudaa khasaaraha ka soo gaarey been abuurka ama marin habaabinta uu sameeyey.

## Qodobka 93-aad
## Ganaaxa Ka Gacansiinta iyo Ku Dhiirigelinta

1. Qofka isagoo aan haysan sababo macquul ah gacan ku siiya, ku dhiirigeliya, kula taliya ama ku qalqaaliya qof kale in uu galo dembi ah nooca lagu sheegey Qaybta 3-aad wuxuu muteysanayaa ganaax. Muhiim ma aha in dembiga la fuliyo iyo in kale.
2. Ganaaxa ka dhalanaya faqradda 1-aad waa ganaax aan ka badnayn 50% cashuurta baaqan lahayd. Cashuurta baaqatey waa Cashuurta ay Wasaaraddu u aragto in lala hari lahaa haddii dembiga la geli lahaa oo aan la ogaan lahayn.

## Qodobka 94-aad
## Qiimeynta Ganaaxyada Madaniga ah

1. Wasaaraddu waa in ay qiimaysaa ganaaxa uu qof ku muteysanayo si waafaqsan Qaybta 1-aad. Qiimeynta loo sameeyo si waafaqsan Qodobkan waa qiimeyn asal ah oo ka tarjumaya ujeeddada Qodobka 50-aad.



STATE GENERAL SOLICITOR

2. Ganaaxa waafaqsan cutubkan ee ka dhalanaya fashil ama caddayn waa kuwo is biirsanaya oo mid waliba goonidiisa loogu xisaabiyo Qodobada ku jira cutubkan, waxayna dheeri ku yihiin Cashuur kasta oo kale oo uu soo rogey xeer dakhli. Hase yeeshee, marka fashilku ama caddayntu ka dhalato ganaax ku saleysan xeerkan iyo hal xeer dakhli oo kale ama ka badan, markaas Wasaaraddu waa in ay qofka u qiimaysaa ganaaxa, iyagoo adeegsanaya xeerkan oo keliya ama mid kamid ah xeerarka kale ee dakhli ee uu ganaaxu ka dhashay. Wasaaraddu waxay xulan kartaa xeerka ay u adeegsanayaan qiimeynta.
3. Marka qiimeyn loo sameynayo si waafaqsan faqradda 1-aad, Wasaaraddu waa in ay wargelin qoraal ah oo ku saabsan qiimeynta gaarsiiyana qofka, taasoo ay ku xusan tahay: -
   b) Magaca qofka iyo LAC-iisa haddii uu leeyahay.
   t) Qiimeynta ay Wasaaraddu ku samaysay ganaaxyada.
   j) Qaabka loo xisaabiyey qiimeynta.
   x) Sababaha Wasaaraddu u samaysay qiimeynta.
   Kh) Taariikhda ay tahay in ganaaxyada la bixiyo.
   d) Goorta, goobta iyo qaabka looga hor imaan/caban karo qiimeynta.
4. Wargelinta ku xusan farqadda 3-aad waxaa la dhexgelin karaa oo lagu lifaaqi karaa wargelin kale oo qiimeyn ah oo uu jideeyey xeer dakhli.
5. Qiimeynta ganaaxyada ee faqradda 1-aad kama qaadeyso qofka in lagu soo oogo dacwado fal-dembiyeed ah.

## Qaybta Labaad
## Fal Dembiyeedyo
## Qodobka 95-aad
## Gelidda Fal Dembiyeedyada

1. Qofku ma gelin dembiyada ku xusan qaybtan haddii uusan qofku ku kicin fal-dambiyeedka: -
   b) Isagoo ogsoon wuxuu samaynayo ama si taxaddar la'aan ah u sameeya.
   t) Isago aan haysan sabab macquul ah.

## Qodobka 96-aad
## Fal-Dembiyeedka u Hoggaansamid La'aanta Xeer Dakhli

1. Qofka u hoggaansami waaya qodob ka mid ah xeer dakhli wuxuu ku kacay fal-dembiyeed. Ciqaabtiisuna waa: -
    b) Marka u hoggaansamid la'aantu ay ka dhalatey ama haddii aan la ogaan lahayn dambiga ay ka dhalan lahayd in ay yaraato Cashuurta waajibtay 50%, ganaax aan ka yareyn $100 kana badneyn $500, xabsi muddadiisu aaney ka badneyn 6 bilood ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.
    t) xaaladaha kale, ganaax aan ka yareyn $50 kana badneyn $250.

## Qodobka 97-aad
## Fal dembiyeedka la Dhuumashada
## iyo Bixin La'aanta Cashuurta

1. Qofka bixin waaya Cashuur maalintii ay ahayd in la bixiyo wuxuu galey dembi. Ciqaabtuntiisuna waa: -
    b) Marka qaddar lacageed ee aan la bixin ka badan yahay 50% cashuurtii waajibtay, ganaax aan ka yareyn 50% kana badneyn 100% cashuurta uusan bixin, xabsi aan ka yareyn 3 bilood kana badnayn 1 sano ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.
    t) Wixii intaas ka soo hara, ganaax aan ka yareyn 30% kana badnayn 50% cashuurta uusan bixin, xabsi aan ka yareyn 1 bil kana badneyn 3 bilood ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.
2. Qofka la dhuunta cashuur oo Wasaaradda iyo ciidanka ilaaladda cashuuruhu ay soo qabtaan isagoo la dhuumanaya cashuur, waxaa ku waajibaya ganaaxa lagu sheegay farqadda 1-aad xarafka (b) waxaana la marsiinayaa tallaabooyinka kale ee xeerku oggolyahay. Waxaa kale oo ku waajibayaa bixinta dhammaan kharashaadka ku baxa soo qabashadiisa.

## Qodobka 98-aad
## Fal Dembiyeedka Bixinta
## Caddaymo Been ah ama Marin habaabin ah

1. Qofku wuxuu galey fal dembiyeedkan haddii: -
   b) Uu sarkaal dakhli siiyo caddaymo been ah ama marin habaabin ah.
   t) Uu caddaymo siiyo sarkaal dakhli kana reebo arrin ama shey haddii aan lagu darin caddayntaas noqonayso mid marin habaabin ah.
2. Waxaa loo arkayo in ay tahay caddayn la siiyey sarkaal dakhli ama marka caddayntaasi loo arkayo in ay been tahay ama marin habaabina waxaa go'aaminaya Qodobka 91-aad.
3. Fal-dambiyeedka ay tilmaamayso farqadda 1-aad, ciqaabtiisu waa:
   b) Haddii halista ka dhalanaysaa ay weyn tahay, ganaax aan ka yareyn $500 kana badneyn $2000, xabsi aan ka yareyn 3 bilood kana badneyna 2 sano ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.
   t) Marka xaaladdu taas ka duwan tahay, ganaax aan ka yareyn $300 kana badneyn $600, xabsi muddadiisu aan ka yareyn 1 bil kana badneyn 1 sano ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.
4. Kiiska marin-habaabintu waa mid halis weyn ka dhalanayso, haddii khaladka ku jira bayaanka aan la ogaan lahayn natiijadu ay noqon lahayd in wadar ahaan Cashuurta is dhimeysa ay ka badan lahayd 50% cashuurtii waajibtay.

## Qodobka 99-aad
## Fal Dembiyeedka Is hortaagidda Maamul Cashuureed

1. Qofka is hortaaga ama isku daya inuu is hortaago maamullidda xeer dakhli wuxuu galay dambi. Ciqaabta ka dhalaneysaana waa:-
   b) Markuu fal dembiyeedku la xiriiro khiyaanno ama xoog sheegasho aan loo baahneyn, ganaax laba-laabka qaddarka lacagta la isku dayayo in lala baxsado ama la rabo in dib loola soo laabto ama $2,000, hadba midda badan labadaas, xabsi aan ka yareyn *2 sano* kana badneyn 4 sano ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.

t) Xaaladaha ka soo hara intaas, ganaax aan ka yareyn $500 kana badneyn $1500, xabsi muddadiisu aaney ka badneyn 2 sano ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.

2. Marka laga soo tago ciqaabta ku xusan faqradda 1-aad, alaab kasta oo uu dembiiluhu u adeegsado gelidda dembiga waa lala wareegayaa.

## Qodobka 100-aad
## Fal-Dembiyeedyada ay ku Kacaan Shakhsiyaadka Idman iyo Kuwa Aan Idmanayn

1. Qof ay idmatay Wasaaraddu ama loo idmay maamulidda dakhliga oo uu ka mid yahay sarkaal dakhli, oo ku dhex jira waajib gudashadiisa si waafaqsan xeer dakhli wuxuu galey dembi haddii qofkaas: -
   b) Si toos ah ama si dadban u weydiisto ama u qaato: -
      i. Qaddar lacag ah ama abaalmarin aan qofkaas sharci ahaan xaq u lahayn in uu qaato.
      ii. Aqbalo ballanqaad ama rahan la xiriirta wax siintaas ama abaalmarintaas.
   t) Oggolaado, fasaxo, qariyo, qorsheeyo ama ka raalli noqdo in fal ama shey Dawladda Puntland lagu khiyaameynayo ama lagu khiyaameyn karo oo ay ka mid tahay arrimaha bixinta cashuuraha.
2. Qofku dembi ayuu galey haddii uu: -
   b) Qaado ama isku dayo in uu qaado qaddar lacag cashuureed ah oo ku salaysan xeer dakhli ama qaddar lacageed oo uu qofku ku sheegayo in ay cashuur tahay, haddii uusan xeer dakhli si gaar ah ugu oggolaan qofkaas in uu qaddarkaa lacagta ah qaado.
   t) Isu ekaysiiyo qof uusan ahayn isagoo uga dan leh in qof kale uu rumeysto inuu yahay sarkaal dakhli isagoo aan ahayn, qofkii kalena uu rumeysto sheegashadiisa, tallaabadaas waxaa loo aqoonsanayaa iskuday cashuur qaadis.

3. Ciqaabta dembiyada ku xusan faqradda 1-aad ama 2-aad waa ganaax aan ka yareyn $500, xabsi muddadiisu aaney ka yareyn 3 bilood kana badneyn 5 sano ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda. Ciqaabta fal-dambiyeedka lagu sheegay farqadda 1-aad waxaa loogu darayaa in shaqadda laga ruqseeyo shakhsiyaadka idman.
4. Shakhsiyaadka idman iyo kuwa aan idmanayn ee ku xadgudba ilaalinta sirta waxaa ay galeen dembi, ciqaabta dembigaasi waa ganaax aan ka badneyn $500 ama xabsi muddadiisu aan ka badneyn 1 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo isla socda.

## Qodobka 101-aad
## Maareeyeyaasha Hay'adaha

1. Markay hay'ad gasho dembi uu dhigayo xeer dakhli, qof kasta oo maareeye ka ah hay'adda wakhtigaa waxaa loola dhaqmayaa in uu galey isla dembigaas. Ciqaabta maareeyaha waxay la mid tahay tan hay'adda.
2. Faqradda 1-aad lama adeegsanayo haddii maareeyuhu heer maangal ah ku sameeyo daryeel, dedaal iyo xirfad la aqbali karo oo uu kaga hortegayo in dembigaas lagu kaco. Heer maangal ah waxaa lagu cabbirayaa iyadoo loo eegayo qof madax-bannaan oo haya jago maareeye tallaabada maangalka ah oo xikmadda ku dhisan ee uu qaadi lahaa.
3. Marka qof maareeye ka ah hay'ad u galo dembi uu dhigayo xeer dakhli, isagoo adeegsanayo awooddiisa maareeye ahaan, hay'adda waxaa loola tacaamulayaa in ay isla dembigaa gashey. Ciqaabta hay'adda waa ganaax la mid ah kan lagu ganaaxayo maareeyaha dembiga galey.

## Qodobka 102-aad
## Fal-Dembiyeedka Ku Gacan siinta iyo ku Dhiirigelinta

1. Qofka gacan ku siiya, ku dhiirigeliya, kula taliya ama ku qalqaaliya qof kale in uu galo dembi uu dhigayo xeer dakhli wuxuu galey dembi. Muhiimna ma aha in dembiga uu fuliyo qofka lagu qalqaaliyey. Ciqaabta qofka koowaad waa: -

b) Marka dembiga qof lagu qalqaaliyey uu la xiriiro kiis halistiisu badan tahay, ganaax aan ka yareyn $500 oo aan kana badneyn $2000, xabsi muddadiisu ka yareyn 1 sano kana badneyn 2 sano ama ganaaxa iyo xabsiga wada socda.

t) Marka dembiga qofka lagu qalqaaliyey uu noociisu yahay kan lagu xusey Qodobka 99-aad farqaddiisa 1-aad xarafka (b) (khiyaanno ama xoog sheegasho aan loo baahneyn), ganaax ah laba laabka qaddar lacagta la doonayo in lala dhuunto ama la soo celiyey ama $2000, labada hadba tii badan labadaas, xabsi ugu yaraan 2 sano ah ugu badnaanna 4 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo la isu raaciyo.

j) Marka dembiga qofka lagu qalqaaliyey uu la xiriiro in qof awood loo siiyey hawsha lagu qalqaaliyo in uu galo dembiga uu dhigayo Qodobka 100-aad, ganaax aan ka yareyn $500, xabsi ugu yaraan ah 3 bilood oo ugu badnaanna ah 5 sano ama ganaaxa iyo xabsi wada socda.

x) Xaaladaha intaas ka soo haray, ganaax aan ka yareyn $200 kana badneyn $500 xabsi ugu yaraan 6 bilood ah oo ugu badnaanna 1 sano ah ama ganaaxa iyo xabsi wada socda.

2. Kiiskan wuxuu la xiriiraa halis weyn marka, haddii khaladka ku jira caddeynta aan la ogaan lahayn, natiijadu ay ahaan lahayd in wadar ahaan cashuurta is dhimmeysa ay ka badan tahay 50%.

## Qodobka 103-aad
## Baarista, Gudbinta iyo Isugeynta Fal-dembiyeedyada

1. Wasaaraddu waa in ay baartaa arrimaha muujin kara in uu dhacay fal- dembiyeed la xiriira xeer dakhli. Wasaaraddu waxay dhammaan awoodooda sharci u adeegsan kartaa hadafkaas.
2. Markay Wasaaraddu hesho caddeyn tilmaameysa in uu dhacay dembi la xiriira xeer dakhli, Wasaaraddu waa in ay Booliska ilaalinta cashuuraha ku wargelisaa si waafaqsan Qodobka 16-aad ee Xeerkan. Wargelintu waa in ay ahaataa qoraal caddeynaya nooca dembiga iyo qaddarka lacageed ee uu la xiriiro. Wasaaraddu

waa in ay Booliska ilaalinta cashuuraha siiyaan macluumaadka la xiriira dembiga.

3. Xeer Ilaaliyaha Guud ayey mas'uuliyaddiisu tahay dembi ku oogidda dembiyada la xiriira xeerarka dakhliga. Hase yeeshee, markuu qof qirto in uu galey dembi la xiriira xeer dakhli, Wasaaraddu waxay dacwad ku soo oogidda dembiga ay ugu beddeli kartaa lacag uu bixiyo. Dembi qirashadu waa in ay qoraal ahaataa. Wasaaraddu waa in aysan lacag ugu beddelin dembiyada: -
   b) Haddii ay la xiriiraan: -
      i. Hab-dhaqanka sarkaal dakhli ama sarkaal dawladeed oo ku shaqeynaya awood dawladeed.
      ii. Hab-dhaqanka lagu xusey Qodobka 100-aad.
   t) Haddii uu Xeer Ilaaliyaha Guud sidaa faro.
4. Wasaaraddu waxay dacwad ku oogis dembi ku beddeli karaan lacag sida ay dhigeyso faqradda 3-aad, iyadoo qofka ku waajibinaysa in uu bixiyo lacag iyo in uu keeno hanti kasta oo ay tahay in lala wareego oo la xiriirta dembiga, Amarku:-
   b) Waa in uu qoraal ahaadaa waana in uu cayimaa: -
      i. Dembiga dhacay.
      ii. Tirada lacagta ay tahay in la bixiyo.
      iii. Hanti kasta oo lala wareegay.
      iv. Taariikhda ay tahay in la bixiyo lacagta, lana soo gacangeliyo hantida.
   t) Waa in ay ku lifaaqnaataa dembi qirasho qoraal ah.
   j) Waa in la gaarsiiyaa shakhsiga galey dembiga.
   x) In uu yahay kama dambeys waana in dhinacyadu ay isla oggolaadaan in aan rafcaan laga qaadaneynin.
   Kh) Waxaa loo dhaqangelin karaa sidii in uu yahay amar ka soo baxay Maxkamadda Gobolka oo la xiriira bixinta qaddar lacag ah iyo geynta hanti kasta oo lagu xusay amarka dhexdiisa.

5. Marka Wasaaraddu ay dacwad ku soo oogis dembiile ugu beddesho lacag si waafaqsan Qodobkan, qofka ay khuseyso laguma soo oogayo ciqaab ama dembi ku oogis fal-dembiyeed oo la xiriira dembigaas.
6. Xaqiijinta ujeeddooyinka qodobkan waxaa loo raacaya si waafaqasan Qodobka 104-aad.

**CUTUBKA 11-aad**

## HABRAACYADA DACWADAHA

### Qodobka 104-aad

### Tallaabooyinka Bilaabidda Dacwadaha Cashuuraha

1. Si waafaqsan Qodobka 64-aad ee xeerkan cashuurtu waxay noqonaysaa dayn ka maqan Dawladda Puntland maalinta cashuurta bixinteedu waajibto. Wasaaraddu waxay qofka cashuurtu ku baaqatay ka dacweyn kartaa, kagana soo qaadi kartaa cashuurta aan la bixin maxkamad kasta oo awood u leh qaadista dacwadaas.
2. Si natiijo wax-ku-ool ah looga gaaro dacwadaha la xiriira cashuuraha aan la bixin, hab-raaca soo socda waa in la dhaqangeliyaa markii la bilaabayo dacwadaha khuseeya cashuuraha aan la bixin: -
   b) Markii la aqoonsado cashuur bixiyaha weli u qoollan cashuur ku baaqatay, Wasaaraddu waa iney samaysaa qiimeyn ku aaddan saxsanaanta eedaha cashuur bixiyaha. Qiimeynta kadib Wasaaraddu waa inay qoraal rasmi ah oo wargelin ah u dirtaa cashuur bixiyaha oo ay ku caddahay cashuuraha ku waajibay ee uusan bixin, qiimaha cashuurta lagu leeyahay, wakhtiga kama dambaysta ah ee ay tahay inuu bixiyo iyo cawaaqibta ka dhalanaysa bixin la'aanta cashuuraha lagu leeyahay.
   t) Haddii cashuur-bixiyuhu u hoggaansami waayo warqadda wargelinta ah ee ku xusan xarafka (b) ee qodobkan, Wasaaraddu waa inay bilowdaa dacwad ka dhan ah cashuur-bixiyaha, iyadoo u sii maraysa xafiiska Xeer-ilaalinta, waana in dacwadda laga bilaabaa maxkamadda awoodda u leh.
   j) Wasaaraddu waa inay u gudbisaa xafiiska Xeer-ilaalinta dhammaan dukumintiyada la xiriira cashuurta aan la bixin oo ay ku jiraan warqaddii

wargelinta ahayd ee loo diray cashuur-bixiyaha ee ay ku caddahay cashuuraha waajibay ee aan la bixin, qiimeynta cashuuraha baaqday, caddaymaha u hoggaansamid la'aanta cashuur-bixiyaha warqaddii wargelinta iyo dhammaan dukumintiyada kale ee muhiimka u ah bilaabidda dacwadaha khuseeya cashuur aan la bixin.

x) Marka xafiiska Xeer-ilaalintu ka helo dukumintiyada ku xusan xarafka (j) Wasaaradda, waa in Xeer-ilaalintu si deg-deg dacwad ka dhan ah cashuur-bixiyaha uga bilowdaa maxkamadda awoodda u leh dhegaysiga dacwadaas.

3. Xafiiska Xeer-ilaalintu kama laaban karo, mana joojin karo dacwad la xiriirta cashuur aan la bixin haddii uusan oggolaansho rasmi ah ka helin Wasaaradda Maaliyadda.

## Qodobka 105-aad
## Habraacyada Dacwadaha Badan

1. Habraac lagu doonayo in lagu helo Cashuur, iyadoo la raacayo qodob ka mid ah xeer dakhli ma xaddidayo in habraacyo is barbar socda ama kala gaar ah oo lagu doonayo in lagu soo helo isla cashuurtaas, iyadoo la raacayo siyaabaha kale duwan ee xeerkan ama xeer kale oo dakhli farayo.
2. Habraac dembi loogu soo oogayo qof galey fal dembiyeed ku jira qodob ka mid ah xeer dakhli ma xaddidayo dacwad oogis isbarbar socda ama kala gaar ah oo isla qofkaas loogu soo oogo fal-dembiyeed uu tilmaamay qodob kale oo xeerkaas ama qodob xeer dakhli oo kale ku jira.
3. Qof ayaa lagu heli karaa ama lagu ganaaxi karaa fal-dembiyeedyo mid ka badan oo ku jira isla hal xeer dakhli ama xeerar dakhli oo kala duwan oo la xiriira fal ama tallaabo qaadid la'aan. Hase yeeshee, waa in aan qof lagu xukumin dembi ama loo ganaaxin: -

   b) Marar badan isla qodob sharci iyadoo laga duulayo isla hal fal-dembiyeed.

   t) Wax ka badan hal qodob fal-dembiyeed oo la xiriira arrin keliya ama qeyb ka mid ah isla habraacaas.

4. Marka labo qodob fal-dembiyeed ama ka badan ee ku xusan hal xeer dakhli ama ka badan lagu dabaqi karo isla fal-dembiyeedka uu qofku gaystay, garsooruhu wuxuu dooran karaa qodobka uu fal-dembiyeedka uu ku xukumayo ama ku ganaaxayo. Marka garsooruhu doorto, qofka laguma xukumi karo lagumana ganaaxi karo qodobadii kale ee ku dabaqmayey fal-dembiyeedka uu gaystay.

## Qodobka 106-aad
## Goobta Lagu Qaadayo Garmaqalka Dacwadda

1. Habraacyada lagu soo celinayo Cashuur waa in laga bilaabaa, lagu dhegeystaa laguna dhammeeyaa maxkamadda awoodda u leh ee ugu dhow ama isla Maxkamadda degmadda uu: -
   b) Qofka laga doonayo in lacag laga soo celiyo uu caadi ahaan deggan yahay.
   t) Halka uu ku yaallo xafiiska Wasaaradda ay saaran tahay mas'uuliyadda aasaasiga ah ee arrimaha Cashuuraha ee qofkaas. Wasaaradda ayaa kala dooran karta labada goobood midka suurtagalka ah.
2. Habraacyada dacwad ku soo oogidda ee la xiriira fal-dembiyeed uu tilmaamayo xeer dakhli waa in laga bilaabaa, lagu dhegeystaa laguna dhammeeyaa maxkamadda awoodda u leh ee ugu dhow ama Maxkamadda degmada uu: -
   b) Qofka dacwad fal-dembiyeedka lagu soo oogayo caadi ahaan deggan yahay.
   t) Uu ku yaallo xafiiska Wasaaradda ay saaran tahay mas'uuliyadda aasaasiga ah ee arrimaha cashuuraha ee qofkaas.
   j) Lagu hayo qofka inta laga gaarayo dacwad ku soo oogidda.
   x) Uu fal-dembiyeedku ka dhacay.
3. Dacwad oogaha ayaa kala dooran kara goobaha suuragalka ah ee ku xusan farqada 2-aad ee qodobkan.

## Qodobka 107-aad
## Imaanshaha Sarkaal Dakhli Maxkamadda Horteeda

Sarkaal dakhli ayaa isagoo ka wakiil ah Wasaaradda hor imaan kara maxkamad ay ka socoto dacwad Wasaaraddu daraf ka tahay oo la xariirta xeer dakhli. Sarkaalka Dakhliga waa in uu arrintan oggolaansho qoraal ah uga haystaa Wasaaradda.

## Qodobka 108-aad
## Dukumintiyada Caddeyn ahaan Loo Aqbali Karo

1. Dukumintiyadan ayaa caddeyn ahaan loogu aqbali karaa, iyadoo aan loo yeerin qofkii diyaariyey ama saxiixay dukumintiyada: -
   b) Dukuminti la xiriira arrimaha cashuureed ee cashuur bixiye oo uu gacanta ku soo dhigey sarkaal dakhli, isagoo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan xeer dakhli.
   t) Caddeynta la xiriirta arrimaha cashuurta ee qof siiyey sarkaal dakhli, isagoo ku dhex jira gudashada waajibaadkiisa uu tilmaamayo xeer dakhli.
   j) Nuqulka, turjumaadda ama qayb laga soo qaatey dukuminti ama caddeynta lagu xusey faqradda 1-aad xarfaha (b) ama (t).
2. Aqbalidda dukumintiyada ee ay tilmaameyso faqradda 1-aad saameyn kuma yeelanayaan in qof lagu qalqaaliyey bixinta dukumintiga, nuqulka ama qaybta laga soo qaatey caddeynta taasoo lagu sababeynayo in uu qofka aaminsanaa in:-
   b) Wasaaraddu in ay xalliso bilaabidda ama dembi ku soo oogista arrimahaas.
   t) Go'aanka Wasaaradda ee la xiriira in ay xalliyaan billaabidda ama dacwad ku soo oogista arrimaha waxaa saamayn ku yeelan doona sida uu qofku u qirto in uu ku kacay fal-dembiyeedka ama uu si buuxda u fududeeyo dembi baarista.
3. Faqradaha 1-aad iyo 2-aad ayaa la raacayaa iyadoo waxba loo dhimayn haddii ay jiraan xeerar ka hor imaanaysa. Tani ma xaddideyso caddeyn u qaadashada dukumintiga, nuqulka, qaybta laga soo qaatey caddeynta ee uu tilmaamayo xeer kale.

## Qodobka 109-aad
## Culayska Caddeynta

1. Culayska caddeyntu waxay saaran tahay Cashuur bixiyaha ama qofka sameynaya diidmada in uu u hoggaansamey sida ay qabaan xeerarka dakhliga. Tani waxay khusaysaa habraacyada racfaanka loo cuskanayo ee cutubka 6-aad, taasoo lagu soo celinayo Cashuur si waafaqsan xeer dakhli ee la xiriira soo rogidda ganaax madani ah si waafaqsan xeer dakhli ama hirgelinta waajib si waafaqsan rahan ay haystaan maamulka dakhligu.
2. Qodobka 54-aad wuxuu tilmaamayaa caddeyn kama dambeys ah oo sheegeysa in go'aan cashuureed la gaarey iyo in ay tahay caddeyn hordhac ah oo sax ah. caddaymaha soo socda ayaa caddeyn hordhac ah oo sax ah oo waafaqsan habraacyada/hawsha lagu xusey faqradda 1-aad ama la xiriira fal-dembiyeed uu tilmaamayo xeer dakhli: -
   b) Arrimaha ay qoraal ku caddeeyaan Wasaaraddu iyagoo adeegsanaysa awooddooda rasmiga ah in: -
      i. Magaca iyo cinwaanka qofka iyo qaddarta lacagta iyo nooca cashuurta laga rabo qofka.
      ii. In qof uu bixin waayey in uu xareeyo dukuminti, diiwaangeliyo ama si kale ugu hoggaansami waayo waajib uu saarey xeer dakhli.
      iii. In qofku uu yahay sarkaal dakhli iyo in qabashada hawlo gaar ah loogu oggolaadey xeer dakhli iyo in hawlaha gaarka ah ee sarkaalka dakhliga loo qabtey si waafaqsan oggolaanshahaas.
      iv. In dukuminti la daabacay uu yahay nuqul ama turjumaad sax ah ee dukuminti kale, oo ay ka mid yihiin dukuminti elektaroonik ah ama dukuminti sumado ka sameysan ama ku qoran Af-qalaad.
      v. Qiimaha alaabaha.
   t) Arrimaha ay qoraal ku xaqiijiyaan saraakiisha Dawladda Puntland, iyagoo fulinaya waajibaadkooda rasmiga ah.

j) Arrimaha uu qoraal ku xaqiijiyo sarkaal dawladeed oo ajnebi ah isagoo fulinaya waajibaadkiisa rasmiga ah.

x) Waxyaabaha ka soo hara alaabo loo qabtey si waafaqsan xeer dakhli, caddayn waxyaabaha ku jira 10% alaabtaasi.

## Qodobka 110-aad
## Go'aamada Cashuuraha iyo Saameynta Dacwadaha

1. Go'aan Cashuureed ma laalayaan mana saameynayso: -
   b) Bilaabidda dacwad looga soo qaadayo cashuur ama la xiriirta fal-dembiyeed uu dhigayo xeer dakhli.
   t) Iyadoo sabab looga dhigayo in Wasaaraddu ay lacag ugu beddelaan dacwad ku qaadid fal-dembiyeed sida uu dhigayo Qodobka 103-aad.
2. In qofku uu bixiyo rahan/damaanad in loo hoggaansamayo xeer dakhli ma noqoneyso difaac la isaga difaaco dacwad cashuur baaqatey lagaga soo qaadayo ama mid fal-demibyeed uu tibaaxay xeer dakhli.

## CUTUBKA 12-aad
## GUNAANNAD
## Qodobka 111-aad
## Xeer Nidaamiye

Wasiirka Wasaaraddu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro xeer-nidaamiye, wareegtooyin, hagayaal iyo tilmaamo wax lagu saxayo, laguna toosinayo oo aan ka hor-imaanayn qodobada xeerkan.

## Qodobka 112-aad
## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.

## Qodobka 113-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

**Foomka Soo Gudbinta Warbixinada Wasaaradaha/Hay'adaha Dawladda Oct, 2025**

| | |
|---|---|
| 1. Magaca Wasaradda/Hay'addda | **Bangiga Dawladda Puntland** |
| 2. Magaca qofka Soo Gudbinaya warbixinta | **Cabdirsaaq Warsame Seeraar** |
| 3. Xilka : | **Gudoomiyaha Bangiga Dawladda Puntland** |
| 4. Taariikhda soo Gudbinta: | **6th October 2025** |
| 5. Qorshaha u degnasaa Wasaaradda/Ha'adda | 1. Qabashada Shirwaynaha Bangiyada iyo Maaliyadda Puntland (1st Puntland Banking & Finance Conference)<br>2. Dhameystirka Daladda Bangiyada Gaarka ah (Puntland Banks Association – PBA)<br>3. Horumarinta Dhismaha Laanta Qardho |
| 6. Guulaha laga Gaaray Waxqabadkii Qorsheysnaa | 1. **Qabashada Shirwaynaha Bangiyada iyo Maaliyadda Puntland (1st Puntland Banking & Finance Conference)**<br><br>Bangiga Dawladda Puntland wuxuu qabtay **Shirwaynihii 1aad ee Bangiyada iyo Maaliyadda Puntland – 2025**, kaas oo lagu qabtay magaalada Garoowe. Shirwaynahani wuxuu ahaa madal heer sare ah oo ay isugu timid dhammaan qaybaha muhiimka ah ee nidaamka maaliyadeed ee Puntland, oo ay ku jiraan bangiyada gaarka loo leeyahay, hay'adaha dawladda, ururada ganacsatada, iyo khubaro caalami ah oo dhinaca maaliyadda ah. |